CABDISACIID .iyo BAYLINTA BUUQA



MUXAMMAD YUUSUF

"*Raggu qaar daliillada sharciga waa dacniyayaaye,*
Intii daalimiinoo ku wacan duminta khayraadka,
Inkastooy dad kiiska hor wadaan oo la daba joogo,
In ceebtoodu daahir dhakhsaa iga daweyneysa."

–CISMAAN YUUSUF KEENADIID.

CABDISACIID IYO BAYLINTA BUUQA

CABDISACIID iyo BAYLINTA BUUQA

MUXAMMAD YUUSUF

GARANUUG

Garanuug

Xuquuqda © Muxammad Yuusuf 2022
Xuquuqda oo dhan way dhowran tahay. Buuggan ama qayb ka mid ah lama daabaci karo, lamana tarjuman karo la'aanta idan qoran oo laga helo qoraha iyo faafiyaha.

Dhigaalka, naqshadaynta, iyo qaabeynta jaldiga:
Muxammad Yuusuf.

Copyright © Mohammed Yusuf 2022
All rights reserved. No part of this publication may be reproduced, stored in any retrieval system, or transmitted in any form or by any means, including photocopying, recording, or other electronic or mechanical methods, without the prior written permission of the author and publisher.

Email icon created by IconMark - Flaticon.
Cover image by AmberShadow from Pixabay.

Typesetting and cover design by Mohammed Yusuf.

www.garanuug.com
info@garanuug.com
garanuugbuugaag@gmail.com


بسم الله الرحمن الرحيم

وَاللَّهُ يُرِيدُ أَن يَتُوبَ عَلَيْكُمْ وَيُرِيدُ الَّذِينَ يَتَّبِعُونَ الشَّهَوَاتِ أَن تَمِيلُوا مَيْلًا عَظِيمًا ﴿٢٧﴾

Alle wuxuu doonayaa in uu idin ka tawbad aqbalo, kuwa rabitaankooda raacayaana waxay doonayaan in aad leexataan leexasho weyn.

An-Nisaa': 27.

HIBEYN

Ummadda Soomaaliyeed ee diinteeda jecel.

SOOGAABISYO

SWT	*Subxaanahuu wa tacaalaa.*
SCW	*Sallallaahu calayhi wasallam.*
CS	*Calayhis salaam/ Calayhas salaam.*
RC	*Radiyallaahu canhu/* *Radiyallaahu canhaa/* *Radiyallaahu canhum.*
AHUN	*Alle ha u naxariisto.*
HALKUUN	*Halkaa uun ka eeg.*

TUSMO

Hibeyn ix

Koow 1
Labo 17
Saddex 37
Afar 71
Shan 111

Gunaanad 133

وَلَوِ اتَّبَعَ الْحَقُّ أَهْوَاءَهُمْ لَفَسَدَتِ السَّمَاوَاتُ وَالْأَرْضُ وَمَنْ فِيهِنَّ ۚ
بَلْ أَتَيْنَاهُمْ بِذِكْرِهِمْ فَهُمْ عَنْ ذِكْرِهِمْ مُعْرِضُونَ ﴿٧١﴾

Haddii xaqu raaco doonistooda, waxaa fasaadaya samooyinka, dhulka, iyo inta ku dhex jirta, waxaanse u keennay xusuusintoodi—iyaguna xusuusintoodi way ka sii jeesanayaan.

Al-Mu'minuun: 71.

Buuggan yar waxaa lagu ururiyay dhawr maqaal oo ka tirsan taxanaha Dhambaalka Jimcaha, waxayna ku saabsan yihiin gorfaynta buugga *Siyaasad Aan Sixir Lahayn: Diin iyo Dowlad* ee uu qoray Cabdisaciid Cabdi Ismaaciil, soona baxay sannadkan 2021.

“Ilaahii makhluuqoo dhan iyo, dunidan meegaaray,
Muslinnimo kolkuu soo dejay, ee Maxamed soo saaray,
Ee magaca aan sheeganiyo, midabka noo yeelay,
Ee uu madow nooga dhigay, amase maariinka,
Ee uu mabada'a noogu xidhay, muuminnimo khaas ah,
Wallee inuusan meeqaan xille iyo, meel xun noo dirine,
Ma maroorto suu nala damcay, ee way macaan tahaye,
Mana moogin tuu mudan yahee, mahadnaq weeyaane,
Isagaa Macbuudkii ah oon, magangalaynaaye,
Mana jiro wax kale oo maslaa, muran la'aantiiye,
Rabbigay mid weeye e, kuwii shan u malaynaayey,
Kol haddaanay taanadii maqlayn, Maxamed noo sheegay,
Muraad kama galayno e, sidaa ha iska moodeene.”

—Dhoodaan: Ha Midowdo.

DHAMBAALKA JIMCAHA – 36



09 Rabiicul Awal 1443
15 Oktoobar 2021

KOOW

Dhawrka dhambaal ee soo socda waxa aan ku gorfayn doonaa buugga *Siyaasad Aan Sixir Lahayn: Diin iyo Dowlad* ee uu qoray Cabdisaciid Cabdi Ismaaciil, soona baxay sannadkan 2021.

Buugga waxaa lagu ururiyay maqaallo uu qoraagu xilliyo kala duwan qoray, sida uu qoraagu sheegayna "Maqaalladan waxaa mideeya mowduuca ay giddigood ka hadlayaan oo ah waxa loo yaqaan 'calmaaniyadda', ama kala duwidda diinta iyo dowladda." [Hordhac, b.ix]

Qoraallada buuggani waa qayladhaan iyo dhiillo uu shacabka Soomaaliyeed kula soo dhex dhacayo. Qoraaga waxaa dhibtay oo uu u dulqaadan waayay sida aynu asaaggeen uga hadhnay. Wuxuu ka xanaaqaa aragtida siyaasi ku hadlaya ereyo wacdi diineed ah. Waxa uu ka gubtaa diin lagu xusay dastuurka dalka. Qoraagu markii uu dhakhtariyay cudurka ina haya, waxaa u soo baxday in aynu sixran nahay oo aynu diin ku sixran nahay. Sidaas awgeed, waxa uu leeyahay dawadeennu waa in sixirkaa la furaa. Waxa uu inagu furdaaminayaa wax u dhigma khuraafaadkii

qawlaysatadii dadka u qori jiray Faataxo bilaa bisin ah iyo aayado loo qoray gadaal gadaal! Wuxuuna leeyahay ugu yaraan haddii sixirka la wada furi waayo, dhanka siyaasadda iyo fagaaraha guud xoogga ha la saaro, qofku shakhsi ahaan haba iska sixranaadee. Yacnii, diinta (sixirka) shakhsi ahaan ha ugu dhaqmee.

Waxa uu dooddiisa ku xoojinayaa inuu wanaaggeenna iyo maslaxaddeenna ka shaqaynayo oo uu inoo naseexaynayo, bilowga hore ee buuggana waxa uu ku qoray aayaddan:

إِنْ أُرِيدُ إِلَّا الْإِصْلَاحَ مَا اسْتَطَعْتُ ۚ وَمَا تَوْفِيقِي إِلَّا بِاللَّهِ ۚ عَلَيْهِ تَوَكَّلْتُ وَإِلَيْهِ أُنِيبُ

Waxaadba ku xusuusanaysaa:

وَقَاسَمَهُمَا إِنِّي لَكُمَا لَمِنَ النَّاصِحِينَ

Tolow yuu ahaa kii yidhi!

Cabdisaciid waxa uu innagu waaninayaa in aynu diinta iyo siyaasadda kala saarno oo aynu calmaaniyad ku dhaqanno, “Buuggu waxa uu ku doodayaa in calmaaninimada dowladdu ay kaalin mug leh ka qaadan karto dowlad wanaagga, wuxuuna sharraxayaa macnaha calmaaniyadda iyo sababta loogu baahday.” [Hordhac, b.ix]

Dhibta qoraagu la kulmay ayaa noqotay in uu waayay meel qumman oo uu dood loo-qaateen ah ku tiiriyo, ka dibna uu doorbiday taladii madaxweynihii hore ee Maraykanka, Haari Turuuman ee ahayd, "Haddaadan qancin karin, wareeri ("If you can't convince them, confuse

them." - Harry S. Truman.)" Hadda Cabdisaciid dood uu dadka ku qanciyo markii uu waayay, ayuu buuq labo jaldi inoogu sameeyay. Ninku dhib badanaa! Qol madow buu rabaa in uu inoogu akhriyo qoraal baal madow ku qoran oo khad madow lagu qoray.

Waa buuq calmaaniyiinta kale loogu sheegayo in aysan keligood ahayn, welina dad ka sii nool yihiin ee ay sabraan!

Haddii baaqii Nebigu SCW ahaa: Dhaha laa ilaaha illallaah aad liibaantaane (قولوا لا إلَهَ إلَّا اللَّهُ تُفلِحوا), Cabdisaciid baaqiisu waa "Ha la idiin duceeyee kala duwa diinta iyo dowladda." [b.51].

Bil-saddex buu rabaa inuu innagu raro oo aynu ilayskeeda geeddi dheer oo guurayn ah ku galno. Laakiin "Bil-saddex reerkaagana waa kaa kaxaysaa, reer kalana kuuma geyso."

Fikradihiisa in badan waa wixii ay muddo dheer ay qorayeen Masaaridii isreergalbeedaysay ee Masar ka dhigtay calmaaniyad. Haddana waynu aragnaa halka Masar joogto. Guushii la sheegayay kuma aysan gaadhin, shareecadiina waa laga tuuray. Waaba dawacadii la sheegi jiray!

Aan ka bilowno maqaalka labaad ee cinwaankiisu yahay "2. Siyaasad Aan Sixir Lahayn: Ha La Idiin Duceeyee Kala Duwan Diinta Iyo Dowladda" ee bogagga 51-75, kaas oo nuxurkiisa uu qoraagu inoogu soo koobayo:

> "Si kastaba ha ahaatee, maqaalkani wuxuu si fudud digniin uga bixinayaa in aan la isku khaldin ajendaha wadaaddada ee ku salaysan in la isku walaaqo diinta iyo

> siyaasadda, iyo halganka bulshadu ugu jiro sidii ay ku heli lahayd in ay gaarto nolol aayo leh oo u qalanta in aadami ku noolaado, ayna ku dheehan tahay caddaalad, sinnaan iyo bulsho xor ah oo dhexdeeda ka nabdoon, dunida inteeda kalana kula nool nabad iyo iskaashi." [b.54]

Qoraagu waxa uu inoo qeexayaa waxa ay '*siyaasad*' iyo '*diin*' kala yihiin, waa sida uu u arkee. "Siyaasadi waa maamul, diinna waa caqiido. Siyaasadi waa samaynta wixii suurogal ah, diinna waa samaynta wixii Eebbe raalli gelinaya." [b.55]

Qeexitaannada ereyadu ma aha wax dhankii la doono lala aadi karo ee waa in ay tixraac leeyihiin oo ay meel salka ku hayaan. Labadan qeexitaan midna sax ma aha. Diintu ma aha caqiido keli ah. Haddii ay sidaa tahay falalka diintu ina fartay oo idil looma baahdeen. Caqiido haddii ay diintu ku kooban tahay, salaad, soon, sako, iyo xaj midna lama sameeyeene Alle ayaa qalbiga laga rumayn lahaa. Midda kale, maxaa diidaya in waxa Alle raalligalinayaa noqdo waxa suuragal ah? Alle ma wax aan suuragal ahayn buu raalligalintiisa ku xidhay? (لَا يُكَلِّفُ اللهُ نَفْسًا إِلَّا وُسْعَهَا) Wax aan Alle raalligalinayn sidee ayuu ugu dhiirran karaa qofka Muslinka ahi? Isla maqaalkan bogga ugu horreeya qoraagu waxa uu ku qoray, "ma jiro qof miyir qaba oo ku dhiirran kara in uu ku xadgudbo qaanuun uu rumaysan yahay in Eebbe u qoray." [Hoosqor 79, b.52]. Laakiin sida muuqata isagaa ku dhiirranaya.

Wixii suuragal ah in la sameeyo waa arrin ay diintu jidaysay:

فَاتَّقُوا اللَّهَ مَا اسْتَطَعْتُمْ وَاسْمَعُوا وَأَطِيعُوا وَأَنفِقُوا خَيْرًا لِّأَنفُسِكُمْ ۗ
وَمَن يُوقَ شُحَّ نَفْسِهِ فَأُولَٰئِكَ هُمُ الْمُفْلِحُونَ ﴿١٦﴾

At-Taqaabun: 16.

Shanta qaacido ee diinta asaaska u ahna waxaa ka mid ah:

المشقة تجلب التيسير.

Laakiin qoraagu weedhaa diinta kama soo qaadan e, waxa uu u adeegsanayaa qaab ka duwan qaabka diintu u jidaysay.

Mar kale waxa uu yidhi: “Dowladdu waxay raalli gelisaa shacabka, diintuna waxay raalli gelisaa Abuuraha. Siyaasadda iyo dowladnimadu waa samaynta wixii suurogal ah, diintuna waa in Alle la addeeco abuurkiisan loo turo. Dowladdu waxay u xilsaaran tahay in muwaadiniintu ay ifka janno ku helaan, halka diintu ay u xilsaaran tahay in muuminiintu ay aakhiro janno galaan. Eebbe dadka mid mid buu u abuuray, mid midna wuu u xisaabinayaa.” bb.23-24]

Odhaahdan oo uusan xusin cidda tidhi, waa hadal uu leeyahay Otto van Bismarck oo qayb weyn ka qaatay dib u midayntii Jarmalka, madaxna ka ahaa Jarmalka ilaa 1890-kii.

Marka uu rabo in uu erey diido, waxa uu leeyahay “Erayga dowlad quraanka iyo sunnada midkoodna kuma soo aroorin. Sideedabana aqoon-yahanno badani waxay

rumaysan yihiin in erayga “Dowlad” uu qaamuuska afka Carabiga ku soo biiray wixii ka danbeeyey qarnigii shanaad ee hijradii nebiga (CSW)... Sida la ogyahayna ayaadaha [sidaa] oranaya: “washaawirhum Fil-Amri.” Iyo “Wa amruhum Shuuraa Beynahum.” Kuma soo degin munaasabad la xiriirta xukun iyo dowlad.” [b.55]

Aayadda hore waxa ay ku jirtaa suuradda Aala-Cimraan waxayna ku soo degtay jabkii Uxud. Markii laga war helay in duullaan ku soo socdo, ayaa Nebigu SCW la tashaday saxaabadii. Waxa uuna soo jeediyay in maadaama laga tiro badan yahay ay magaalada dhufays ka dhigtaan ee aysan cadowga bannaanka ugu bixin. Saxaabo jihaad u xamaasadaysnaa, oo aan Beder ka qaybgalin, ayaa ku celceliyay in la baxo oo sidii Beder cadowga loo wajaho. Nebiguna SCW taladoodi ayuu u daayay markii laga batay oo waa tii la baxay. Markii bilowgiiba guushu Muslimiinta raacday waa tii kooxdii buurta saarnayd amarkii la faray ay ka baxeen ee halkaa dhabarjabinta lagaga sameeyay Muslimiintii. Intaa ka dib ayaa Alle uu Nebigu SCW ku adkaynayaa in uu u debecsanaado saxaabada oo uu arrimaha kala tashado. Waa amar, amarkuna wuxuu muujiyaa waajibnimo.

فَبِمَا رَحْمَةٍ مِّنَ اللَّهِ لِنتَ لَهُمْ ۖ وَلَوْ كُنتَ فَظًّا غَلِيظَ الْقَلْبِ
لَانفَضُّوا مِنْ حَوْلِكَ ۖ فَاعْفُ عَنْهُمْ وَاسْتَغْفِرْ لَهُمْ وَشَاوِرْهُمْ فِي الْأَمْرِ ۖ
فَإِذَا عَزَمْتَ فَتَوَكَّلْ عَلَى اللَّهِ ۚ إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ الْمُتَوَكِّلِينَ ﴿١٥٩﴾

Aal-Cimraan: 159.

Aayadda labaadna waa tilmaan ay leeyihiin Muslimiintu in ay arrimahooda wadatashi ku xalliyaan. Siyaasad iyo wax kasta oo kale ayaana soo galaya.

فَمَا أُوتِيتُم مِّن شَيْءٍ فَمَتَاعُ الْحَيَاةِ الدُّنْيَا ۖ وَمَا عِندَ اللَّهِ خَيْرٌ وَأَبْقَىٰ
لِلَّذِينَ آمَنُوا وَعَلَىٰ رَبِّهِمْ يَتَوَكَّلُونَ ﴿٣٦﴾ وَالَّذِينَ يَجْتَنِبُونَ كَبَائِرَ الْإِثْمِ
وَالْفَوَاحِشَ وَإِذَا مَا غَضِبُوا هُمْ يَغْفِرُونَ ﴿٣٧﴾ وَالَّذِينَ اسْتَجَابُوا لِرَبِّهِمْ
وَأَقَامُوا الصَّلَاةَ وَأَمْرُهُمْ شُورَىٰ بَيْنَهُمْ وَمِمَّا رَزَقْنَاهُمْ يُنفِقُونَ ﴿٣٨﴾

Waxa Alle agtiisa yaalla ayaa u wanaagsan kuwa Rabbigood ajiibay, ee salaadda oogay, ee arrintoodu tahay wadatashi dhexdooda ah, wixii aan ku irsaaqnayna bixinaya.

Ash-Shuuraa: 36-38.

Dagaal lagugu soo qaaday oo aad ku jabtay natiijadii ka dhalatay sidii aad u maarayn lahayd “xukun iyo dowlad” ka weyn miyaa jirta?

Haddii uu Bismaark soo xigtay, muxuu ku illaaway Kaarl von Kalaawswitz markii uu lahaa odhaahda caanka ah ee tidhaahda: dagaalku waa siyaasaddii oo marin kale lagu raadinayo.

Ereyga calmaaniyad marka uu u raadinayo qiil uu kaga leexiyo in Galbeedka laga soo dhoofiyay waxa uu sheegayaa in uu adeegsaday nin Carab ahaa qarnigii shanaad ee hijrada, kamana raadin Qur’aan iyo sunne, sida ereyga dawlad!

Qoraa Cabdisaciid waxa uu leeyahay,

> "Dhab ahaantii waxaa la oran karaa muslimiintu saacaddii ay nebiga aaseen/duugeen ayay waxay la duugeen in badan oo ka mid ah qiyamkii islaamka oo caddaaladda, sinnaanta iyo xorriyaddu ay ugu horreeyaan. Si kasta ha ahaatee, muslimiintu qarniga 21-aad baahi adduunyo iyo mid aakhiro toona uma qabaan in dib loogu celiyo xukunkii boqorrada." [b.58]

Halkan qoraagu waxa uu inoo sheegayaa in markii Nebiga SCW la aasay, ay saxaabadii ka tageen qiyamkii Islaamka oo ay Nebiga SCW la duugeen caddaaladdii, sinnaantii, iyo xorriyaddii, booskoodiina ay ku beddesheen lidkoodi. Dadka uu ka hadlayaa waa saxiibadii Rasuulka SCW ee Alle yidhi radiyallaahu canhum (Alle ayaa ka raalli noqday). Waa saxaabadii ay ku jireen kuwo badan oo bishaaradii Jannada haysta. Abuu Bakar, Cumar, Cusmaan, Cali; khulafadii hanuunsanaa, ahlu Beder, ahlu Baycatu Ridwaan… ayuu ina leeyahay caddaaladdii iyo sinnaantii ayay Nebiga SCW la aaseen!

Waa wax aad loo la yaabo, laakiin isagaaba isla yaabi doona oo mar dhow isla raggan soo daliishan doona intuu is-illaawo, waana caadadiisa.

Marka uu leeyahay "xukunkii boqorrada" waxa uu ka warwareegayaa in uu dhaho ku dhaqanka shareecada, taas oo ah marinhabaabin, maadaama aynaan rabin xukun boqorro.

Haddaba, diinta iyo dawladda in la kala saaro maxaa dheef ku jirta? Qoraagu ayaa inooga jawaabaya:

> "Diinta iyo dowladda oo la kala soocaa waxay shacabka fursad u siinayaan in ay madaxdooda doortaan, isla markaana la xisaabtamaan." [b. 59.]

Halkaa waxa aan ka fahmaynaa in la xisaabtanka madaxda iyo doorashadooduba ay yihiin wax Muslimiinta ka maqnaa kuna cusub, oo ay calmaaniyaddu ku soo biirinayso. Laakiin isla qoraaga ayaa inoo sheegaya in Muslimiintu madaxdooda dooran jireen, isla xisaabtanna uu jiray:

> "Khudbadii u horraysey ee Abuu Bakar u jeediyey maqaawiirtii carbeed ee caanaha ku shubtay ama caleemo saartay wuxuu ku yiri: "Intaa ka dib, dadyahow waad I doorateen mana ahi kan idiinku kheyr badan, ee haddii aan wanaajiyo I taageera, haddaan gafana I toosiya." Khudbadihii Cumar iyo Cali ay ka jeediyeen munaasabadihii caleemo saarkooduna waxay la mid ahaayeen midda Abuubakar." [b.53]

> "Geeridii nebiga ka dibna, muslimiintu waxay hoggaankooda u doorteen si la mid ah sidii ay islaamka ka hor u dooran jireen. Tusaale ahaan, muslimiintu Abuu Bakar (RC) waxay u doorteen si la mid ah sidii awoowayaashood islaamka ka hor u dooran jireen ugaaska beesha. Oo Abuu Bakar waxaa doortay gole guurti oo ka kooban maqaawiirtii beelaha Ansaar iyo Muhaajiriin. Doorashada Abuubakarna ma ahayd mid si sahal ah ku timid balse waxay dhacday loollan, isjiidjiid iyo gorgortan badan ka dib." [bb.56-57]

Halkan in yar oo marinhabaabin ah ayuu hoosgaliyay si uu u yidhaahdo doorashadu ma ahayn wax Islaamka ku koobnaa. Laakiin su'aashu waxay tahay, waa kee qabiilka Carbeed ee dooran jiray nin aan tolkood ahayni in uu madax u noqdo? Ansaar iyo Muhaajiriin xaggay ku ahaayeen beelo? Bilaal oo Xabashi ah iyo Suhaybkii Ruumiga la odhan jiray, iyo Salmaankii Faarisiga ahaa, iyo Qurayshigii reer Maka iyo Abuu Darkii Qifaariga ahaa miyaa hal beel isku ahaa? Ansaar iyo Muhaajiriin miyaysan ahayn labo magac oo Islaamku keenay?

Aan ku noqonno arrintii doorashada:

> "Doorashadii Cumar bin Khaddaab, Cusmaan bin Cafaan, iyo Cali bin Abii Daalib-na (RC) nuxur ahaan waxba ugama duwanayn habkii loo doortay Abuu Bakar." [b.57]

> "Muslimiintu iyaga ayaa doortay Abuu Bakar, Cumar, Cismaan iyo Cali, laakiin wixii intaa ka dambeeyey muslimiinta waxaa u talinayey rag xukunka maroorsaday iyaga oo ku doodaya in ay yihiin hooskii Eebbe oo dhulka ka muuqda." [b.58]

Haddii uu sidaa qirsan yahay, muxuu u diidayaa in la yidhaahdo boqorradan xukunka maroorsaday inaga daaya oo aynu ku dayanno khulafadii hanuunsanaa oo aan madaxdeenna dooranno lana xisaabtanno? Sow Nebigu SCW inama farin in aynu ku dayanno? Markaa maxaynu calmaaniyad uga baahan nahay? Arrintu doorasho iyo

xisaabtan uguma koobna e, wax kaluu diiddan yahay. Waxa uu yidhi:

> "Diinta iyo dowladda oo la isku walaaqana … madaxdu waxay wakiil ka noqonayaan Eebbe, oo ay ku hadlayaan magaciisa, isla markaana fulinayaan dooniddiisa. Run ahaantiina ma jirto cid la xisaabtami karta madax Alle matalaysa. Taariikhda islaamkuna waxay si cad u muujinaysaa in muslimiintu aysan weligood arag madax ay la xisaabtamaan, laakiin ay wax badan arkeen madax sheegata in Ilaah la xisaabtamayo, dhabtiise naftooda oo keli ahi ay la xisaabtanto." [b. 59]

Inay fuliyaan doonidda Alle maxaa ku jaban? Sow ma aha waajibka saaran qof kasta oo Muslim ah? Midda kale, marka uu leeyahay "Taariikhda islaamkuna waxay si cad u muujinaysaa in muslimiintu aysan weligood arag madax ay la xisaabtamaan," Sow kii dhawr bog ka hor qoray:

> "Khudbadii u horraysey ee Abuu Bakar u jeediyey maqaawiirtii carbeed ee caanaha ku shubtay ama caleemo saartay wuxuu ku yiri: "Intaa ka dib, dadyahow waad I doorateen mana ahi kan idiinku kheyr badan, ee haddii aan wanaajiyo I taageera, haddaan gafana I toosiya." Khudbadihii Cumar iyo Cali ay ka jeediyeen munaasabadihii caleemo saarkooduna waxay la mid ahaayeen midda Abuubakar." [b.53]

Buuggani waa iswada burintaas.

Taariikhdii qornayd ee gaal iyo Muslinba ka dheregsan yihiin ee ku saabsanayd isla xisaabtankii Muslimiinta iyo

madaxdooda inta uu iska indhatiro, ayaa waxa uu leeyahay:

> "Waa lagu dhiirran karaa wax-u-sheegga iyo dhaleecaynta madaxda magaca dadweynaha ku hadasha, isla markaana cadaab adduunyo wax ku ciqaaba, laakiin cidina kuma dhacdo dhaleecaynta mas'uuliin magac Alle ku hadlaya, isla markaana janno iyo cadaab aakhiro wax ku abaamarinaya. Sidaa darteed, haddii la doonayo in shacabku ay wax u sheegi karaan madaxda qaranka, waxaa lamahuraan noqonaya in marka hore madaxda dhulka la keeno, oo loo aqoonsado in ay shacabka wakiil ka yihiin." [b. 60]

Bal aan eegno.

Madax kale iska daaye, Nebi Maxamed SCW ayaa sidan Alle ula hadlay: arrintan waxba kuma lihid, Alle wuu ka tawbad aqbali karaa wuuna cadaabi karaa.

لَيْسَ لَكَ مِنَ الْأَمْرِ شَيْءٌ أَوْ يَتُوبَ عَلَيْهِمْ أَوْ يُعَذِّبَهُمْ فَإِنَّهُمْ ظَالِمُونَ ﴿١٢٨﴾

Aal-Cimraan: 128.

Mar kale rusushii Alle waa kuwii lahaa: waxaanu nahay bashar idin la mid ah awoodna uma lihin in aan la nimaadno wax aan Alle noo idmin.

قَالَتْ لَهُمْ رُسُلُهُمْ إِن نَّحْنُ إِلَّا بَشَرٌ مِّثْلُكُمْ وَلَٰكِنَّ اللَّهَ يَمُنُّ عَلَىٰ مَن يَشَاءُ مِنْ عِبَادِهِ ۖ وَمَا كَانَ لَنَا أَن نَّأْتِيَكُم بِسُلْطَانٍ إِلَّا بِإِذْنِ اللَّهِ

وَعَلَى اللَّهِ فَلْيَتَوَكَّلِ الْمُؤْمِنُونَ ﴿١١﴾

Ibraahiim: 11.

Markii mushrikiintii ku yidhaahdeen Nebiga SCW ku rumayn mayno ilaa aad noo dillaacisid ilo biyo ah, ama aad yeelatid beer timir iyo cinab ah oo aad u dillaacisid webiyo, ama aad samada soo dumisid, ama aad koox malaa'ig ah Alle ka soo kaxaysatid… ayaa Alle yidhi: waxaad ku tidhaahdaa, bashar la soo diray baan ahay!

وَقَالُوا لَن نُّؤْمِنَ لَكَ حَتَّىٰ تَفْجُرَ لَنَا مِنَ الْأَرْضِ يَنبُوعًا ﴿٩٠﴾ أَوْ تَكُونَ لَكَ جَنَّةٌ مِّن نَّخِيلٍ وَعِنَبٍ فَتُفَجِّرَ الْأَنْهَارَ خِلَالَهَا تَفْجِيرًا ﴿٩١﴾ أَوْ تُسْقِطَ السَّمَاءَ كَمَا زَعَمْتَ عَلَيْنَا كِسَفًا أَوْ تَأْتِيَ بِاللَّهِ وَالْمَلَائِكَةِ قَبِيلًا ﴿٩٢﴾ أَوْ يَكُونَ لَكَ بَيْتٌ مِّن زُخْرُفٍ أَوْ تَرْقَىٰ فِي السَّمَاءِ وَلَن نُّؤْمِنَ لِرُقِيِّكَ حَتَّىٰ تُنَزِّلَ عَلَيْنَا كِتَابًا نَّقْرَؤُهُ ۗ قُلْ سُبْحَانَ رَبِّي هَلْ كُنتُ إِلَّا بَشَرًا رَّسُولًا ﴿٩٣﴾

Al-Israa': 90-93.

Mar kale Alle waxa uu ku leeyahay Nebiga SCW: ku dheh waxaan ahay bashar idin la mid ah oo loo waxyoodo in ilaahiinnu yahay Ilaah keli ah...

قُلْ إِنَّمَا أَنَا بَشَرٌ مِّثْلُكُمْ يُوحَىٰ إِلَيَّ أَنَّمَا إِلَٰهُكُمْ إِلَٰهٌ وَاحِدٌ ۖ فَمَن كَانَ يَرْجُو لِقَاءَ رَبِّهِ فَلْيَعْمَلْ عَمَلًا صَالِحًا وَلَا يُشْرِكْ بِعِبَادَةِ رَبِّهِ أَحَدًا ﴿١١٠﴾

Al-Kahf: 110.

قُلْ إِنَّمَا أَنَا بَشَرٌ مِّثْلُكُمْ يُوحَىٰٓ إِلَيَّ أَنَّمَا إِلَٰهُكُمْ إِلَٰهٌ وَاحِدٌ فَاسْتَقِيمُوا إِلَيْهِ وَاسْتَغْفِرُوهُ ۗ وَوَيْلٌ لِّلْمُشْرِكِينَ ۝٦

Fusilat: 6.

Abuu Bakar RC hadalkiisi qoraagu isagaaba inoo soo dhigay. Cumar RC cidina isweydiin mayso halkuu ka taagnaa arrintan. Waa kii minbarka ka istaagay ee yidhi meherkii wuu qaaliyoobay, guurkiina wuu adkaaday, markaa waxaan xad u samaynayaa qiimaha meherka. Ka dib ayaa haweenay qabsatay iyada oo leh xaq uma lihid in aad faraha la gashid xaq Alle na siiyay, waxayna u soo daliishatay:

وَآتَيْتُمْ إِحْدَاهُنَّ قِنطَارًا

An-Nisaa': 20.

فقالت امرأة: ليس ذلك لك يا عمر، إن الله تعالى يقول: "وآتيتم إحداهن قنطارا ..." .... فقال عمر: إن امرأة خاصمت عمر فخصمته.

Warin kale waxaa ku jirtay in markii uu aayadda maqlay uu yidhi: Allow dembidhaafkaaga. Cid kastaa ka fahan fiican Cumar! Hadalkii intuu ku noqday buu yidhi qof walboow bixi waxaad rabtid!

فقال: اللهم غفرا، كل الناس أفقه من عمر. ثم رجع فركب المنبر فقال: إني كنت نهيتكم أن تزيدوا النساء في صداقهن على أربعمائة درهم، فمن شاء أن يعطي من ماله ما أحب.

Maanta dawladaha calmaaniga ah heerkaa ma joogaan, in siyaasaddooda la beddelaana wax sahlan ma aha.

Mar kale Cumar RC oo minbarka ka khudbaynaya ayaa nin hadalkii ka soo dhex galay oo yidhi Cumaroow waxba kaa dhegaysan mayno. Maxaa dhacay? Kulligayo waxaad na siisay min hal go' adiguna labaad wadataa oo caddaalad maadan samayn! Cumar wuxuu u yeedhay wiilkiisi oo sheegay in uu isagu kiisii siiyay aabbihii maadaama uu Cumar ahaa nin dheer oo laf weyn, hal go'na uusan ku filnayn.

Mar kale Cumar RC isaga oo khudbaynaya ayuu yidhi haddaan gefo i saxa, nin ag fadhiyay baa yidhi seeftaasaan kugu toosinaynaa! Maanta ciddii sidaa ku tidhaahda madaxweynaha Maraykanka sow FBI dabagali mayso!

“Ilaahii makhluuqoo dhan iyo, dunidan meegaaray,
Muslinnimo kolkuu soo dejay, ee Maxamed soo saaray,
Ee magaca aan sheeganiyo, midabka noo yeelay,
Ee uu madow nooga dhigay, amase maariinka,
Ee uu mabada'a noogu xidhay, muuminnimo khaas ah,
Wallee inuusan meeqaan xille iyo, meel xun noo dirine,
Ma maroorto suu nala damcay, ee way macaan tahaye,
Mana moogin tuu mudan yahee, mahadnaq weeyaane,
Isagaa Macbuudkii ah oon, magangalaynaaye,
Mana jiro wax kale oo maslaa, muran la'aantiiye,
Rabbigay mid weeye e, kuwii shan u malaynaayey,
Kol haddaanay taanadii maqlayn, Maxamed noo sheegay,
Muraad kama galayno e, sidaa ha iska moodeene.”

—Dhoodaan: Ha Midowdo.

DHAMBAALKA JIMCAHA – 37

16 Rabiicul Awal 1443
22 Oktoobar 2021

LABO

وَمِنَ النَّاسِ مَن يُجَادِلُ فِي اللَّهِ بِغَيْرِ عِلْمٍ وَلَا هُدًى وَلَا كِتَابٍ مُّنِيرٍ ﴿٨﴾

Al-Xaj: 8.

Sidii aynu qaybtii hore ku soo marnay, walow uu qoraagu diiddanaa ereyga "dowlad" oo uu yidhi Qur'aan iyo Sunne midna kuma jiro, haddana Nebiga SCW marka uu ka hadlayo waxa uu ina weydiinayaa: "Nebi Muxamed (SCW) ma nebi qura ayuu ahaa? Mise wuxuu ahaa madaxweyne Qura? Mise Nebi iyo madaxweyne wada jira? [b.60]".

Ereyga "*madaxweyne*" adeegsigiisu goormuu bilowday? Qur'aanka iyo sunnada ma laga helayaa?

Maxaa keenay su'aashan? Qoraagu waxa uu raadinayaa qaab uu u aaso hoggaamintii siyaasadeed ee Nebiga SCW. Waxa uu kala saarayaa labada erey ee hoggaamiye iyo

madaxweyne isaga oo ina leh hoggaamiyannimadu waa derejo ixtiraam lagu gaadho halka madaxweynannimadu ay tahay wax qasab iyo bajin lagu helo. Madaxweynayaasha Maraykanka iyo Faransiisku ma qasab iyo bajin bay ku yimaaddeen?

Qur'aanka iyo Sunnada ma laga helayaa labadan erey oo tilmaanaya Nebiga SCW? Qoraagu inooma sheegin. Laakiin markan oo kale arrimahaa isku ma hawlo maadaama ay arrintu u socoto dhankuu doonayay.

Waxa uu leeyahay: "Anbiyadii iyo Rusushii Eebbe oo dhamina dadyowgii rumeeyey waxay u ahaayeen hogaamiyeyaal. Caadi ahaanna, hoggaamiyenimadoodu ma ahayn mid dowlad iyo siyaasad shaqo ku leh, balse waxay ahayd hoggaamin xagga ruuxda ah oo ka dhalatay rumayn iyo okobonaan [b.61]."

Waa marka koowaad e, qoraagu ma wada arkin anbiyadii iyo rusushii Alle soo diray. Nebi Maxamed SCW oo uga war roonaana waxa uu inoo sheegay in Anbiyadu ay ahaayeen hoggaanka siyaasadeed ee reer Banuu Israa'iil:

كَانَتْ بَنُو إِسْرَائِيلَ تَسُوسُهُمُ الأَنْبِيَاءُ، كُلَّما هَلَكَ نَبِيٌّ خَلَفَهُ نَبِيٌّ، وإِنَّه لا نَبِيَّ بَعْدِي، وَسَتَكُونُ خُلَفَاءُ فَتَكْثُرُ، قالوا: فَما تَأْمُرُنَا؟ قالَ: فُوا بِبَيْعَةِ الأَوَّلِ، فَالأَوَّلِ، وَأَعْطُوهُمْ حَقَّهُمْ، فإِنَّ اللَّهَ سَائِلُهُمْ عَمَّا اسْتَرْعَاهُمْ.

Hadda ma cid baa rumaysanaysa in Nebi Saleebaan CS uusan ahayn hoggaamiye siyaasadeed? Ma cid caqli leh baa laga dhaadhicin karaa Nebi Maxamed SCW ma ahayn hoggaamiye siyaasadeed? Nebi Yuusuf CS miyuusan siyaasad shaqo ku lahayn markii uu maaliyadda Masar maamulkeeda hayay?

Dooddan macnadarrada ah iyo kuwo badan oo u dhigma ayaa tif ka ah buuggan.

Waxaa jirtay in markii Nebiga SCW lagu dhibay Makah ee uusan weli soodhoweyn ka helin Madiinah, uu marba la kulmi jiray qabiilooyinkii Carbeed madaxdoodi. Sida kutubta siirada qaarkood ku xusan, kuwo ayaa waxay soo jeediyeen: annagaa hoy iyo degaan ku siinayna oo ku difaacayna, bishardi in taladu nagu soo wareegto dabadaa oo markaad dhimatid aan annagu talada iyo hoggaanka qabanno. Nebigu SCW sow kama yeeleen haddii shaqadiisu ku kooban tahay "hoggaamin xagga ruuxda ah [b.61]"?

أن كندة قالت له: إن ظفرت تجعل لنا الملك من بعدك؟ فقال رسول الله صلى الله عليه وسلم: "إن الملك لله يجعله حيث يشاء". فقالوا: لا حاجة لنا فيما جئتنا به.

Qoraagu waxa uu leeyahay: "Qof ahaanna, waxay ila tahay in nebi Muxamed (SCW) uu muslimiinta u ahaa hoggaamiye diineed, laakiin aysan u arkayn inuu yahay madaxweyne dowladeed. Quraanka kariimku marar badan ayuu xusay xilka Eebbe u igmaday rasuulka oo ah inuu yahay dhanbaal-side shaqadiisu tahay inuu dadka gaarsiiyo farriinta Alle ee nuxurkeedu yahay in ay Eebbe caabudaan. Tusaale ahaan, aayadda 40aad ee Suurat Al-Axsaab oo qeexaysa tilmaanta iyo shaqada rasuulku waxay leedagay: "Muxamed ma ah Aabbaha mid raggiinna ka mid ah, balse waa rasuulkii Alle iyo kii u danbeeyey nebiyadooda." Laakiin si taa ka duwan, quraanku mar qurana nooma sheegin in nebigu uu yahay boqor ama hoggaamiye siyaasadeed [b.61]."

Haddii aayad aan meesha galin la daliishanayo, isla suuraddan aayaddeeda 6-aad waxay inoo sheegaysaa in xaasaskii Nebigu SCW ay hooyooyin inoo yihiin.

النَّبِيُّ أَوْلَىٰ بِالْمُؤْمِنِينَ مِنْ أَنفُسِهِمْ ۖ وَأَزْوَاجُهُ أُمَّهَاتُهُمْ ۗ وَأُولُو الْأَرْحَامِ
بَعْضُهُمْ أَوْلَىٰ بِبَعْضٍ فِي كِتَابِ اللَّهِ مِنَ الْمُؤْمِنِينَ وَالْمُهَاجِرِينَ إِلَّا أَن
تَفْعَلُوا إِلَىٰ أَوْلِيَائِكُم مَّعْرُوفًا ۚ كَانَ ذَٰلِكَ فِي الْكِتَابِ مَسْطُورًا ﴿٦﴾

Al-Axzaab: 6.

Waxaase yaab leh in suuradda uu daliishanayaa ay ku magacaaban tahay duullaankii gaashaanbuurtii ku soo duushay Muslimiintii xarunta ka dhigtay Madiinah iyaga oo rabay in ay dabargooyaan oo ay xididdada u siibaan inta aysan xoogaysan. Waxa uu ahaa duullaan siyaasad iyo isbahaysi ku dhisnaa oo lagu soo qaaday maamulkii Muslimiinta ee curdinka ahaa.

وَرَدَّ اللَّهُ الَّذِينَ كَفَرُوا بِغَيْظِهِمْ لَمْ يَنَالُوا خَيْرًا ۚ وَكَفَى اللَّهُ الْمُؤْمِنِينَ
الْقِتَالَ ۚ وَكَانَ اللَّهُ قَوِيًّا عَزِيزًا ﴿٢٥﴾ وَأَنزَلَ الَّذِينَ ظَاهَرُوهُم مِّنْ أَهْلِ
الْكِتَابِ مِن صَيَاصِيهِمْ وَقَذَفَ فِي قُلُوبِهِمُ الرُّعْبَ فَرِيقًا تَقْتُلُونَ
وَتَأْسِرُونَ فَرِيقًا ﴿٢٦﴾ وَأَوْرَثَكُمْ أَرْضَهُمْ وَدِيَارَهُمْ وَأَمْوَالَهُمْ وَأَرْضًا لَّمْ
تَطَئُوهَا ۚ وَكَانَ اللَّهُ عَلَىٰ كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرًا ﴿٢٧﴾

Al-Axzaab: 25-27.

Bogga uu aayadda ka soo xigtay waxa uu ku bilowdaa aayadda burinaysa dhammaan dooddiisa "xorriyadda" shakhsiga ku dhisan.

وَمَا كَانَ لِمُؤْمِنٍ وَلَا مُؤْمِنَةٍ إِذَا قَضَى اللَّهُ وَرَسُولُهُ أَمْرًا أَن يَكُونَ لَهُمُ الْخِيَرَةُ مِنْ أَمْرِهِمْ ۗ وَمَن يَعْصِ اللَّهَ وَرَسُولَهُ فَقَدْ ضَلَّ ضَلَالًا مُّبِينًا ﴿٣٦﴾

Al-Axzaab: 36.

Siddeed aayadood ka dibna, bogga xiga, waxaa ku xusan labo xukun oo guurka la xidhiidha oo ah shaqada ay calmaaniyaddu u diidayso diinta. Aayadahani waxay ka hadlayaan guur ansax ah iyo sida la yeelayo haddii furriin yimaaddo iyo cidda wax furaysa.

Aayadda 53-aad ee isla suuraddani waa aayaddii xijaabka waajibisay. Aayadda 59-aadna waa la mid.

Waa suuradda fadeexadaynaysa ee kashifaysa munaafaqiinta iyo camal xumadooda.

Haddaan iska dhaafno aayadaha kale ee sida cad u qeexaya in Nebigu SCW ahaa hoggaamiye siyaasadeed, waxaa inagu filan inta 'xukm' ay ku jirto.

فَلَا وَرَبِّكَ لَا يُؤْمِنُونَ حَتَّىٰ يُحَكِّمُوكَ فِيمَا شَجَرَ بَيْنَهُمْ ثُمَّ لَا يَجِدُوا فِي أَنفُسِهِمْ حَرَجًا مِّمَّا قَضَيْتَ وَيُسَلِّمُوا تَسْلِيمًا ﴿٦٥﴾

An-Nisaa': 65.

إِنَّا أَنزَلْنَا إِلَيْكَ الْكِتَابَ بِالْحَقِّ لِتَحْكُمَ بَيْنَ النَّاسِ بِمَا أَرَاكَ اللَّهُ ۚ وَلَا تَكُن لِّلْخَائِنِينَ خَصِيمًا ﴿١٠٥﴾

An-Nisaa: 105.

سَمَّاعُونَ لِلْكَذِبِ أَكَّالُونَ لِلسُّحْتِ ۚ فَإِن جَاءُوكَ فَاحْكُم بَيْنَهُمْ أَوْ أَعْرِضْ عَنْهُمْ ۖ وَإِن تُعْرِضْ عَنْهُمْ فَلَن يَضُرُّوكَ شَيْئًا ۖ وَإِنْ حَكَمْتَ فَاحْكُم بَيْنَهُم بِالْقِسْطِ ۖ إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ الْمُقْسِطِينَ ﴿٤٢﴾

Al-Maa'idah: 42.

وَأَنزَلْنَا إِلَيْكَ الْكِتَابَ بِالْحَقِّ مُصَدِّقًا لِّمَا بَيْنَ يَدَيْهِ مِنَ الْكِتَابِ وَمُهَيْمِنًا عَلَيْهِ ۖ فَاحْكُم بَيْنَهُم بِمَا أَنزَلَ اللَّهُ ۖ وَلَا تَتَّبِعْ أَهْوَاءَهُمْ عَمَّا جَاءَكَ مِنَ الْحَقِّ ۚ لِكُلٍّ جَعَلْنَا مِنكُمْ شِرْعَةً وَمِنْهَاجًا ۚ وَلَوْ شَاءَ اللَّهُ لَجَعَلَكُمْ أُمَّةً وَاحِدَةً وَلَٰكِن لِّيَبْلُوَكُمْ فِي مَا آتَاكُمْ ۖ فَاسْتَبِقُوا الْخَيْرَاتِ ۚ إِلَى اللَّهِ مَرْجِعُكُمْ جَمِيعًا فَيُنَبِّئُكُم بِمَا كُنتُمْ فِيهِ تَخْتَلِفُونَ ﴿٤٨﴾ وَأَنِ احْكُم بَيْنَهُم بِمَا أَنزَلَ اللَّهُ وَلَا تَتَّبِعْ أَهْوَاءَهُمْ وَاحْذَرْهُمْ أَن يَفْتِنُوكَ عَن بَعْضِ مَا أَنزَلَ اللَّهُ إِلَيْكَ ۖ فَإِن تَوَلَّوْا فَاعْلَمْ أَنَّمَا يُرِيدُ اللَّهُ أَن يُصِيبَهُم بِبَعْضِ ذُنُوبِهِمْ ۗ وَإِنَّ كَثِيرًا مِّنَ النَّاسِ لَفَاسِقُونَ ﴿٤٩﴾ أَفَحُكْمَ الْجَاهِلِيَّةِ يَبْغُونَ ۚ وَمَنْ أَحْسَنُ مِنَ اللَّهِ حُكْمًا لِّقَوْمٍ يُوقِنُونَ ﴿٥٠﴾

Al-Maa'idah: 48-50.

وَإِذَا دُعُوا إِلَى اللَّهِ وَرَسُولِهِ لِيَحْكُمَ بَيْنَهُمْ إِذَا فَرِيقٌ مِّنْهُم مُّعْرِضُونَ ﴿٤٨﴾ وَإِن يَكُن لَّهُمُ الْحَقُّ يَأْتُوا إِلَيْهِ مُذْعِنِينَ ﴿٤٩﴾ أَفِي قُلُوبِهِم مَّرَضٌ

أَمِ ارْتَابُوا أَمْ يَخَافُونَ أَن يَحِيفَ اللَّهُ عَلَيْهِمْ وَرَسُولُهُ ۚ بَلْ أُولَٰئِكَ
هُمُ الظَّالِمُونَ ﴿٥٠﴾ إِنَّمَا كَانَ قَوْلَ الْمُؤْمِنِينَ إِذَا دُعُوا إِلَى اللَّهِ وَرَسُولِهِ
لِيَحْكُمَ بَيْنَهُمْ أَن يَقُولُوا سَمِعْنَا وَأَطَعْنَا ۚ وَأُولَٰئِكَ هُمُ الْمُفْلِحُونَ ﴿٥١﴾
وَمَن يُطِعِ اللَّهَ وَرَسُولَهُ وَيَخْشَ اللَّهَ وَيَتَّقْهِ فَأُولَٰئِكَ هُمُ الْفَائِزُونَ ﴿٥٢﴾

An-Nuur: 49-52.

Qoraagu si uu qiil u raadsado waxa uu leeyahay “Kutubta siiraduna waxay noo soo tebiyeen arrimo badan oo si cad uga marag kacaya in nebi Muxamed (CSW) nebi ahaa, laakiin boqornimo uusan wax shaqo ah ku lahay[n]. Tusaale ahaan, buugta siiradu waxay qoraan dhacdo ay sidaan u soo tebiyeen: Ninbaa nebiga (SCW) wuxuu ugu yimid dan uu ka lahaa darteed, hase ahaatee markii uu nebiga hor istaagey, heybaddii nebigu waxay ku abuurtay xoogaa gole ka nax ah. Nebiguna isaga oo ninkaas argagaxa ka baabi’inaya ayuu wuxuu ku yiri: “is deji oo ogow in aanan boqor iyo jabbaar toona ahayn, balse aan ahay inan ay dhashay haweenay Qureesh ah oo Maka hilib hogaysan ku cuni jirtey.” [b.61]

Billaahi calaykum waxaasi daliil ma u noqonaysaa in Nebigu SCW uusan ahayn hoggaamiye siyaasadeed ee uu ahaa hoggaamiye ruuxi ah uun? Intaas oo aayadood ma lagu dedi karaa dhacdadan? Ma cid baa hadal ka qabta in Nebigu SCW uusan ahayn boqor, nidaamka Islaamkuna uusan boqortooyo ku dhisnayn ee qofka ugu mudan in masuuliyadda loo dhiibo uu doorbido. Haddii Islaamku boqortooyo yahay sow Nebiga SCW wiilashiisi uma tarmeen ama tolkii kama dhaxleen talada? Maxaa keenay in ay geeridiisi ka dib isu marto afar nin oo aan dhiig tolnimo

wadaagin, intii aan reer Banii Umayah khilaafadii ka dhigin boqortooyo la kala dhaxlo.

Nebigu SCW isaga ayaa magac u bixiyay nidaamka siyaasadeed ee Muslimiinta markii uu lahaa raaca sunnadayda iyo sunnada khulafada hanuunsan ee igu xiga. Xadiis kale waxa uu ku sheegay in khilaafadu ay tahay 30 sano ka dibna ay u xuubsiiban doonto boqortooyo.

الخلافة في أمتي ثلاثون سنة ثم ملك بعد ذلك.

Boqortooyadu waxay leedahay dhaqanno u gaar ah oo ay ka mid tahay in boqorka iyo dadkiisu ay ku helaan barwaaqo adduun oo badan. Taas weeye midda Nebigu SCW iska diiday. Cumar RC baa maalin u yimid Nebiga SCW oo ay jidhkiisa ku sawirantay derintii uu dhulka ku jiifay, markaasuu yidhi ma adigoo ah Rasuulkii Alle ayaa sidan u nool iyada oo Kisraa iyo Qaysar iyo webiyo iyo beero ku raaxaysanayaan. Markaas ayuu Nebigu SCW ku yidhi: miyaadan raalli ku ahayn in nimcada aakhiro aynu yeelanno iyaguna midda adduunyo?

فَدَخَلْتُ على رَسُولِ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عليه وَسَلَّمَ وَهو مُضْطَجِعٌ على حَصِيرٍ، فَجَلَسْتُ، فأدْنَى عليه إزَارَهُ وَليسَ عليه غَيْرُهُ، وإذَا الحَصِيرُ قدْ أَثَّرَ في جَنْبِهِ، فَنَظَرْتُ ببَصَرِي في خِزَانَةِ رَسُولِ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عليه وَسَلَّمَ، فَإِذَا أَنَا بقَبْضَةٍ مِن شَعِيرٍ نَحْوِ الصَّاعِ، وَمِثْلِهَا قَرَظًا في نَاحِيَةِ الغُرْفَةِ، وإذَا أَفِيقٌ مُعَلَّقٌ، قالَ: فَابْتَدَرَتْ عَيْنَايَ، قالَ: ما يُبْكِيكَ يا ابْنَ الخَطَّابِ قُلْتُ: يا نَبِيَّ اللهِ، وَما لي لا أَبْكِي وَهذا الحَصِيرُ قدْ أَثَّرَ في جَنْبِكَ، وَهذِه خِزَانَتُكَ لا أَرَى فِيهَا إلَّا ما أَرَى، وَذَاكَ قَيْصَرُ وَكِسْرَى في الثِّمَارِ وَالأنْهَارِ، وَأَنْتَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عليه وَسَلَّمَ، وَصَفْوَتُهُ، وَهذِه خِزَانَتُكَ، فَقالَ: يا ابْنَ الخَطَّابِ، أَلَا تَرْضَى أَنْ تَكُونَ لَنَا الآخِرَةُ وَلَهُمُ الدُّنْيَا؟ قُلْتُ: بَلَى،

Waxaa jira xadiis si cad u muujinaya in Nebiga SCW la doorransiiyay in uu noqdo boqor oo uu diiday. Laakiin xitaa kaasi qiil iyo daliil toona uma noqonayo ujeedka qoraaga, oo nebinnimada ayaa sideeda ku wadatay awoodda siyaasadeed ee uu ka cararayo.

جلس جبريلُ إلى النبيِّ صلَّى اللهُ عليه وسلَّم فنظر إلى السماءِ فإذا ملَكٌ ينزلُ فقال جبريلُ هذا الملكُ ما نزل منذ خُلِق قبلَ الساعةِ فلما نزل قال يا محمدُ أرسَلَني إليك ربُّك أفملكًا نبيًّا أجعلَك أو عبدًا رسولًا قال جبريلُ تواضعْ لربِّك يا محمدُ قال بل عبدًا رسولًا.

Xaqiiqda uu Cabdisaciid rabo in uu tashuush ku furo waxaa qiray Edward Gibbon ku dhowaad labo boqol oo sano ka hor:

> "The good sense of Muhammad despised the pomp of royalty. The Apostle of God submitted to the menial offices of the family; he kindled the fire; swept the floor; milked the ewes; and mended with his own hands his shoes and garments. Disdaining the penance and merit of a hermit, he observed without effort of vanity the abstemious diet of an Arab".

Abuu Bakar RC oo Jasiiradda Carbeed intii ku noolayd u hoggaansameen, Faaris iyo Ruumna albaabbada ku garaacay ma ahayn boqor. Cumar RC oo Faaris iyo Ruumba burburiyay ma ahayn boqor. Midkoodna lama odhan karo ma ahayn hoggaamiye siyaasadeed. Qof caqli leh oo miyirqabaana waxaas oo kale lama soo shirtagi karo.

Waxyaalaha yaabka leh ee buuggan ka buuxa waxaa ka

mid ah in uu marar badan isburinayo. Iyada oo qoraagu dedaal badan galinayo in uu inaga dhaadhiciyo "in nebi Muxamed (CSW) nebi ahaa, laakiin boqornimo uusan wax shaqo ah ku lahay[n].[b.61]", in Muslimiintu ay doorteen "Abuu Bakar, Cumar, Cismaan iyo Cali [b.58]", haddana ma oggola in la yidhaahdo aynu dib ugu noqonno ku dhaqankii diinta iyo habdhaqankii suubbanaa ee Nebiga SCW iyo khulafadiisi hanuunsanaa. Sababta uu ku diidayaana waa "muslimiintu qarniga 21-aad baahi adduunyo iyo mid aakhiro toona uma qabaan in dib loogu celiyo xukunkii boqorrada [b.58]" Haddii Nebigu SCW uusan boqor ahayn, Abuu Bakar, Cumar, Cusmaan, iyo Calina aysan boqorro ahayn e dadku doorteen, maxaa keenay in uu ku tilmaamo "xukunkii boqorrada"? Ma cid baa u socota xilli kale oo leh aynu xilligii Xajaaj iyo Saffaax u noqonno!

Xadiiskii uu qoraagu soo daliishaday ee Nebigu SCW ku sheegay in uusan boqor ahayn e uu yahay nin ay dhashay haweenay Makah hilib ku cuni jirtay, ka dib, qoraagu waxa uu abbaaray halkii uu u socday: "Sidaa darteedna, layaab ma leh in Nebigu uusan marna isku hawlin samaynta dowlad, laakiin uu aad isugu hawlay hirgelinta mabaadida guud ee diinta sida caddaaladda, sinnaanta iyo xorriyadda. Islaamku wuxuu muslimiinta amray inay ilaahood isu dhiibaan, laakiin marna ma amrin inay dowlad isu dhiibaan." [b.61]

Nebigu SCW "isku [ma] hawlin samaynta dowlad" waa taariikh cusub oo aan hore loo maqlin meesha Cabdisaciid ka keenayna waa aynu arki doonaa walow uu isagu xigashadiisa inaga qariyay. Akhri qoraallada Muslin iyo gaalba ay ka qoreen Nebiga SCW. Wax muran ahi kama taagna in uu dowlad dhisay. Qoraagu isagaaba hadalkiisan

kaga dabo tagaya bogga xiga, laakiin dhinac kale ayuu xaqiiqadii u weecinayaa si uusan isu burin (waa sida ay isaga la tahay e). Waxa uu leeyahay: "Taasoo jirta, haddana duruufihii xilligaas carabtu ku sugnaayeen waxay khasab ka dhigayeen in la helo nidaam bulshada u horseedi kara nabad iyo horumar. Taasina waa midda keentay in magaalada Madiino uu ka curto wax la moodo maamul dowladeed. Hase ahaatee, maamulkaasi ma hanaqaadin ee wuxuu jirey muddo ka yar shan iyo labaatan sano oo keliya. Sidaa darteed, xataa haddii laga soo qaado in nebi Muxamed (SCS) uu dowlad dhisay, dowladdaasi waxay ahayd mid khaas ah oo rasuul loo waxyoodaa uu hoggaaminayey. Waana dowlad aan muddadaas kooban ka dib la arag, hadda ka dibna la rajaynayn in la arko [b.62]."

Dawladdii Kacaanka ma odhan karnaa dawlad ma ahayn maadaama ay jirtay wax ka yar 25 sano?

Waxaase cajiib ah hadalkaa hore intiisa dambe. "... laakiin uu aad isugu hawlay hirgelinta mabaadida guud ee diinta sida caddaaladda, sinnaanta iyo xorriyadda. Islaamku wuxuu muslimiinta amray inay ilaahood isu dhiibaan, laakiin marna ma amrin inay dowlad isu dhiibaan." [b.61]

Waxaan filayaa in qoraagu illaaway in uu hordhaca buugga ku qoray: "Dowladda ummadaha oo dhan ay jantaan waa midda laga helo caddaalad, sinnaan, xorriyad, talo-wadaag iyo la xisaabtanka madaxda [b.xii]." Maxaa yeelay haddii uu Nebigu SCW "aad isugu hawlay hirgelinta mabaadida guud ee diinta sida caddaaladda, sinnaanta iyo xorriyadda [b.61]" waxa uu gundhiggii u diyaariyay "Dowladda ummadaha oo dhan ay jantaan". Laakiin sidaa ma aha, oo qoraagu isaga ayaa hadalka inoo sii wadaya

oo inoo sheegaya "Dowladda ummadaha oo dhan ay jantaan" midda ay tahay: "Tilmaamahaasna, caadi ahaan dowladda calmaaniga ah baa uga dhow midda diiniga ah [b.xii]." Markaa Nebigu SCW dawlad ma dhisin, mabaadi'dii guud ee diinta ee uu hirgalintooda isku hawlay, ee ahaa caddaaladda, sinnaanta, iyo xorriyaddana waxaa xaqiijintooda uga dhowaatay calmaaniyaddii. Sidaa awgeed, waa fahanka qoraaga laga qaadanayee, wax Nebigu SCW inoo hayo oo aan ruuxaaniyad ahayni ma jiraane aynu meesha ka dhaqaaqno oo calmaaniyiin noqonno.

Cabdisaciid iyo dadka uu fikirkooda ku mergaday farqiga u dhexeeyaa waxa weeyaan, in iyagoo neceb oo aflagaaddaynaya, aysan dafirin in uu Nebigu SCW ahaa hoggaamiye siyaasadeed oo madax ka ahaa dawlad. Rasuulnimadiisa ayay durayeene muran kama aysan qabin hoggaamintiisa siyaasadeed.

Bogga 92-aad waxa uu qoraagu ku soo xiganayaa Folteer (Voltaire). Foolteer waa ninka ay Ayaan Xirsi lahayd Muslimiintu waxay u baahan yihiin Folteer cusub oo khuraafaadka diinta ka cuudiya ("Let Us Have a Voltaire"). Maadaama qoraagu ka war hayo Folteer oo uu soo xigtay, meel kalaba intaynaan aadin aynu soo xiganno Folteer bal in qoraagu warkiisa ku qanco.

Alexander Bevilacqua, qoraaga The Republic of Arabic Letters, Islam and the European Enlightenment, [The Belknap Press of Harvard University Press] waxa uu meelo badan ku soo xiganayaa fikradihii iyo qoraalladii gadhwadeenkii fikir ee Yurub ee ay ka mid yihiin Maakiyafeli, Folteer, Gibbon, … wixii ay ka yidhaahdeen Nebiga SCW, Islaamka, iyo Muslimiintaba. Waxa aan

muran ka taagnayn in walow ay diin ahaan Nebiga SCW u diiddanaayeen, aadna u dhaliili jireen, haddana ay ka sinnaayeen in ay Nebiga SCW u arkayeen hoggaamiye siyaasadeed oo weliba qaarkood ay u arkayeen in uu kaalinta koowaad ku jiro ("...the wisest Legislator that ever was." b.99).

Qoraagu waxa uu leeyahay: waxay isku raacsanaayeen in uu Maxamed ahaa hoggaamiye siyaasadeed ... waxaana xilligan suuragal ahayd in Maxamed lagu ammaano in uu shirkigii kala dagaallamay Jasiiradda Carbeed, uuna asaasay dawlad aad u guuleysatay.

> "...there was a general agreement that Muhammad was a secular leader… one could praise Muhammad for bringing monotheism to Arabia, as well as for founding a remarkably successful state." [b.106] ['secular' halkan ma aha calmaani]

Kuma koobnayn Nebiga SCW ee khulafadii awooddoodiida badnayd markii uu tilmaamayay waxa uu Folteer leeyahay awoodda intaa le'eg waxaa sababay in ay wada haysteen awooda minbar iyo midda carshiga, midda seefta iyo midda dacwada.

> "In an echo of Machiavelli, Voltaire saw the joint political and religious authority of the caliphs as the source of their might. "If ever a power has threatened the whole earth, it was that of the caliphs; for they had the power of the throne and the altar, of the sword and of enthusiasm."" [bb.181-182]

Nebiga SCW iyo Muslimiinta in xilligan Yurub oo Kiristaan ah lagu dhex ammaanaa waxa ay ahayd wax aan sahlanayn oo eed badan lagu mudanayay, laguna eedeeyay Folteer. Maakiyafelli isagu qaab dedan ayuu uga hadlay ee ma uusan carrabbaabin. Folteer isaga oo isdifaacaya waxa uu leeyahay: eed ma lihi haddii ninkan yari beddelay qayb ballaadhan oo dhulka ka mid ah, haddii uu dagaal kaga guuleystay ciidammo 10 jibbaar ka badan kuwiisa, haddii uu imbaraadooriyaddii Roomanka kaga gariiriyay jugtii horana gaadhsiiyay ilaa markii dambe khulafadiisi ay burburiyeen, haddii uu uu ahaa u taliyaha Aasiya, Afrika, iyo qaybo Yurub ah.

> "Voltaire wrote: "It is not my fault that this little man has changed the face of a swath of the world, if he won battles against armies ten times as large and his own, if he made the Roman Empire tremble, and give the first blows to that colossus that his successors destroyed, and if he was the legislator of Asia, of Africa, and of part of Europe." … "I concede that he is damned, but Caesar and Alexander are too; and is Cicero not as well?" bb.185-186.

Qaybta dambe ee qoraalka waxa uu Folteer simayaa Nebiga SCW, Siisarkii Roomaanka, iyo Alaksandarkii Giriigga. Alaksandar waa ninkii asaasay dawladdii Giriigga ee awoodda lahayd ee ilaa Hindida qabsatay Faarisiyiintiina cagta marisay. Siisarna waa ninkii ugu muhiimsanaa imbaraadooriyaddii Roomaanka, jiritaankeedi iyo awooddeediina astaanta u ah ilaa hadda ee intii ka dambaysay isaga loogu magacdarayay (Qaysar Ruum).

Qoraa Cabdisaciid marar badan waxa uu buuggiisa ku celcelinayaa odhaahda Kiristaanku leeyihiin ee ah: Alle sii wixii uu leeyahay, Qaysarna sii wixii uu leeyahay, oo ay calmaaniyiintu u adeegsadaan in ay yidhaahdaan diin (wixii Alle leeyahay) iyo siyaasad (wixii Qaysar leeyahay) ha la kala saaro. Laakiin Folteer waxa uu inoo muujinayaa in Nebiga SCW marka laga hadlayo, labadaasi aysan kala soocnayn oo uu Nebigu SCW kaalintii Siisarna wato.

Waxaa sidaas oo kale aan ugu tagaynaa Edward Gibbon, taariikhyahankii caanka ahaa ee qoray taariikhdii burburkii Roomaanka (The History of the Decline and Fall of the Roman Empire (1776–88)) oo ka hadlaya in uu Nebigu SCW ahaa hoggaamiye diimeed, mid siyaasadeed, iyo mid milatariba.

> "He [Gibbon] imagines a man half pushed by his own motivations and half pulled by the pace of events into the dual role of religious visionary and political and military leader." [b.191]

Mufakir kale oo reer Yurub ah oo qoraa Cabdisaciid soo qaadanayaa waa Ruusoow iyo buuggiisa Caqdi Bulsho (The Social Contract). Ruusoow (The Social Contract, translated by Christopher Betts, Oxford University Press, b.160-161.) markii uu ka hadlay diinta Kiristaanka iyo xidhiidhka ay la leedahay siyaasadda, waxa uu tilmaamayaa in ay hore u jireen taliye iyo xeerar aan diinta ku dhisnayn, laakiin markii ay Kiristaankii kaalin ku yeesheen awooddii siyaasadeed, ay timid in awoodihii labo noqdaan taasina ay dhalisay isku dhac joogto ah oo ku saabsan hadba ciddii awoodda arrin

gaar ah leh. Waxa uu leeyahay arrintaasi waxay dhalisay in dawladihii Kiristaanka ahaa ay si hagaagsan u shaqayn waayaan oo la kala garan waayo cidda la adeecayaa ma boqorkaa mise wadaadka. Si taas loo xalliyo, ayuu leeyahay Ruusoow, meelo badan baa la iskaga dayay in nidaamkii hore lagu noqdo laakiin lagu ma guuleysan oo diinta Kiristaanka ayaa ka guuleysatay. Intaas ka dib Ruusow waxa uu soo qaadanayaa Nebiga SCW iyo nidaamkiisi maamul waxa uuna leeyahay: aragtiyihii Maxamed aad bay u qummanaayeen nidaamkiisa siyaasadeedna wuxuu ahaa mid isku dhisan oo iswata, dawladdiisuna qaabkeedi asalka ahaa ayay ku sii socotay markii ay beddeleen khulafadii ka dambeeyay, waxayna ahayd mid midaysan, dhankaa marka laga eegana wanaagsan.

> "Nonetheless, since there has always been a civil ruler and civil laws, the consequence of this doubling of powers has been a perpetual conflict of jurisdictions, which has made it impossible for there to be any sound polity in Christian states; and no one has ever been able to say whether obedience was due to monarch or priest.
>
> Several nations, however, even in Europe or its vicinity, have tried to retain or restore the older system, but without success; everywhere the spirit of Christianity has triumphed. Religious worship has always preserved, or restored, its independence from the sovereign, and has had no necessary connection with the body of the state. Muhammad's views were extremely sound, and his political system closely knit;* and while his government kept its original form, under the caliphs who succeeded him, it was wholly united, and in that respect good."

* Tarjumaha oo halkan faallo ku darsaday waxa uu leeyahay: waxaa laga yaabaa in uu u jeedo in shareecadu ay maamusho arrimaha diinta iyo kuwa dawladdaba.

> "closely knit: the meaning is presumably that the Islamic 'law' applies both in the secular and the religious domain." [b.207]

Ruusow waxa uu hadalkiisaa kore ku soo afjarayaa markii Carabtii ay hodan noqdeen, wax barteen xaddaaradna dhisteen, in ay noqdeen dad jilicsan, ka dibna taladii ay gacantoodi ka baxday oo ay Cusmaaniyiintii kala wareegeen. Cusmaaniyiinta waxa uu ku tilmaamayaa in ay ahaayeen "Barbarian" ama cawaan. Waxa uu leeyahay markan ayaa waxaa timid awooddii in la kala sooco, walow aysan sida ta Kiristaanka u qayaxnayn kala soociddaasi, waa laga dhex arki karaa Muslimiinta gaar ahaan kooxda Cali [wuxuu u jeedaa Shiicada].

> "But the Arabs grew prosperous, cultured, civilized, soft, and feeble, and were subjugated by barbarians;* the division between the two powers then revived. Although it is less obvious among the Muslims than the Christians, it is still present, especially in the sect of Ali;* and in some states, such as Persia, its effects are felt continually." [b.161]

Haddana aynu u gudubno Aleksis di Tokwafil (Alexis de Tocqueville) iyo waxa uu ka yidhi Nebiga SCW iyo

siyaasadda. Waxaan ka soo xigtay buugga "Faith and Power" ee uu qoray Bernard Lewis [b. 41]. Di Tokwafil waxa uu qoray: Maxamed waxa uu samada ka keenay Qur'aankana ku daray kuma koobna caqiido diimeed, ee waxaa ku jira qaacidooyin siyaasadeed, xeerar madani iyo xeerar dambiyeed, iyo aragtiyo sayniseed. Taa lidkeeda Baybalku waxaa keliya oo uu ka hadlayaa xidhiidhka guud ee u dhexeeya dadka iyo Alle iyo dadka dhexdooda.

> "Mohammad brought down from heaven and placed in the Qur'an not only religious doctrines, but also political maxims, civil and criminal laws, and scientific theories. The Gospels, in contrast, speak only of the general relations between man and God and among men."

Aan ku soo afjaro cinwaanka buug ay 1961-kii daabacday Oxford University Press oo uu qoray W. Montgomery Watt. Cinwaanka buuggu waa, Maxamed: Nebi iyo Hoggaamiye Siyaasadeed/ "Muhammad: Prophet and Statesman".

Qofkii diiddan in Nebigu SCW hoggaamiye siyaasadeed ahaa, waxaan leennahay: kiib goowin. Ku soco, fariidoow!



“Dayaxoo caddadu taam u tahay oo tahan ka nuuraaya,
Gudcur bay la tahay nimuu indhaha cudur ka tuuraaye.”

—Xaaji Aadan Afqalooc.



“Ilaahii makhluuqoo dhan iyo, dunidan meegaaray,
Muslinnimo kolkuu soo dejay, ee Maxamed soo saaray,
Ee magaca aan sheeganiyo, midabka noo yeelay,
Ee uu madow nooga dhigay, amase maariinka,
Ee uu mabada'a noogu xidhay, muuminnimo khaas ah,
Wallee inuusan meeqaan xille iyo, meel xun noo dirine,
Ma maroorto suu nala damcay, ee way macaan tahaye,
Mana moogin tuu mudan yahee, mahadnaq weeyaane,
Isagaa Macbuudkii ah oon, magangalaynaaye,
Mana jiro wax kale oo maslaa, muran la'aantiiye,
Rabbigay mid weeye e, kuwii shan u malaynaayey,
Kol haddaanay taanadii maqlayn, Maxamed noo sheegay,
Muraad kama galayno e, sidaa ha iska moodeene.”

—Dhoodaan: Ha Midowdo.

DHAMBAALKA JIMCAHA – 38

23 Rabiicul Awal 1443
29 Oktoobar 2021

SADDEX

Nebi Ciise CS waxaa Alle kor u qaaday isaga oo aan helin awood uu diintii ku hirgaliyo, waana tii la isku dayay in la dilaba.

إِذْ قَالَ اللَّهُ يَا عِيسَىٰ إِنِّي مُتَوَفِّيكَ وَرَافِعُكَ إِلَيَّ وَمُطَهِّرُكَ مِنَ الَّذِينَ كَفَرُوا وَجَاعِلُ الَّذِينَ اتَّبَعُوكَ فَوْقَ الَّذِينَ كَفَرُوا إِلَىٰ يَوْمِ الْقِيَامَةِ ۖ ثُمَّ إِلَيَّ مَرْجِعُكُمْ فَأَحْكُمُ بَيْنَكُمْ فِيمَا كُنتُمْ فِيهِ تَخْتَلِفُونَ ﴿٥٥﴾

Aal-Cimraan: 55.

وَقَوْلِهِمْ إِنَّا قَتَلْنَا الْمَسِيحَ عِيسَى ابْنَ مَرْيَمَ رَسُولَ اللَّهِ وَمَا قَتَلُوهُ وَمَا صَلَبُوهُ وَلَٰكِن شُبِّهَ لَهُمْ ۚ وَإِنَّ الَّذِينَ اخْتَلَفُوا فِيهِ لَفِي شَكٍّ مِّنْهُ ۚ مَا لَهُم بِهِ مِنْ عِلْمٍ إِلَّا اتِّبَاعَ الظَّنِّ ۚ وَمَا قَتَلُوهُ يَقِينًا ﴿١٥٧﴾

An-Nisaa': 157.

Aad baa loo dhibay Nebi Ciise CS iyo intii raacdayba, markii Alle kor u qaadayna dhibtii waa ku sii socotay dadkii

raacay. In ka badan saddex boqol oo sano ka dib dhalashadii Ciise CS, ayaa imbaraadoorkii Roomanka ee Konstantiin uu kiristaanoobay (waa ninka uu ka yimid magicii hore ee Istanbuul: Konistaantinoobal) cadaadiskiina ka dul qaaday Kiristaankii. Sannadkii 380 dhalashadii Ciise CS ka dib, ayay soo baxday wareegto Kiristaanka ka dhigaysa diinta imbaraadooriyadda Rooma. Halkaas ayay Kiristaanku ka soo galayaan awoodda siyaasadeed in ay kaalin ku lahaadaan.

Muddo dheer iyo xaalado kala duwan ka dib (burburkii imbaraadooriyaddii iyo u kala jabkii Bari iyo Galbeed) sannadkii 800 ayaa baadarigii Liyoo III uu taajkii imbaraadoorka Rooma saaray Shaarlamayn oo ay isku xilli ahaayeen Haaruun al-Rashiid (waxaa la sheegaa in ay wufuud iyo hadyado isdhaafsadeen). Halkan ayaa waxaa ka dhalatay wax markii dambe loo bixiyay Holy Roman Empire. Awooddii siyaasadeed iyo middii diimeed ayaa kulmay, waxayna isla mareen marxalado kala duwan oo marar badan baaderiga Rooma fadhiyaa ka awood badnaa boqorradda Yurub, kii uu doono sharciyayn jiray, kii uu doonana tuuri jiray.

Muddo ka dib awooddii kaniisadda Kaatooliggu waa ay wiiqantay, dhulkiina wuxuu u kala jajabay imaarado. Sannadkii 1517 ayaa wadaad la odhan jiray Maartin Luuthar oo Jarmal uu ahaa uu bilaabay mad-hab cusub oo la baxday Borotestan. Waxaa bilowday isku dhac iyo colaad muddo dheer socotay oo u dhexaysay mad-habtan cusub iyo kii hore ee Kaatooligga.

Dhanka Ingiriiskana waxaa isku dhacay baadarigii Kaatooligga (Kelementigii 7-aad) iyo boqor Henerigii 8-aad ka dib markii uu boqorku damcay in uu xaaskiisi furo,

baadariguna ka diiday (mad-habta Kaatooliggu furniin ma oggolayn). Arrintaasi waxay dhalisay in boqortooyadii Ingiriisku ka xadhigfurato Kaniisaddii Kaatooligga waxaana dhalatay mad-habta Ingiriiska (Anglican) oo uu boqor Heneri isu magacaabay madaxnimadeeda (ilaa haddana jagadaa waxaa haysa boqoradda hadda nool ee Elisabeth II).

Colaaddii ka dhalatay kala jabka Kiristaanku waxay ku soo afjarantay heshiiskii Westfayliya ee sannadkii 1648. Waxaana lagu heshiiyay in boqor/amiir kasta faraha looga qaado degaanka uu ka taliyo oo diinta degaankaasi ay noqoto midda boqorka/amiirka (waa halkii Nebigu SCW lahaa: الناس على دين ملوكهم). Qofkii diintaa mid ka duwan haysta ee dhulkaa ku nool waxaa u furnayd labo arrimood in uu kala doorto: diintaada gaarkaaga ugu dhaqan oo bannaanka ha la iman ama degaanka ka guur.

Awooddii siyaasadeed ee Kaniisaddu in ay hoos u dhacday waxaa garab socotay in saamaynteedi diimeed iyo fikirna ay wiiqantay. Waxaa dhibaato badan ku keenay daahfurradii sayniseed ee xilligan isa soo tarayay oo lid ku ahaa wixii ay Kaniisaddu u arkaysay xaqa aan wax ka duwan la aqbali karin. Arrimahan qaarkood diin kuma dhisnayne waxayba ahaayeen aragtiyadii saynis ee Giriiggii hore, sida Aristootal. Markii Kobeernikas daahfuray in dhulku uu qorraxda ku wareego, kaniisaddu arrintaa waxay u aragtay bidco aan la aqbali karin, waxayna taageersanayd nidaamkii hore ee Tolomi iyo Giriiggii hore. Waa tii Gaalaliyo lagu

maxkamadeeyay “bidcadaas” uu caddaymaha u helay buugga taageerada u ahna uu qoray. Sannadkii 1633-kii ayay kaniisaddu maxkamadaysay kuna xukuntay xabsi guri ilaa uu ka dhintay. Daahfurradii sayniseed ee aragtiyihii Kaniisadda lidka ku ahaa waa ay isa soo tarayeen, waxaana caddaatay in waxyaalo Kaniisaddu muddo soo wadday aysan xaqiiqo noqon karin. Waxaa halista ugu weyni Kaniisadda uga timid aragtidii Daarwin oo si weyn uga qaybqaadatay in dad badani mulxidiin noqdaan, oo ay dafiraan jiritaanka Alle.

Sayniska ka sokoow, waxaa dad badan ka degi la’ahayd fikradda odhanaysa Saddexda Midka ah (Trinity). Isxaaq Niyuutan (1643-1727) ayaa ka mid ahaa dadkii diiddanaa qodobka caqiidada Kaniisadda udubdhexaadka u ahaa.

لَّقَدْ كَفَرَ الَّذِينَ قَالُوا إِنَّ اللَّهَ ثَالِثُ ثَلَاثَةٍ ۘ وَمَا مِنْ إِلَٰهٍ إِلَّا إِلَٰهٌ وَاحِدٌ ۚ وَإِن لَّمْ يَنتَهُوا عَمَّا يَقُولُونَ لَيَمَسَّنَّ الَّذِينَ كَفَرُوا مِنْهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿٧٣﴾

Al-Maa’idah: 73.

يَا أَهْلَ الْكِتَابِ لَا تَغْلُوا فِي دِينِكُمْ وَلَا تَقُولُوا عَلَى اللَّهِ إِلَّا الْحَقَّ ۚ إِنَّمَا الْمَسِيحُ عِيسَى ابْنُ مَرْيَمَ رَسُولُ اللَّهِ وَكَلِمَتُهُ أَلْقَاهَا إِلَىٰ مَرْيَمَ وَرُوحٌ مِّنْهُ ۖ فَآمِنُوا بِاللَّهِ وَرُسُلِهِ ۖ وَلَا تَقُولُوا ثَلَاثَةٌ ۚ انتَهُوا خَيْرًا لَّكُمْ ۚ إِنَّمَا اللَّهُ إِلَٰهٌ وَاحِدٌ ۖ سُبْحَانَهُ أَن يَكُونَ لَهُ وَلَدٌ ۘ لَّهُ مَا فِي السَّمَاوَاتِ وَمَا فِي الْأَرْضِ ۗ وَكَفَىٰ بِاللَّهِ وَكِيلًا ﴿١٧١﴾

An-Nisaa’: 171.

Folteer (1694–1778) markii uu ka hadlayay sababta diinta Islaamku degdeg ugu faaftay waxa uu leeyahay caqiidadii iyo akhlaaqdii Nebigu SCW la yimid ee sida fudud loo fahmi karo ayaa sabab u ahaa. "...and his doctrine, which is so simple, soon attracted respect and trust to his religion. Above all, the dogma of the unity of God, presented without mysteries, and befitting human intelligence, drew to his law a crowd of nations…" [The Republic of Arabic Letters, b.181]. Sidaa oo kale, Edward Gibbon (1737–1794) ayaa isna waxa uu leeyahay, "the mysteries of the Trinity and Incarnation appear to contradict the principle of divine unity," Intaa waxa uu raacinayaa in caqiidadii Nebigu SCW keenay ay tahay mid fudud oo aan madmadow iyo shaki lahayn, Qur'aankuna uu ka markhaati kacayo midnimada Alle— "The creed of Mohammed is free from suspicion or ambiguity; and the Koran is a glorious testimony to the unity of God." [The Republic of Arabic Letters, b.191].

Dhibaatadii ka dhalatay dagaalladii diimeed ee Kiristaanka dhex maray darteed, waxaa aad isu tarayay baaqa ah in qof walba xorriyad loo siiyo in uu diintiisa si xor ah ugu dhaqmo, ayna lamahuraan tahay in ay isu dulqaataan Kiristaanku. Faylasuufkii Joon Lok (1632-1704) waa kii qoray buuggiisa Warqad Ku Saabsan Dulqaadka (A Letter Concerning Toleration). Lok waxa uu ka hadlay in aysan dawladdu faragalin dadka diintooda, wuxuuna sii xoojiyay doodo ka horreeyay oo ku saabsanaa in siyaasadda dawladda iyo awoodda kaniisadda la kala saaro oo qofkii kaniisadda wax ku diida ama ka mad-hab duwan aysan ahayn in ay dawladdu ciqaabto. Laakiin dulqaadkaa Lok ma wada

gaadhsiisnayn cid kasta. Mulxidku maadaama uusan Alle iyo aakhiro aaminsanayn, ballanqaadkiisa iyo dhaartiisa lagu ma kalsoonaan karo, markaa dadka dulqaadka mudan kuma jiro, ayaa uu Lok ku dooday. Sidaa oo kale, Kaatooliggu kuma jiro cidda loo dulqaadanayo oo baadari Rooma jooga ayuu daacad u yahay kana amar qaataa. Sidaa awgeed, qof ka amar qaadanaya shisheeye, looma dulqaadan karo [Rethinking Secularism, b.35].

Doodda Lok aad bay ugu dhowdahay aayaddan isku xidhaysa camalka wanaagsan iyo aaminaadda Alle iyo aakhiro.

فَمَن كَانَ يَرْجُو لِقَاءَ رَبِّهِ فَلْيَعْمَلْ عَمَلًا صَالِحًا وَلَا يُشْرِكْ بِعِبَادَةِ رَبِّهِ أَحَدًا ﴿١١٠﴾

Al-Kahf: 110.

Sidaa oo kale waa kii Nebigu SCW lahaa: Qofkii rumeeyay Alle iyo aakhiro wanaag ha ku hadlo ama ha aamuso, qofkii rumeeyay Alle iyo aakhiro ha karaameeyo deriskiisa, qofkii rumeeyay Alle iyo aakhiro ha sharfo martidiisa.

من كان يؤمن بالله واليوم الآخر، فليقل خيرا أو ليصمت، ومن كان يؤمن بالله واليوم الآخر، فليكرم جاره، ومن كان يؤمن بالله واليوم الآخر، فليكرم ضيفه.

Rumaynta Alle iyo Aakhiro muhiim bay u yihiin akhlaaqda wanaagsan.



> "Any discussion of the secular has to begin with the recognition that it emerged first as a theological category of Western Christendom that has no equivalent in other religious traditions or even in Eastern Christianity. [José Casanova in Rethinking Secularism, b.56]."

> "...the very term "secularization" derives from a unique Western Christian theological category," [José Casanova in Rethinking Secularism, b.61]

Mar kasta oo laga hadlayo calmaaniyad, waxaa mudan in laga bilaabo aqoonsiga in ay tahay "meesiyayn" caqiideed oo ka mid ah Kiristaaniyadda Galbeedka, taas oo aan wax u dhigma ku lahayn Kiristaaniyadda Bariga, diimaha kale iskaba daaye.

Maqaalka koowaad ee cinwaankiisu yahay "Waa maxay calmaaniyaddu? Maxaa loogu baahday? Maxaase wadaaddadu u la colloobeen? (bb.1-50), qoraa Cabdisaciid waxa uu raadraacayaa ereyada "secular" iyo "secularism" ee mar dambe loo carabiyeeyay "calmaani" iyo "calmaaniyad". Waxa uu leeyahay, "Erayada "secular" iyo "secularism" oo carabtu u tarjumeen 'calmaani' iyo 'calmaaniyad', asalkoodu waa Laatiini, oo waxaa laga soo qaatay erayga "seaculum', oo muujiya muddo go'an oo waqti ah, lana macne ah erayada "fac", "qarni", "casri" iyo "casrigaan/ this age" iyo "dunidaan ama caalamkaan/ this world". Eraygana markii u horraysay waxaa adeegsaday dadka haysta mad'habta Borootastanka ee diinta Masiixiga, waxayna ugu yeeri jireen wadaaddada

qaybtooda aan ahayn raahibiinta diinta oo keliya u go'ay ee iyagu dadka ku dhex jira una barakeeya guurka, dhalashada, dhimashada, qirashadoodana dhegaysta, denbigoodana u dhaafa. Si gaar ah erayga waxaa loogu adeegsaday wadaaddada meelaha kaniisadda ka baxsan diinta ka faafiya.

Hayeeshee, goor dambe erayga waxa loo adeegsaday wixii aan diin ama muqaddas ahayn ee adduunyo ku tacaluqa. Halkaana waxaa ka muuqanaysa in eraygu bilowgiisii hore uu ahaa eraybixin diini ah [b.3]."

Qoraaga waxaan ku darsanayaa in cidda ereybixintan adeegsan jirtay ahayd Kaatooligga iyo madaahib kale, oo Borotastanku aysan lahayn wadaaddo noocaas ah.

Jaarlas Taylor waxa uu leeyahay: wadaaddada kaniisadda dadka uga adeega ee ku dhex nool ayaa ahaa "secular/calmaani" halka wadaadka caadiga ahi uusan arrimaha adduunka faraha la galin dadkana xidhiidh la lahayn. Markaa sax ma aha halka Cabdisaciid leeyahay wixii aan diin ahayn—"goor dambe erayga waxa loo adeegsaday wixii aan diin ama muqaddas ahayn..." Wadaadka dadka u kala debbera arrimaha diinta ee dunida la xidhiidha ayaa lagu tilmaamayay, laakiin arrimahan uma aysan aqoon muqaddas. In wax kasta loo dhigo lammaanayaal (sida tix iyo tiraab) oo waxna muqaddas (sacred) laga dhigo, waxna mudannas (profane); wax diini (religious) yahay, waxna calmaani (secular), wax yahay xaadir jooga (immanent), waxna maqane qayb ah (transcendent) waa wax ku kooban Kiristaanka Galbeed oo ay habnololeedkooda oo dhan ku dhisayeen muddo dheer.

Jaarlas waxa uu leeyahay calmaaniyayntu (secularization) waxay lahayd macne ah in hanti ama hawl ay kaniisaddu

lahayd laga qaado oo dadka caadiga ah iyo caammada lagu wareejiyo (Rethinking Secularism, b.32). Markii Borotestanku meelaha qaar kala wareegeen Kaatooliggana, hantidii kaniisaddu lahayd markii ay ka wareejinayeen waxay adeegsanayeen ereyga "secularization" ama calmaaniyayn. Waxaa la qiyaasaa in Kaniisadda Kaatooliggu ay "lahayd" saddex-meelood-meel dhulka Yurub intii aan laga la wareegin. Waxyaalihii aadka loogu nacay ee colaadda loogu qaaday ayayna ka mid ahayd.

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا إِنَّ كَثِيرًا مِّنَ الْأَحْبَارِ وَالرُّهْبَانِ لَيَأْكُلُونَ أَمْوَالَ النَّاسِ بِالْبَاطِلِ وَيَصُدُّونَ عَن سَبِيلِ اللَّهِ ۗ وَالَّذِينَ يَكْنِزُونَ الذَّهَبَ وَالْفِضَّةَ وَلَا يُنفِقُونَهَا فِي سَبِيلِ اللَّهِ فَبَشِّرْهُم بِعَذَابٍ أَلِيمٍ ﴿٣٤﴾ يَوْمَ يُحْمَىٰ عَلَيْهَا فِي نَارِ جَهَنَّمَ فَتُكْوَىٰ بِهَا جِبَاهُهُمْ وَجُنُوبُهُمْ وَظُهُورُهُمْ ۖ هَٰذَا مَا كَنَزْتُمْ لِأَنفُسِكُمْ فَذُوقُوا مَا كُنتُمْ تَكْنِزُونَ ﴿٣٥﴾

Tawbah: 34-35.

Iyada oo kala qaybintaasi ka mid ahayd nidaamkii jiray, boqorka iyo baaderiguna ay kala mid ahaayeen, awooddii siyaasadeed iyo middii diimeed ee kaniisadduna ay wiiqantay markii gadhwadeenkii fikir iyo falsafadeed, saynis iyo siyaasadeedba ay Kiristaannimadii kaniisadda ka durkeen amaba toos u weerareen, waxaa timid in la suuraysto adduun aysan Kiristaannimadu udubdhexaad u ahayn.

Haddii Kiristaanku nolosha u qaybiyeen qayb diin

iyo muqaddas ah iyo qayb calmaani iyo "faddare" ah, nidaamkooda diimeedna ku dhisnaa kala qaybintaas, Jaarlas Taylor waxa uu leeyahay: qarnigii 17-aad laga bilaabo waxaa meesha soo gashay suuragalnimada in la isku koobo qaybta calmaaniga ah oo laga maarmi karo wixii diin iyo muqaddas iyo samada/ qayb ku tacalluqa. Noloshii bulshadana waxaa la bilaabay in lagu fahmo indho adduunkan la joogo uun arka. Wixii adduunkan ka baxsan iyo in meel sare wax laga fishaana ay tahay khuraafo dadku allifteen; yacnii ilaah looma baahna, waxaana timid in xaadirkii lagu noolaa uu xorriyad ka qaato qaybkii aan la arkayn iyo jiritaan kore.

> "But from the seventeenth century on, a new possibility gradually arose: a conception of social life in which the "secular" was all there was. Since "secular" originally referred to profane or ordinary time, in contradistinction to higher times, what was necessary was to come to understand profane time without any reference to higher times. The word could go on being used, but its meaning was profoundly changed, because its counterpoint had been fundamentally altered." (Rethinking Secularism, b.32). "... functioning [of society] was to be understood exclusively in terms of "this-worldly" goals and values (peace, prosperity, growth, flourishing, etc.)" (Rethinking Secularism, b.32).

> "The hiving off of a specifically "earthly" criterion figured within a broader distinction, that which divided "this world," or the immanent [الحاضر], from the transcendent. This very clear-cut distinction is itself a product of the development of Latin Christendom and has become part

> of our way of seeing things in the West. We tend to apply it universally, even though no distinction this hard and fast has existed in any other human culture in history… The clear separation of an immanent from a transcendent order is one of the inventions (for better or worse) of Latin Christendom. The new understanding of the secular that I have been describing builds on this separation. It affirms, in effect, that the "lower," immanent or secular, order is all that there is and that the higher, or transcendent, is a human invention." (Rethinking Secularism, b.33).

Waxa uu intaa ku darayaa, in xaadirkii lagu noolaa uu ku dhawaaqay xorriyad iyo madaxbannaani, "Declaration of independence of the immanent" (Rethinking Secularism, b.33), taas oo meeshii ugu sarraysay gaadhay markii uu dhacay Kacaankii Faransiiska ("But the first unambiguous assertion of the self-sufficiency of the secular came with the radical phases of the French Revolution." (Rethinking Secularism, b.34)). Waana halkii uu Niije sannadkii 1882-kii lahaa weedha caanka noqotay ee uu lahaa Alle wuu dhintay, taas oo ka macne ahayd in qarnigii 19-aad uu Yurub ku gacan sarreeyay fikirkii ilxaadka ee Allediidka ahaa. Niije hortii waxaa isna hadalkan yidhi Hegel sannadkii 1827-kii. Waxaa xusid mudan in maalintii Uxud markii qaybtii labaad ay guushu ku raacday Mushrikiintii, waa tii Abuu Sufyaan ku dhawaaqayay: Hubal ha sarreeyo (أُعْـلُ هُبَـلْ، أُعْـلُ هُبَـلْ). Loollan iyo ismuquuqin baa jiree xaq iyo baadil isu ma dulqaataan isma dugsadaan.

Inkastoo ereyga "secular/ calmaani" uu qaamuuska Ingiriisiga ugu jiray sifo ama tilmaan ahaan, haddana magac ahaan looma adeegsanayn oo aragtidani ma aysan lahayn magac gaar u sooca. Qoraa Cabdisaciidna bogga 9 ayuu inoogu sheegayaa ciddii tumaalisay ereygan: "Waxaana la sheegaa in qofkii ugu horreeyey ee erayga 'calmaaniyad' sida weyn u adeegsaday uu ahaa qoraa Ingiriis ahaa oo arrimaha bulshada u dhaqdhaqaaqi jirey oo la oran jirey George Jacob Holyoake (1817-1906). Holyoake dhallinyaronimadiisii wuxuu ku saamoobay afkaartii Robert Owen (1771-1858) ee ku baaqay in bulshada caddaalad iyo horumar loo sameeyo, hirgelinta iskaashatooyinkana ku caanbaxay. Sidaa awgeed, Holyoake goortii uu koray wuxuu ka mid noqday dadkii hormuudka u ahaa dhaqdhaqaaqyadii isbeddel doonka ahaa ee qarnigii 19-aad Ingiriiska ka jirey, … George Holyoake erayga calmaaniyad wuxuu ula macne ahaa erayga insaaniyad (=Humanism/ الإنسانية), wuxuuna u qeexay sidata: "Calmaaniyaddu waa in la isku dayo, lana ogaado in waajibka ugu weyn ee nolosha naga saarini uu yahay in la horumariyo duruufaha dadka jir ahaan, akhlaaq ahaan iyo garaad ahaanba, oo la gaarsiiyo heerka ugu sarreeya ee suurogalka ah, iyada oo aan la isku mashquulin arrinka iimaanka- aqbalid iyo diidmo labadaba…[b.9]"

Buugga Secularism: A Very Short Introduction, oo ay ku qoran tahay xog aad ugu dhow midda Cabdisaciid, meelo badanna la moodo in laga soo xigtay laakiin aan la magacaabin, halka Cabdisaciid ka yidhi "George Holyoake erayga calmaaniyad wuxuu ula macne ahaa erayga insaaniyad (=Humanism/ الإنسانية)," qoraaga buuggaasi

(Andrew Copson) waxa uu raacinayaa faallo kale: "Today, the words 'athiest' … or 'humanist'... do most of the job that Holyoake meant 'secularist' to do, describing non-religious philosophies, morals, and personal world views."

Sida Andrew Copson sheegay, Holyoake wuxuu ahaa mulxid aan Alle rumaysnayn. Ereyga 'Humanism' ee Cabdisiciid inoogu fasiray insaaniyad isna waa la mid oo waa caqiido ilxaad ah, innagana Insaaniyaddu macnahaa inooma laha, amaanada cilmiguna waxay ahayd in Cabdisaciid uu kala saaro ee uusan u dedin akhristaha Soomaaliyeed ee aan ereybixinnadan sidaa ula socon.

Holyoake aabbihii wuxuu ahaa mushrik, sida la sheego, ee hooyadii baa Kiristaan ahayd. Laakiin yaraantii baa xoogaa dhaqaale ah oo waxbarashadiisa loo kaydiyay "siyaaro" ahaan loo siiyay kaniisadda, markaas ayuu diinba nacay isagoo aad u yar. Markii uu mulxidka noqday ee jiritaanka Alle uu dafirayna, maalin intuu hadal Alle deelqaaf ku ah fagaare ka yidhi, ayaa la maxkamadeeyay oo dhawr bilood la xidhay.

In ereyga "secularism" iyo "secularist"—calmaaniyad iyo calmaani— uu Holyoake kaga dhuumanayay ereyga "athiest" ama mulxid iyo murtad, waxaa inoo qeexaya Talal Asad [Formations of the Secular, bb.23-24]: "The terms "secularism" and "secularist" were introduced into English by freethinkers in the middle of the nineteenth century in order to avoid the charge of their being "atheists" and "infidels", terms that carried suggestions of immorality in a still largely Christian society." The epithets mattered... because they sought to direct an emerging mass politics of social reform in a rapidly industrializing society." Waxa uu

sheegayaa in aysan suuragal u ahayn in uu hawlihii uu rabay qabto oo uu bulshada isbeddelkeeda iyo siyaasaddeeda kaalin ku lahaado iyada oo uu ku suntan yahay mulxid ama murtad, ereyadaas oo dadku u arkayeen akhlaaq la'aan maadaama ay weli Kiristaannimadu ku weynayd.

Hoosqor ayuu raacinayaa Dalaal waxa uuna leeyahay: ujeedku wuxuu ahaa in uu iska sooco mulxidnimadii qayaxnayd ee Bradlaugh, iyada oo Holyoake uu rabay in uu ereygan ku soo jiito taageerada dadkii Alle jiritaankiisa aqoonsanaa in ay kala qaybqaataan arrimihii uu waday ee aysan ereyga mulxid ka didin. Laakiin taas guul weyn kama uusan gaadhin.

Bradlaugh iyo Holyoake waxaa dhex maray doodo badan oo ku saabsanaa arrintan. Halka Holyoake uu doorbidayay in aan dadka la iska didin, Bradlaugh waxa uu qabay in aan la gabban. Bradlaugh waa ninka aasaasay ururka calmaaniyiinta ee Ingiriiska (National Secular Society), Holyoake-na waxa uu ahaa ku xigeenkiisi. Halka calmaaniyiinteennu Muslimnimo isku qariyaan, adduunka kale cidda calmaaninnimo u ololaysaa waa mulxid iyo cid aan ka sokayn.

Halka Holyoake uu leeyahay "iyada oo aan la isku mashquulin arrinka iimaanka- aqbalid iyo diidmo labadaba…[b.9]" Cabdisaciidna aad ayuu ugu soo celcelinayaa oo wuxuu ku baaqayaa in meeshii Muslin iyo Gaal ama Mu'min iyo Mulxid laga odhan lahaa dadka, la adeegsado abla-ablaynta calmaaniga ah ee 'muwaadin' iyo 'shisheeye' ajnabi ah.

Ninka Cabdisaciid leeyahay "Holyoake dhallinyaronimadiisii wuxuu ku saamoobay afkaartii Robert

Owen (1771-1858) ee ku baaqay in bulshada caddaalad iyo horumar loo sameeyo, hirgelinta iskaashatooyinkana ku caanbaxay." isna waa mulxid caan ahaa oo diimaha oo dhan ku tilmaamay macnadarro iyo waxba-kama-jiraan. Walow uu markii dambe, isaga oo 80-jir kor u dhaafay, uu qaatay diin-ku-sheeg "Spiritualism" la odhan jiray oo ay ku buuxinayeen faaruqii ay dareemayeen markii ay Alle dafireen. Waa ninka sheegtay in uu arkay ruuxdii iyo 'rooxaantii' Benjamin Franklin iyo Thomas Jefferson oo ay la hadleen!

Xigashada Holyoake ee ah in "aan la isku mashquulin arrinka iimaanka- aqbalid iyo diidmo labadaba… [b.9]", qoraa Cabdisaciid waxa uu inoogu xejinayaa hadalkii Niije, wuxuuna leeyahay, "Waxaana xusid mudan, in qarnigii 18-aad tan iyo kii 20-aad ay dhulalka reer Galbeedka -siiba Yurub- ku xoogaysatay fikradda sheegaysa in caqliga iyo cilmigu ay timaaddada keeni doonaan in laga maarmo diimaha, dhaqamada iyo gebi ahaanba waxyaabaha ka baxsan aqoonta iyo khibradda laga kasbado garashada ku salaysan dareemayaasha dadka. Waa fikradda loo bixiyey "dhimashada Eebbe." Feylasuufkii Nietzsche-na waa kii suuqa dhexdiisa uga qayliyey: "Eebbe wuu dhintay. Eebbe meyd ayuu ahaan doonaa. Annaga ayaana dilney [bb.9-10]".

Halkaana waxaa inooga cad in aysan Cabdisaciid seegganayn xidhiidhka ka dhexeeya ilxaadka iyo Allediidka iyo calmaaniyadda, oo waaba kan isku xidhay labadii, laakiin walow uu sidan meelo badan xidhiidhkaas ugu muujinayo, haddana meelo kale oo badan ayuu ku dafirayaa!

Dawladdu in ay diin ama mad-hab cayiman leedahay waxyaalo badan ayaa ka dhalanayay. Ingiriiska oo kale, qofku si uu baarlmaanka ugu biiro, ama jaamacad u galo, ama ciidanka uga mid noqdo, waxaa shardi ahayd in uu haysto mad-habta Ingiriiska ee Angalikanka waxaana lagu imtixaanayay caqiiqadooda oo ka kooban 39 qodob. Edward Gibbon oo aan dhawr jeer soo xigtay, yaraantiisi buu Kaatoolig noqday, markaasaa aabbihii u baqay mustaqbalkiisi maadaama uu rabay in uu noqdo xubin baarlamaan. Markaas ayuu "dhaqancelin" ugu diray Iswitsarlaan oo lala dejiyay wadaad ku soo celiya borotestannimadii!

Diinta iyo dawladda ha la kala saaro halkaas iyo meelo la mid ah ayay salka ku haysaa. Robert Owen iyo Holyoake caqabaddaas hortaallay ayay ka dagaallamayeen waxayna u doodayeen "xaq" ka maqnaa.

Aasaasayaashii dawladda Maraykanku markii ay dastuurka ku darayeen in aysan jirin diin rasmi ah, cidna lagu qasbi karin, cidna aan la marin karin imtixaan diimeed si uu xil u qabto, halkaas ayaa ay ka duulayeen. Cidda ay xorriyadda ka qaateen waxay ahayd Ingiriis. Midda kale, Benjamin Franklin iyo Thomas Jefferson ma aysan aaminsanayn Kiristaannimada caadiga ah ee waxay ahaayeen Dheeyist "Deist". Dastuurka Maraykankana kuma qorna in diinta iyo dawladda la kala saaro ee waa fasiraad ay saartay Maxkamadda Sare (Supreme Court).

Waxaa kale oo jirtay in dadkii markii horaba Maraykanka u qaxay ay ka carareen cadaadis diimeed oo ay raadinayeen meel ay diintooda xorriyad ugu helaan. Markaa in mad-hab

rasmi ah la sameeyo ama cid gaar ah ay dawladdu la safataa waxay ahayd wax ku adkaan lahaa dad taariikhdaa leh iyo dal Federaal ahaan la isugu kabkabayay.

Xilligan, qarniyadii 18-aad iyo 19-aad, waxaa saamayn aad u sarraysa ku lahaa dabaqadda waxbaratay, jaamacadaha, fekerka Dheeyisam. Waxayna saamayn ballaadhan ku yeelatay facii Kacaankii Maraykanka. Aasaasayaashii Maraykanka iyo wixii ay aaminsanaayeen waxaa buug ka qoray David L. Holmes (The Faiths of the Founding Fathers).

Dadka Dheeyisam aaminsani way oggolaayeen jiritaanka Alle, laakiin waxay diiddanaayeen waxyi iyo diin gaar ah. Waxay aaminsanaayeen in Alle koonka abuuray laakiin uu faraha ka qaaday, wixii wanaag ahna caqliga lagu garan karo ee aan waxyi loo baahnayn. Qofkii wanaagsanna aakhiro lagu abaalmarin doono. Waxaad mooddaa falsafaddii Ibnu Siinaa iyo kalaamkii Muctazilada in ay qaybo ka qaateen oo ay wax kale ku dul dhiseen.

Jaarlas Taylor markii uu faahfaahiyay aragtiyaha gundhigga u ah calmaaniyadda reer Galbeedka iyo sida ay u tahay arrin raadkeedu si fiican ugu arooro hab fekerka iyo adduun aragga reer Galbeedka ee Kiristaannimada ku dhisan, waxa uu leeyahay: ugu dambayn, ereyadan oo reeryadoodii wata ayaa safray (“Eventually, this constellation of terms, including “secular” and “religious” with all of its baggage of ambiguity and deep assumptions concerning the clear division between immanent and transcendent on on hand

and public and private on the others, begins to travel." [Rethinking Secularism, b.35]

Sannadkii 1798-kii ayuu Nabooliyoon duullaan ballaadhan ku qaaday Masar. Dad badan ayay dileen, muqaddasaadkii Muslimiintana waa ay ku tunteen, ilaa ay masjidka weyn ee As-har fardahoodi xero uga dhigteen! Saddex sano oo iska caabbin ah ka dib waa la saaray. Waxaana beddelay gumeysi Ingiriis oo Masar qabsaday. Halkaas ayaa ay ka yimaaddeen duullaanka shareecada lagaga hayay dhanka Masar. Intii calmaaniyad iyo Galbeedaynta Muslimiinta u ololaynaysay marka raadraac lagu sameeyo, mid walbaa waxa uu dabada la galayaa Faransiis ama Ingiriis. Kuwo badan waxa ay ka soo baxeen goobihii waxbarasho ee Faransiiska ama Ingiriiska. Halkii qawmkii Nebi Muuse ÇS ee dibiga caabuday uu Alle yidhi (وَأُشْرِبُوا فِي قُلُوبِهِمُ الْعِجْلَ) kuwan waxaan odhan karnaa wa ushribuu fii quluubihimul qarba!

"...Dhaladkiiyoow halkeen kaa dhunkadaa"!

Qoraa Cabdisaciid markii uu inoo tibaaxay in mulxidkii Holyoake keenay ereyga "secularism", ee uu inoogu xejiyay hadalkii Niije ee ahaa in Alle dhintay oo aan diin loo baahnayn, waxa uu ku sii xejiyay sidii calmaaniyaddaasi ay dunida Islaamka ku soo gashay iyo ciddii u ololaynaysay:

> "Dunida islaamka doodda calmaaniyaddu waxay ka bilaabatay qarnigii 19-aad. Meelihii ugu horreeyey ee

> dooddaasi ka kacdayna waxaa ka mid ah dalka Masar oo waayahaas ahaa xarunta aqoonta ee muslimiinta." [b.10]
>
> "Xilligaas, raggii doodda calmaaniyadda calanka u siday waxaa ka mid ahaa Farax Antoon (1874-1922), Butrus al-Bustaani (1819-1883), Cabdiraxmaan al-Kawaakibi (1855-1902), Shibli Shumayil (1850-1917), Axmed Ludfi Sayid (1872-1963), Ismaaciil Mutahar (1891-1962), Saatic al-Xusri (1880-1968) iyo qaar kale. Inkasta oo aqoonyahannadan qaarkood aysan isticmaalin erayga calmaaniyad, haddana dhammaantood waxay si cad ugu ol'oleeyeen fikradda kala duwidda diinta iyo dowladda, oo ah nuxurka calmaaniyadda." [b.10].

Haddaba, Farax Antoon wa ayo? Cabdisaciid waxa uu leeyahay, "Farax Antoon wuxuu qoray… [kaas] oo noqday buuggii ugu horreeyey oo af Carabi lagu qoray oo si bareer ah oo faahfaahsan ugu baaqa in diinta iyo dowladda la kala saaro [b.11]."

Waxaa fiicnayd in Cabdisaciid inoo sheego in uu Farax ahaa Lubnaani Kiristaan ahaa oo ka cararay xukunkii Cusmaaniyiinta una wareegay Masar oo Ingiriisku gumeysanayay. Wargeys buu u samaystay in uu calmaaniyaddii reer Galbeedka ku faafiyo, wuxuuna qoray labo noofal oo uu aragtiyihiisi dadka ugu dhex walaaqay (Arrintan noofalladu hadda ayay innagu bilaabatay oo aynu arkaynaa in la inoo qorayo sheekooyin gaalnimo iyo mulxidnimo ka tifiq leeyihiin, laakiin aysan dad badani sidaa u fahansanayn).

Butrus al-Bustaani isna wa ayo? Lubnaani Kiristaan ah. Waa ninka tarjumay Baybalka af Carabiga ku qoran ee

loogu adeegsiga badan yahay. Waxaa kale oo la sheegaa in uu ahaa Maasuuni (Freemason).

Shibli Shumayil? Waa Lubnaani asalkiisu ahaa Kaatooligga Giriigga. Iskuulladii Kiristaanka ayuu ka baxay, ka dibna Jaamacadda Maraykanka ee Bayruut. Wuxuu waxbarasho u aaday Faransiiska. Waa qofkii koowaad ee fikraddii Daarwin af Carabi ku faahfaahiya ee Carabta u sharxa. Wuxuuna ahaa mulxid cabsan Daarwiniyada weliba midda dhanka bulshada ee "Social Darwinism" oo ay feker lagu bannaystay cunsuriyad, faquuq, gumeysi, dabargoynta dad badan, iwm.

Raggani waxay ka carareen xukunkii Cusmaaniyiinta waxayna u guureen Masar oo Ingiriis gumeysanayay. Haddii Holyoake, Farax Antoon, Butrus al-Bustaani, Shibli Shumayil… ay raadinayeen wax ka maqnaa, oo ay rabeen in laga qaybgaliyo siyaasadda iyo arrimaha bulshadaba iyada oo aan gaalnimadooda la eegin, maxaa ka maqan Cabdisaciid oo uu buug uga qoray in gaaloobiddu ay caadi tahay, haddana uu u qoray mid kale oo leh dadka yaan gaalnimo iyo Muslinnimo loo eegine muwaadin ahaan ha loo xisaabiyo oo diinta iyo siyaasadda ha la kala sooco? Yuu u doodayaa oo uu abuukaate u yahay oo uu boos u bannaynayaa? Maxaa isaga safkan galiyay? Ma isagaa "xaq" ka maqan yahay?

Wixii calmaaniyad waday gaalo iyo kuwo aan diin si fiican u haysan bay u badnaayeen. Iyagaa u halgamayay 'xaqooda' iyo inay boos samaystaan ilaa ay markii dambe diintii barabixiyeen kana awood bateen intii diinta wadatay oo ay loollankii ku guulaysteen (Niije iyo hadalkiisi dhimashada Alle, iwm). Ka dibna nidaamkii ay rabeen ee dantoodu ku

jirtay ayay dejiyeen.

الناس على دين ملوكهم

Waxay ka mid tahay sababaha aan Islaamku u oggolayn in qof aan Muslin wanaagsan ahayni uu talo u qabto Muslimiinta.

وَدُّوا لَوْ تَكْفُرُونَ كَمَا كَفَرُوا فَتَكُونُونَ سَوَاءً

An-Nisaa': 89.

Ilaa iyo bilowgii diin iyo diinlaawe way is-hayeen. Nebiyada qisastoodi waynu ka war haynaa. Qarniyadii 18/19-aad ayaa waxaa suuragashay in diinlaawihii ka awood bato Kiristaankii oo diintoodi fasaadiyay, fasaadkii madaxdana qiil iyo qaraabo u noqday, hantidii ummaddana boobay,

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا إِنَّ كَثِيرًا مِّنَ الْأَحْبَارِ وَالرُّهْبَانِ لَيَأْكُلُونَ أَمْوَالَ النَّاسِ بِالْبَاطِلِ وَيَصُدُّونَ عَن سَبِيلِ اللَّهِ

Tawbah: 34.

Masartii ay Farax Antoon, Shibli Shumayil, iyo raggaa kale ka hawlgalayeen waxay ku jirtay gumeysi Ingiriis.

Barafasoor Dalaal Asad ayaa buuggiisa "Formations

of the Secular" waxa uu ku khatimayaa cutub uu kaga hadlayo sidii loo calmaaniyeeyay Masar iyo sharcigeedi xilligii gumeysiga Ingiriiska. Khilaafadii Cusmaaniyiinta ee si jumlo ah u qaadatay sharciyadii reer Yurub (b.210) intii u dhexaysay 1850-1863, toos uma maamulayn Masar. Dhaqaalaha Masarna waxa uu ku jiray gacanta quwadihii Yurub oo dayn aad u badan ku lahaa Masar.

Sannadkii 1880-kii ayaa nidaamkii shareecada wax badan laga beddelay. Saddex sano ka dibna, 1883-kii, hal sano ka dib markii Ingiriisku qabsaday, waxaa la asaasay maxkamado (Mixed Courts) ku shaqeeya xeerarkii reer Yurub oo ay qaadiyaal ka yihiin garsoorayaal reer Yurub ahi. Xeerarkii shareecada ee la beddelay 1880-kii, iyo kuwan reer Yurubkii meesha ku noolaa loo sameeyayba waxay ku salaynaayeen qaanuunkii Nabooliyoon (Napoleonic Code).

Maxkamadihii shareecada waxaa laga mamnuucay in ay qaadaan wixii gar ah ee la xidhiidha fal dembiyeed ama dhaqaale (criminal and commercial), waxaana lagu koobay in ay kala xukumaan wixii la xidhiidha xeerka qoyska iyo awqaafta. Maxkamadihii calmaaniga ahaa ayaa wixii kale oo dhan la wareegay. Dalaal waxa uu leeyahay: isbeddelkaa waxaa bilaabay Yurubiyaan, kadibna iyagaa korjoogtaynayay, ilaa ay markii dambe la wareegeen Masriyiin Yurubiyaanoobay "Europeanized Egyptians" [b.211].

Maxaa kallifay in gadhwadeenkii Masaaridu ay Yurub sidaa u dabo galaan? Labo sababood oo Cabdisaciid inaga siiyay xaaladdii Turkida [hoos ku imanaya] ayuu Dalaal ina siinayaa: Muquunin ka timid Yurubiyaanka, iyo madaxyaweyntii Masaarida oo la dhacsanayaa

habnololeedka reer Yurub. Waxa uu leeyahay: markii Nabooliyoon amray xeerdejiyayaashii Faransiisku in ay qoraan qaanuun madani ah, waxay ku laabtaan qaanuunkii Roomaanka ee Jastiniyaan waxayna dejiyeen waxa la magac baxay Qaanuunkii Nabooliyoon. Markii kuwii Masaariduna ay damceen in ay casriyeeyaan nidaamkii caddaaladda iyo xeerarkiiba, waxay shareecada u arkayeen wax aan habaysnayn baahidana dabooli karin, markaas ayay kuwii Faransiiska u tarjumeen Carabi meelo yarna wax ka beddeleen, taas ayaana noqotay Qaanuunkii Masar.

> "When Napoleon Bonaparte charged the lawmakers of France to draw up a civil code they turned to the Institution of Justinian to devise what come to be known as the Napoleonic Code. And when the Egyptian lawmakers intended in 1883 to modernize the judicial system and legal style [they thought sharia was not organized or adequate enough]... So they translated French compilations into Arabic, and with some slight modifications this became Egyptian law." [b.213].

Laakiin natiijadii ma noqon horumarkii Yurub oo kale "...the results of these changes were not exactly European." [b.217] ayuu leeyahay Dalaal.

Dhanka kale ee calmaaniyaddu Muslimiinta ka soo gashay waa khilaafadii Cusmaaniyiinta iyo Turkiga. Qoraa Cabdisaciid ayaana inoo tibaaxaya taariikhdaas:

"Sida runta ah, Kamaal Ataaturki ma uusan bilaabin calmaaniyada Turkiga, laakiin barnaamij hortiis muddo dheer soo jiitamayey buu si xoog iyo xawli leh ku hirgeliyey. Tusaale ahaan, sannadkii 1839, boqorkii Cusmaanida ee Cabdumajiidkii 1-aad, wuxuu soo saaray wareegto… Dikreetadaas oo dib-u-habayn loogu samaynayey siyaasadaha iyo qorshayaasha la doonayo in dowladdu ku shaqayso, waxaa si cad uga muuqday in dowladdu doonayso in ay ku dhaqanto falsafadda calmaaniyadda.... Wareegtadu waxay … meesha ka saartay qaar ka mid ah qodobadii la xiriiray shareecada ee loo arkay in ay ka hor-imaanayaan xuquuqda insaanka, sida ciqaabta dilka qofka diinta ka baxa ee loo yaqaan xadka riddada oo la tirtiray, laguna beddelay qodob tibaaxaya xorriyadda diinta. [bb.14-15]."

Maxaa kallifay in sidaa la yeelo? Qoraa Cabdisaciid ayaa inooga jawaabaya: "Dib-u-habaynta dowladdii Cusmaanida iyo soo saaridda wareegtadaan waxaa u sabab ahaa saddex arrimood oo isbiirsaday oo kala ah: cadaadis ka yimid dhanka Ruushka iyo quwadaha Reer Galbeedka oo ku doodayey in ay difaacayaan xuquuqda dadka Masiixida ah ee laga tiro badan yahay ee u dhaqan dunida Islaamka iyo dhanka kale boqorrada Cusmaanida oo iyaguna dhankooda doonayey in ay kasbadaan laabta iyo maanka raciyada aan Muslimiinta ahayn ee xukunkooda hoos yimaadda iyo arrinka saddexaad oo ah in tiro aan yarayn oo ka mid ah dabaqadda ladan ee Turkida -siiba kuwii ku dhaqnaa magaalada Istaanbuul- ay la dhacsanaayeen fikradihii iyo nidaamkii dhaqan-dhaqaale ee Faransiiska oo calmaaniyaddu ay ka midka tahay. Saddexdaas arrimood oo isbiirsaday baa sabab u ahaa soo saaridda wareegta iyo hawlihii ka dambeeyay [bb.15-16]."

Qoraa Cabdisaciid waxa uu inoo sheegayaa in ay wareegtadaa soo dhoweeyeen "aqoonyahanno u badan masiixidii Suuriya iyo Lubnaan, oo iyagu waagaas u badnaa waxbarashada iyo saxaafadda carabta [b.16]." Aqoonyahannadan waxaa ku jira Butrus al-Bustaani oo uu qoraa Cabdisaciid boggan inoogu sheegayo in uu "caan ku ahaa naanaysta 'macallin Butrus,' [b.16]"

Turkidii la dhacsanaa "fikradihii iyo nidaamkii dhaqan-dhaqaale ee Faransiiska oo ay calmaaniyaddu ka midka ahayd [b.15] waxaa ka mid ahaa Ataaturk. Patrick Kinross oo qoray taariikh nololeedka Ataaturk (Ataturk: The Birth of a Nation) waxa uu leeyahay "It was a restless mind, nurtured on those principles of Western civilization which had influenced Turkish liberal thought since the nineteenth century;" … "introduced him to the works of the French political philosphers-Rousseau and Voltaire, Auguste Comte, Desmoulins, Montesquieu." … "Kemal began to see that the real enemy of his people was not simply the foreigner, from whom, despite his aggressive designs, they had after all something to learn. The enemy lay within their own ranks. It was the Moslem religion, which oppressed them and stunted their growth, shutting them off from the more advanced and enlightened ways of the Christian peoples."

Halkaa uu leeyahay Kamaal wuxuu yaqiinsaday in cadowga dhabta ah ee dadkiisu uusan ahayn shisheeye ee uu dhexdooda ku jiro, cadowgaas oo ah diinta Islaamka. Isla intan waxaa inoo sheegay Cabdisaciid oo leh, "Ataaturk oo rumaysnaa in islaamku uu sabab u yahay dibudhaca Turkiga haystaa, 29kii Oktoobar 1923 wuxuu ku dhawaaqay in

Turkigu uu yahay jamhuuriyad calmaani ah, …" ee hoosqor [26] ee bogga 13.

Markii dagaalkii koowaad ee dunida laga guuleystay Turkidii iyo xulafadoodi, janaraalkii Faransiiska ahaa ee Istanbuul galay waxa uu saarnaa faras cad. Tolow muxuu uga jeeday? Markii Muslmiintu ay magaalada qabsadeen 450 sano ka hor, suldaan Maxamed al-Faatix ayaa magaalada ku soo galay faras cad. Waa aargoosi uusan illaawin calmaanigaa Faransiiska ahi. Xusuusnoow in Faransiisku ahaa meeshii laga soo abaabuli jiray duullaannadii saliibiyiinta ee Baytul Maqdis lagu qabsaday, ilaa iyo haddana dalalka Yurub midka Turkida ugu neceb waa Faransiiska. Laakiin nacasyada "Ferenjigu fariideeyay" garashadaa ma laha.

Taariikhdaa iyo sooyaalkaa ay calmaaniyaddu soo martay iyada oo uu jiro, Cabdisaciidna qayb ka mid ah ina la wadaagay, ayna caddahay in ay inagu soo gashay xoog iyo qasab iyo muquunin iyo gumeysi reer Galbeed, intii markaa u ololaynaysayna ay ahaayeen Kiristaan ama mulxidiin Carbeed, ninkii Holyoake ee ereyga calmaaniyad tumaaliyayna uu ahaa mulxid ka cararayay ereyada mulxid ama murtad oo sidaa darteed u keenay ereyga calmaaniyad, haddana qoraa Cabdisaciid indhaha inta uu ina qabto ayaa waxa uu ina weydiinayaa: "Calmaaniyaddu ma gaalnimaa?" …"Calmaaniyaddu ma badeeco reer Galbeed oo reer Bariga

iyo Muslimiintu aysan shuqul ku lahayn baa? [b.24]." Cabdisaciid waxa uu leeyahay, "Wadaaddada islaamka siyaasiga ahi calmaaniyadda aad bay u colaadiyaan, waxayna ku sheegaan sifo walba oo la neceb yahay, oo waxay ku sheegaan akhlaaq xumo, fusuq, riddo, gaalnimo iyo gaal-kalkaal. Laakiin sida xaqiiqadu tahay, calmaaniyaddu diinta lid kuma aha… [bb.24-25]."

Intaa kaga hadhi maayee, intuu Erdogaan iyo Qanuushi iyo Rafsanjaani inooga dhigo wadaaddo aqoonta diinta looga dambeeyo, oo uu weerar ku qaado, ayuu mar kale u soo noqonayaa asalka calmaaniyadda aynu sooyaalkiisa tibaaxnay. Waxa uuna Cabdisaciid leeyahay, "Dunida Islaamka, doodaha calmaaniyadda lagu deedifeeyo waxaa ugu xoog badan midda ku andacoonaysa in calmaaniyaddu ay tahay fikrad dhulalka Galbeedka ka curatay, oo diinta Masiixiga ku salaysan, xalna u ahayd dhib halkaas ka jirey oo ah dagaalladii dabada dheeraaday ee muddada boqolka sano ka badan u dhexeeyey labada mad'habood ee diinta Masiixiga ee Borootostanka iyo Katooliga (1337-1453 iyo 1618-1648)... Doodda caynkaan ah ee calmaaniyadda lagula dagaallamo oo ay faafiyaan wadaaddada islaamka siyaasiga iyo mustashriqiinta qaarkood, waa dood aan cago qumman ku taagnayn oo badankeedu been iyo buunbuunin ku salaysan. Waa run in doodda calmaaniyadda xooggeedu ay waddammada Galbeedka ka bilaabatay, sidoo kale waa dhab in wadaaddada Masiixiga badankooda lagu dirqiyey in diinta iyo dowladda la kala saaro,... [bb.37-38]"

Jaamacadda Indhacaddays wuuba ka qalinjabiyee dufcadee buu ahaa!

Dafiraadda indhacaddaynta ku dhisan inta aynu indhaha la lalinno, aynu eegno dood kale oo Cabdisaciid uu ereyga "calmaani" kaga dhigayo mid dhalad ah ee aan la soo dhoofin.

> "Hor iyo horraan, waxaa jira aqoonyahanno carbeed oo aan badnayn oo ku dooda in erayada "calmaani iyo calmaaniyad", aysan ahayn erayo soo galooti ah, balse ay yihiin erayo dhalad ah oo ka mid ah afka carabiga iyo afafka kale ee saamiga intaba. Dadkaani waxay ku doodaan in erayga laga soo qaatay erayga "caalam" oo laga wado adduunyada, … waxyaabaha dadkaani daliishadaan waxaa ka mid ah oraah laga soo wariyo aqoonyahan Masri ahaa oo la oran jirey "Saawariis ibnu Muqafac", oo kun sano ka hor noolaa. … Taas oo jirta, haddana waxaa loo badan yahay in eraybixintu ay tahay tarjamada labada eraybixinood ee afafka reer Galbeedka ku jira ee 'sekulaarism = secularism' iyo 'Laysitee = laïcité' [b.3]."

Halkan waxaa laga dheehan karaa in qoraagu uusan taageerayn in ereyadani ay dhalad yihiin. Laakiin maqaalka labaad waxaa ka muuqda isbeddel weyn. Saawiiras iyo Cabdisaciidba waa ay isbeddelayaan:

Labadii dhambaal ee hore arrimihii aan kaga hadlay marka ay dhammaadaan, qoraagu waxa uu keenayaa su'aashan: "Calmaaniyadu Ma Wax Xun Baa? [b.62]" Waxa uu u jawaabayaa "Kuwa isku hawla in ay calmaaniyadda dadka ku diraan (= u foolxumeeyaan)".

Qoraagu waxa uu leeyahay: "Wadaaddada calmaaniyadda

dadka u bahal geliyaa waxay si joogto ah ugu doodaan in erayga calmaaniyadu yahay mid muslimiinta looga keenay dhanka Reer-galbeedka, laakiin xaqiiqdii eraygu ma aha mid muslimiinta oo dhan dhoof ugu yimid, balse waa eray Carabtu muddo dheer taqiin. [b.63]"

Maxaa u daliil ah?

> "Tusaale ahaanna, Ibnu Muqafac al-Masri oo noolaa qarnigii 4-aad ee hijrada nebiga (SCW), laguna tiriyo in uu ka mid yahay aqoon-yahannada Carbeed kuwooda ugu tug-tugta roon, buuggiisa "Misbaax al-Caqli/ Feynuusta Fahanka" ruuxa calmaaniga ah wuxuu ku qeexay inuu yahay: "Qofka aan wadaadka ahayn/ Man Leysa Raahiban".

Iyada oo uu bogga 55-aad ku yidhi "Erayga dowlad quraanka iyo sunnada midkoodna kuma soo aroorin", si uu u diido in Islaamku leeyahay wax dawlad la yidhaahdo, hadda calmaaniyaddu in ay dhalad tahay waxa uu u soo daliishaday ninkan magaca Carbeed wata, Ibnu Muqafac al-Masri. Saawiiras ma joogo. Maadaama qoraagu maqaalladan kala waqti faafiyay, in uu magaca maldahaa waa gef iyo daacadnimo-darro.

Saawiiras, ama Ibnul Muqafac al-Masrii wuxuu ahaa wadaad Kiristaan ah oo ka tirsanaa wadaaddadii Qibdiyiinta Masar. Buugga uu qoraagu magacaabayna waxa uu ka tirsan yahay kutubtooda. Si uu marinhabaabinta u sii xoojiyo waa ka raacinaya: "laguna tiriyo in uu ka mid yahay aqoon-yahannada Carbeed kuwooda ugu tug-tugta roon,". Ilama aha in ay yaqaannaan cid ka baxsan Qibdiyiinta iyo inta

xidhiidhka la leh ama daraasaysa arrimahooda, iska daa in uu noqdo nin kaalin sidaa u weyn Carabta dhexdeeda ku lehe (waa haddii uusan qoraagu ku qaldayn Cabdullaahi ibnul Muqaffacii qoray Kaliilah iyo Dimnah ee geeriyooday 145H, intaan imaam Shaafici dhalan). Marka wadaadkani leeyahay calmaanigu waa qofkii aan raahib ahayn, waxa uu adeegsanayaa waa ereybixin Kiristaan. Islaamku raahib ma leeyahay? Waa maya. Alle ayaana Kiristaanka ku dhaleeceeyay in ay la yimaaddeen rahbaaniyad taas oo ah bidco.

وَرَهْبَانِيَّةً ابْتَدَعُوهَا مَا كَتَبْنَاهَا عَلَيْهِمْ

Al-Xadiid: 27.

Mar kale qoraagu waxa uu ereyga calmaani inooga raadinayaa qaamuuska si uu u dhaho waa erey dhalad ah. Waxa uu soo xiganayaa al-Mucjam al-Wasiid, qaabka uu hadalka u dhigayo, iyo sida uu ugu xejiyay hadalka Saawiirasna waxaa laga dheehan karaa in uu rabo in uu ina dareensiiyo in qaamuuskani yahay kuwii hore ee qadiimka ahaa. Laakiin guddida qortay waxaa Masar laga magacaabay 1936-kii markii saaxadda aqooneed ee Masar ay calmaaniyiintu haysteen, dabcaddiisi koowaadna waxay soo baxday 1960-kii!

Intaa ka dib waxa uu leeyahay, “Halkaasna waxaa nooga caddaanaya in kun sano ka hor carabtii Ibnu Muqafac la noolaa ay garanayeen macnaha erayga calmaani, erayguna uu la macne ahaa erayga soomaaliga ah ee waranle, oo si la mid ah sida Soomaalidu ragga ugu qaybiyaan wadaad iyo

waranle ayaa carabtuna dadka ugu qaybin jireen wadaad iyo calmaani [b.63]."

Carabtu dadka uma qaybin jirin wadaad iyo calmaani. Wadaadkanina ma ahayn nin saamayn ku leh "Carab" ee wuxuu ku koobnaa oo wax u qorayay dadkiisi Qibdiyiinta ahaa. Kala qaybinta raahib iyo calmaanina wax xidhiidh ah lama laha dadka guud ee waa ereybixin u gaar ahayd wadaaddada kaniisadda, sida aynu ku aragnay kor. Wadaadka aan dadka soo dhexgalin ee khalwada ku jira ayaa raahib la odhan jiray, midka dadka dhex jooga ee arrimahooda kala agaasimana waxaa la odhan jiray calmaani oo wuu ka darajo hooseeyay raahibka oo wuxuu ahaa nin caammada iyo adduun 'aan daahir ahayn' ku dhex jira oo aan cibaado iyo khalwo u go'in. Saqaafada Carbeed ee Islaamiga ah dadku waxay u qaybsanaayeen caamo iyo culimo. Dhaqanka Soomaaliyeedna sidaas ayuu ahaa. Markii dagaal la joogo ayaa wadaad iyo waranle la ahaa, iyada oo wadaadku dagaalkana kaalin barakayn ku lahaa.

> "Waa xaqiiqo dhab ah in calmaaniyaddu Yurub -iyo guud ahaan reer galbeedka- uga hanaqaadday si aysan uga hanaqaadin dunida inteeda kale, laakiin taa macnaheedu ma ah in calmaaniyaddu tahay badeeco Yurub si gaar ah u leedahay, [b.64]" ayuu Cabdisaciid yidhi.

Faylasuuf siyaasadeed oo calmaani ah lana yidhaahdo Larry Siedentop ayaa waxa uu yidhi, calmaaniyayntu waa hadyad ay Kiristaaniyadu siisay adduunka, "secularization is Christianity's gift to the world." Hadalkaa waxaa soo xigtay siyaasi iyo khabiir dhaqaalayahan ah oo Ingiriis ah, Lord

Robert Skidelsky, mar uu maqaal ka qorayay isbeddelka bulsheed ee ay qaxootiga Muslimiinta ahi ku hayaan Yurub. Dalaal Asad waxa uu leeyahay ma aha markii ugu horreysay ee sidan la isugu sidko Kiristaannimada iyo calmaaniyadda, waxaana isla hadalkan laga hayaa dhawr ka mid ah madaxyaweyntii fikir ee Yurub, sida Max Weber [Secular Translations, bb.13-14]. Dalaal waxa uu isweydiinayaa sababta calmaani caddaystay uu u sheeganayo dhaxal iyo sooyaal Kiristaannimo ("why is it important for self described secularists to claim a Christian heritage?"). Waxa uu leeyahay, sheegashada noocaas ah waxaa ka dhalanaya faquuq iyo takoor lagu samaynayo ciddii aan dhaxalkaa waxba ku lahayn oo laga riixanayo saaxadda siyaasadda ("one can clearly see what the effect of such a claim is: the political exclusion of all those who can not claim that heritage." [b.14].

Sooyaalkii calmaaniyadda Cabdisaciid ku baaqayaa waa kaas. Galbeed dhinacna uma dhaafto. Waana iskadhal.

Cabdisaciid qummanihiisaa qoorta ugu jira, taariikhna dan kama laha ee yoolkiisu waa in uu tashuush iyo shaki inagu furo, maadaama uusan hayn dood maangal ah oo uu inagu qancin karo.

وَمِنَ النَّاسِ مَن يُجَادِلُ فِي اللَّهِ بِغَيْرِ عِلْمٍ وَلَا هُدًى وَلَا كِتَابٍ مُّنِيرٍ ﴿٨﴾

Al-Xaj: 8.



"Dayaxoo caddadu taam u tahay oo tahan ka nuuraaya,
Gudcur bay la tahay nimuu indhaha cudur ka tuuraaye."

—Xaaji Aadan Afqalooc



“Ilaahii makhluuqoo dhan iyo, dunidan meegaaray,
Muslinnimo kolkuu soo dejay, ee Maxamed soo saaray,
Ee magaca aan sheeganiyo, midabka noo yeelay,
Ee uu madow nooga dhigay, amase maariinka,
Ee uu mabada'a noogu xidhay, muuminnimo khaas ah,
Wallee inuusan meeqaan xille iyo, meel xun noo dirine,
Ma maroorto suu nala damcay, ee way macaan tahaye,
Mana moogin tuu mudan yahee, mahadnaq weeyaane,
Isagaa Macbuudkii ah oon, magangalaynaaye,
Mana jiro wax kale oo maslaa, muran la'aantiiye,
Rabbigay mid weeye e, kuwii shan u malaynaayey,
Kol haddaanay taanadii maqlayn, Maxamed noo sheegay,
Muraad kama galayno e, sidaa ha iska moodeene.”

—Dhoodaan: Ha Midowdo.

DHAMBAALKA JIMCAHA – 39

30 Rabiicul Awal 1443
05 Nofembar 2021

AFAR

وَدُّوا لَوْ تَكْفُرُونَ كَمَا كَفَرُوا فَتَكُونُونَ سَوَاءً

وَرَهْبَانِيَّةً ابْتَدَعُوهَا

Bidcadii ay Kiristaanku allifteen ee ay jiritaankii u kala saareen calmaani aan daahir ahayn iyo qaybi (maqane) muqaddas ah, halkii kuma joogine waa ay farcantay (sida bidco kasta caado u ah). Waa tii aynu dhambaalkii hore ku soo marnay faylasuuf Jaarlas Taylor oo tilmaamaya in qarnigii 17-aad laga bilaabo ay suuroowday in la isku koobo qaybta calmaaniga ah oo laga maarmi karo wixii diin iyo muqaddas iyo samada iyo qayb aan la arkayn ku tacalluqa. Noloshii bulshadana waxaa la bilaabay in lagu fahmo indho adduunkan la joogo uun arka. Wixii adduunkan ka baxsan iyo in meel sare wax laga fishaana ay tahay khuraafo dadku

allifteen; yacnii Alle looma baahna, waxaana timid in xaadirkii lagu noolaa uu xorriyad ka qaato qaybkii aan la arkayn iyo jiritaan kore.

Kala qaybintii hore waxaa ka farcamay lammaane kale: 'calmaani' tilmaamaya xaadirkan la joogo ee iskufilnaansho gaadhay, iyo 'diini' oo la xidhiidha wixii adduunkan ka baxsan ee maqane iyo qayb ah. Haddana waxaa dhashay macne kale oo ah in "calmaani" ka tarjumayo wixii xaqiiqo ku dhisan, halka "diin" ay la macne noqotay khuraafo iyo gacan-ku-samays aan run ku dhisnayn, taas oo ay ku lammaan tahay in aysan jirin wax maqane ama qayb ahi. Jaarlas waxa uu intaa ku darayaa macne saddexaad oo ereyadan la sii huwiyay, waxa uuna leeyahay: "calmaani" waxaa noqday wixii adduunkan ku noolaantiisa looga baahnaa, halka "diin" ay noqotay sidii "far" dheeraad ah (optional accessory) oo badanaa carqaladaysa nolosha adduunkan. Cabdisaciid oo aragtidan ka duulayaa waxa uu leeyahay, "Iimaanku nooca uu doono ha ahaadee waxa uu la mid yahay caashaqa, wuxuuna khuseeyaa cidda rumaysan oo keli ah, [b.ix]". Mar kale iyo Cabdisaciid, "Calmaaniyaddu waxay u xilsaaran tahay wixii muuqda ee nolosha adduunyada ku saabsan, halka diintu u xilsaaran tahay maqanaha iyo wixii ka baxsan dabeecadda [b.5]" Yacnii khuraafada iyo sheeko-baraleyda.

Cabdisaciid waxa uu leeyahay, "Dunida casriga ah… dadku waxay heleen aalado iyo aragtiyo ka baxsan diinta oo ay ifafaalayaasha dunida ku macneeyaan. Waxaana batay shakiga iyo su'aalaha dadku ay isweydiiyaan, waxaana yaraatay yaqiinta lagu qabo waxa la haysto ama la ogyahay [b.21]." Isaga oo dooddiisi sii wata waxa uu leeyahay, "kala taggaas ku yimid cilmiga iyo diinta baa u asal ah waxa

loo bixiyey "calmaaniyadda". U fiirso sida uu u qirayo in calmaaniyaddu ay ku salaysan tahay ka aaminbixid laga aaminbaxay kalsoonidii lagu qabay runnimada diinta ayna tahay beddel booskii diinta galay. Laakiin taas meelo kale waa ku dafirayaa, isburintuna waa caadadiisa. Bal eeg:

> "Casriyadii calmaaniyadda ka horreeyey gebi ahaan noloshu … waxay ku xirnayd maqanaha diinta iyo sixirku ay hoggaanka u hayeen, laakiin dunida casriga ah ilaa heer kaalinkii maqanaha waxaa galay caqliga iyo cilmiga. Sidaa aawadeed, calmaaniyaddu waa jiraysaa, … calmaaniyaddu ma tirtirto diinta, laakiin waxay astaysaa meelaha iyo siyaabaha ay u shaqayn karto [b.22]."

Tuduca ku xigana waxa uu leeyahay: "cilmigu ma gali karo kaalinta diinta…" [b.22].

Jaarlas waxa uu sii raacinayaa in dhalanroggan ku yimid ereyadu uu keenay in calmaani iyo diini ay lid isugu noqdaan sida run iyo been ama lamahuraan iyo faakihaysi aan israaci karin ee ay tahay in midkood la dhowro midka kalana meesha laga saaro. Haddii markii hore Dheeyistigu ay aaminsanaayeen jiritaanka Alle wax abuuray, hadda waxaa timid in dabiicadu (nature/ الطبيعة) ay tahay abuuraha, taqwada la iska rabaana ay tahay caqiido dabiicada ku dhisan. Halkaa waxaa ku baxday, oo aan la aqbali karin diin fagaaraha joogta, waana in ay ku ekaataa meel qofkii aaminsan u gaar ah (guriga, masjidka, kaniisadda, …), sida caashaqa uu Cabdisaciid sheegay. Bulshada akhlaaqdeedi iyo anshaxeedina waa in laga xoreeyaa in ay diintu saamayn

ku yeelato, waana in lagu saleeyo caqliga oo keli ah oo aan waxyi boos laga siin. [Rethinking Secularism, b.34-35]. Ma aha in dooddani beri hore iyo kacaankii Faransiiska ku koobnayd e, sida Jaarlas sheegayo, waa mid ilaa hadda socota.

Cabdisaciid isaga oo taas muujinaya waxa uu leeyahay,

> "Akhlaaqdu diimaha waa ka horraysay, waxaana wadaaga muuminiinta Alle rumaysan iyo mulxidiinta aan Alle rumaysnayn… diimuhu akhlaaqda ma abuuraan, laakiin waa dhiirrigeliyaan. Sidaa awgeed, waa ceeb iyo gef in akhlaaqda diin iyo qolo gaar ah loogu abtiriyo [b.72]."

Haddii Yurubtii qarnigii 18-aad ee horumarka, maanfurnaanta, iyo tanwiirka lagu tilmaamay, ay dooddani ku cusbayd, kana ahayd horumarkii ugu dambeeyay, inaga wax cusub inooma aha. Waa caqiidadii Dahriyiinta ee Alle ku sheegay Qur'aanka. Mulxidiinta Dahriyada, mulxidiintii qarnigii 19-aad, iyo kuwa hadda joogana waxba uma dhexeeyaan aan ka ahayn faahfaahinta caqiidadooda. Booskii Alle waxay galiyeen dabiicada (nature/ evolution by natural selection...)

وَقَالُوا مَا هِيَ إِلَّا حَيَاتُنَا الدُّنْيَا نَمُوتُ وَنَحْيَا وَمَا يُهْلِكُنَا إِلَّا الدَّهْرُ
وَمَا لَهُمْ بِذَٰلِكَ مِنْ عِلْمٍ إِنْ هُمْ إِلَّا يَظُنُّونَ ﴿٢٤﴾

Al-Jaathiyah: 24.

Horumarka maanta lagu diimayaa waa caqligii mushrikiintii Carbeed: wuxuba waa noloshayada adduun—

waanu dhimanaynaa waanuna noolaanaynaa, nala soona bixin maayo (aakhiro), waxa noo taliyaana waa dabiicada.

إِنْ هِيَ إِلَّا حَيَاتُنَا الدُّنْيَا نَمُوتُ وَنَحْيَا وَمَا نَحْنُ بِمَبْعُوثِينَ ﴿٣٧﴾

Al-Mu'minuun: 37.

Ibliis wuu ku duufsan karaa, doqonnimana wuu kuu qurxin karaa, laakiin isagaba xeeladihiisu way xaddidan yihiin oo tirabbeel ma aha, waana taas mulxidka maanta jooga ee maanfurnaanta iyo caqliga sheeganayaa uusan dhaafin caqligii mushrikiintii Carbeed ee intay timirta sanam ka sameeyaan caabudi jiray, ka dibna cuni jiray marka ay gaajoodaan! Maantana Galbeedku sanamka xorriyadda marna way caabudaan markay u baahdaanna way cunaan.

إِنَّ كَيْدَ الشَّيْطَانِ كَانَ ضَعِيفًا ﴿٧٦﴾

An-Nisaa': 76.

Calmaaniyaddu ma aha oo keliya in diinta iyo dawladda la kala saaro, ee waa ay ka gudo weyn tahay, waana nidaam leh aragtiyo u gaar ah oo la xidhiidha waxay yihiin diin, anshax, iyo siyaasad, sida uu tilmaamayo Dalaal Asad [Formations of the Secular, b.1-2: "Secularism… is easy to think of it simply as requiring the separation of religious from secular institutions in government, but that is not all it is… What is distinctive about "secularism" is that it presupposes new concepts of "religion," "ethics," and "politics," and new imperatives associated with them."]

Markii Kacaankii Faransiiska ka dib ay mulxidiintii la wareegeen taladii, waxay bilaabeen mashruuc diin tirtirid ah. Waxay isweydiiyeen booskii diintu dadka ugu jirtay wixii ay ku buuxin lahaayeen. Waxay tumaaliyeen ereyga aydhiyoolaji (ideology) si ay u sameeyaan beddel haga anshaxa iyo akhlaaqda bulshada. Waxay la wareegeen dhismayaashii kaniisadaha oo ay u beddeleen "Macbadyada Caqliga". Waxan oo dhan caqliga hagayaa waxa uu ahaa inay aaminsanaayeen in calmaaninnimadu ay tahay lidka diinta ("...the secular as a kind of antireligion." [Rethinking Secularism, b.8]).

Calmaaniyaddu waa hannaan fikradeed ku dhisan aragtiyo aan diini ahayn kuwaas oo la barbardhigi karo diinta. Markan calmaaninnimada macnaheedu waa in qofku yeesho adduun-arag si qayaxan u kala soocaya habnololeedka diimeed iyo midka kale. Aragtidan waxaa ku lammaan rejada in bulshadu sii calmaaniyoobi doonto, ahmiyadda ay diintu ku leedahay arrimaha bulshaduna ay hoos u dhici doonto. Waxaana dadka qaar arrintan u arkaan in ay hordhac u tahay horumarka iyo casrinnimada ("In another view, secularism implies a framework of nonreligious ideas that is explicitly contrasted with religion. To be a secularist, in this sense, is to adopt a stance toward life that clearly separates religious from nonreligious ways of being. It is this view that is linked to expectations of continued secularization within society and diminishing of the importance of religion in social affairs." [Rethinking Secularism, bb.8-9].

Calmaaninnimadu ma aha faaruq sidii sabuurad diintii ku qornayd laga tirtiray e, sida uu tilmaamayo Dalaal Asad,

waa mafhuum kulminaya habdhaqanno, aqoonno, dookhyo iyo dhadhan gaar ah oo la xidhiidha nolosha casriga ah—"I take the secular to be a concept that brings together certain behaviours, knowledges, and sensibilities in modern life." [Formations of the Secular, b.25]".

Dad bay u tahay marxalad horumar iyo qaangaadh oo lagaga koro diinta—"But, finally, we should recognize the prominence of a secularist ideology that goes beyond affirming the virtues of the ostensibly neutral. The secular is claimed by many, not just as one way of organizing life, not just as useful in order to ensure peace and harmony among different religions, but as a kind of maturation. It is held to be a developmental achievement. Some people feel they are "better" because they have overcome illusion and attained the maturity identified with secularism… as a kind of escape from culture, national and religious, into a realm of apparently pure reason, universal rights, and global interconnections." [Rethinking Secularism, b.20]

Sidii la doonaba ha loo qeexo calmaaninnimo iyo calmaaniyad e, ayaa ay leeyihiin tifaftirayaasha buugga Rethinking Secularism [b.5], waxay lugta la galaysaa diin—ama waa maqnaashaha diinta, kontoroolidda iyo xakamaynta diinta, noocyadeeda kala duwan oo sinnaan lagu la dhaqmo, ama in gebigeedaba lagu beddelo qiyamka (qaayasoorrada) bulsho ee habnololeedka calmaaniga ah. Inkastoo badanaa loo qeexo inay tahay waxa soo hadha marka diintu meesha ka baxdo, calmaaniyaddu ma aha

dhexdhexaad. Calmaaniyadda waa in loo arkaa wax jiritaankiisa leh, sidaas awgeedna u baahan faahfaahin iyo fahan. Haddii ay tahay aaydhiyoolojiyad, adduun-arag, mabda' diinta laga istaago, qaadhismeed dastuureed, ama dhinac ka mid ah mashruuc kale—saynis ama hannaan falsafadeed oo gaar ah—calmaaniyaddu ma aha maqnaanta diinta oo keli ah e, waa wax u baahan in aan ka fikirno.

> "However one defines secularity and secularism—a matter that we will get to below—it involves religion. It is either the absence of it, the control over it, the equal treatment of its various forms, or its replacement by the social values common to a secular way of life. For although secularism is often defined negatively—as what is left after religion fades—it is not in itself neutral. Secularism should be seen as a presence. It is something, and it is therefore in need of elaboration and understanding. Whether it is seen as an ideology, a worldview, a stance toward religion, a constitutional framework, or simply an aspect of some other project—of science or a particular philosophical system—secularism is, rather than merely the absence of religion, something we need to think through [b.5]."

Cabdisaciid 30-ka bog ee buuggiisa ugu horreeya, waxa uu calmaaniyadda qeexayaa ugu yaraan 20 jeer!

Dhambaalkii Jimcihii hore waxaan ku soo qaatay Cabdisaciid oo ku doodaya in aysan cago qumman ku taagnayn doodda ah calmaaniyaddu waa wax Galbeedka laga soo dhoofiyay. Haddaba bal aynu eegno meesha uu ka keenayo qeexitaanka calmaaniyadda ee uu sidaa ugu soo celceliyay. Waxaan isku dayayaa in aan faallo yar raaciyo

meelaha qaar.

> "'Calmaaniyadda", ama kala duwidda diinta iyo dowladda [b.ix].' "Calmaaniyaddu ma aha sifo qofka ama bulshadu ay leeyihiin, ee waa tilmaan dawladdu ay leedahay … balse macnaheedu waa in diinta iyo dowladda la kala saaro, dadkana diintooda iyo damiirkooda faraha looga qaado si ay Allahood ugu caabudaan sida ay iyagu ku qancaan [b.ix]."

Calmaaniyaddu waa tilmaan. Qof baa lagu tilmaami karaa, fikrad ayaa lagu tilmaami karaa, dawlad ayaa lagu tilmaami karaa, xilli ayaa lagu tilmaami karaa. Cabdisaciid ayaaba soo xiganaya iyada oo ah tilmaanta xilli, sida cinwaanka buugga *A Secular Age* ee Charles Taylor.

> "Wixii dunyawi ah ee la xiriira nolosha adduunyada, shuqulna aan ku lahayn ummuuraha ruuxda iyo diimaha [b.4]."

> "Calmaaniyaddu waa wixii aan ku tacaluqin diin iyo ruuxaaniyad, [b.4]"

> [Laysite] "waxaa loo adeegsaday macne ah "ka madax bannaan diimaha iyo mabaadida diimaha [b.5]."

> "Eraybixin ahaanna waxaa lagu qeexay: xorriyadda diinta, kala saaridda kaniisadda iyo dowladda iyo in diintu aysan raad ku yeelan fagaarayaasha dadweynaha (= public sphere) [b.5]."

U fiirso ereyada 'kaniisad' iyo 'fagaarayaasha dadweynaha (= public sphere)'. Kaniisad inagu ma lihine, halkaa inaga dhig. Ereybixinta 'fagaarayaasha dadweynaha' halkee ayuu ka keenay? Labo faylasuuf oo kala ah Jarmal (Habermas) iyo Maraykan (Rawls) ayaa dooddan gadhwadeen ka ah.

> "Calmaaniyaddu waxay u xilsaaran tahay wixii muuqda ee nolosha adduunyada ku saabsan, halka diintu ay u xilsaaran tahay maqanaha iyo wixii ka baxsan dabeecadda dadka [b.5]."

Fikraddani inay ka timid Kiristaanka Galbeed (Western Christianity) waxaynu ku soo aranay dhambaalkii Jimcihii hore. Waa halkii ay jiritaanka u qaybiyeen immanent/temporal iyo transcendent/sacred. Diinteennu sowta dhalasho ilaa dhimasho kaalinta weyn ku leh nolosheenna, halkee ayuu ka keenay in ay ku kooban tahay maqanaha qaybka ah iyo "wixii ka baxsan dabeecadda dadka"? Marka la dhaho xammaal ha u noqon aragtiyaha dad kale, cay iyo caraatan ayuu bilaabayaa.

> "Haddii laga duulo erayadii madaxweyne Thomas Jefferson, calmaaniyaddu waxay noqonaysaa in derbi la kala dhex dhigo dowladda iyo hey'adaha diinta (=kaniisadda/masjidka). Kolka la adeegsado oraahdii Max Weber-na (1864-1920), calmaaniyaddu waa in "dunida laga siibo dabeecadda sixirka" (=Disenchantment of the world…) oo diinta la adduumeeyo (= دنيـوة الديـن) [bb.5-6]." … "Waxaana xusid mudan, in sixirfuryeynta adduunyadu … aysan la macne ahayn sixirfuryeynta dadka, maxaa yeelay dowladda oo calmaani ah ayaa dadku diintooda haysan

karaan, … [b.6]”
—yacnii: way sixranaan karaan!

Eeg sida uu “masjidka” meesha ugu cidhiidhinayo. Masjidku ma meel lagu tukadaa mise waa hay’ad diimeed? Kaniisadda ayaa sooyaalka reer Yurub ahayd hay’ad diimeed oo sidaa loo aqoonsan yahay. Innaga iska daaye, xitaa Yuhuuddu ma laha wax u dhigma kaniisadda oo la dhihi karo “hey’adaha diinta”. Waxa uu si toos ah u soo guurinayaa aragtiyihii Kiristaannimada reer Galbeedka.

Thomas Jefferson (Maraykan cad) oo addoonsan jiray 600 oo qof oo Afrikaan ah, waxa uu inoogu xejiyay Maakis Weber (Jarmal cad) oo si qayaxan u leh diintu waa sidii sixir horumarkuna wuxuu ku xidhan yahay in sixirkaa la furo oo diinta la fogeeyo.

Diinta iyo Qur'aanka yaa sixir ku sheegi jiray? Nebiga yaa saaxir ku tilmaami jiray?

وَلَوْ نَزَّلْنَا عَلَيْكَ كِتَابًا فِي قِرْطَاسٍ فَلَمَسُوهُ بِأَيْدِيهِمْ لَقَالَ الَّذِينَ كَفَرُوا إِنْ هَٰذَا إِلَّا سِحْرٌ مُّبِينٌ ﴿٧﴾

Al-Ancaam: 7.

فَلَمَّا جَاءَهُمُ الْحَقُّ مِنْ عِندِنَا قَالُوا إِنَّ هَٰذَا لَسِحْرٌ مُّبِينٌ ﴿٧٦﴾

Yuunus: 76.

وَهُوَ الَّذِي خَلَقَ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضَ فِي سِتَّةِ أَيَّامٍ وَكَانَ عَرْشُهُ عَلَى الْمَاءِ لِيَبْلُوَكُمْ أَيُّكُمْ أَحْسَنُ عَمَلًا ۗ وَلَئِن قُلْتَ إِنَّكُم مَّبْعُوثُونَ مِن

بَعْدِ الْمَوْتِ لَيَقُولَنَّ الَّذِينَ كَفَرُوا إِنْ هَٰذَا إِلَّا سِحْرٌ مُّبِينٌ ﴿٧﴾

Huud: 7.

قَالَ أَجِئْتَنَا لِتُخْرِجَنَا مِنْ أَرْضِنَا بِسِحْرِكَ يَا مُوسَىٰ ﴿٥٧﴾

Daahaa: 57.

فَلَمَّا جَاءَتْهُمْ آيَاتُنَا مُبْصِرَةً قَالُوا هَٰذَا سِحْرٌ مُّبِينٌ ﴿١٣﴾

An-Naml: 13.

فَلَمَّا جَاءَهُم مُّوسَىٰ بِآيَاتِنَا بَيِّنَاتٍ قَالُوا مَا هَٰذَا إِلَّا سِحْرٌ مُّفْتَرًى
وَمَا سَمِعْنَا بِهَٰذَا فِي آبَائِنَا الْأَوَّلِينَ ﴿٣٦﴾

Al-Qasas: 36.

وَإِذَا تُتْلَىٰ عَلَيْهِمْ آيَاتُنَا بَيِّنَاتٍ قَالُوا مَا هَٰذَا إِلَّا رَجُلٌ يُرِيدُ أَن
يَصُدَّكُمْ عَمَّا كَانَ يَعْبُدُ آبَاؤُكُمْ وَقَالُوا مَا هَٰذَا إِلَّا إِفْكٌ مُّفْتَرًى
وَقَالَ الَّذِينَ كَفَرُوا لِلْحَقِّ لَمَّا جَاءَهُمْ إِنْ هَٰذَا إِلَّا سِحْرٌ مُّبِينٌ ﴿٤٣﴾

Saba': 43.

وَقَالُوا إِنْ هَٰذَا إِلَّا سِحْرٌ مُّبِينٌ ﴿١٥﴾

As-Saaffaat: 15.

وَلَمَّا جَاءَهُمُ الْحَقُّ قَالُوا هَٰذَا سِحْرٌ وَإِنَّا بِهِ كَافِرُونَ ﴿٣٠﴾

Az-Zukhruf: 30.

وَإِذَا تُتْلَىٰ عَلَيْهِمْ آيَاتُنَا بَيِّنَاتٍ قَالَ الَّذِينَ كَفَرُوا لِلْحَقِّ لَمَّا جَاءَهُمْ هَٰذَا سِحْرٌ مُّبِينٌ ﴿٧﴾

Al-Axqaaf: 7.

أَفَسِحْرٌ هَٰذَا أَمْ أَنتُمْ لَا تُبْصِرُونَ ﴿١٥﴾

Ad-Duur: 15.

وَإِن يَرَوْا آيَةً يُعْرِضُوا وَيَقُولُوا سِحْرٌ مُّسْتَمِرٌّ ﴿٢﴾

Al-Qamar: 2.

وَإِذْ قَالَ عِيسَى ابْنُ مَرْيَمَ يَا بَنِي إِسْرَائِيلَ إِنِّي رَسُولُ اللَّهِ إِلَيْكُم مُّصَدِّقًا لِّمَا بَيْنَ يَدَيَّ مِنَ التَّوْرَاةِ وَمُبَشِّرًا بِرَسُولٍ يَأْتِي مِن بَعْدِي اسْمُهُ أَحْمَدُ ۖ فَلَمَّا جَاءَهُم بِالْبَيِّنَاتِ قَالُوا هَٰذَا سِحْرٌ مُّبِينٌ ﴿٦﴾

As-Saff: 6.

فَقَالَ إِنْ هَٰذَا إِلَّا سِحْرٌ يُؤْثَرُ ﴿٢٤﴾

Al-Muddathir: 24.

Cinwaanka buugga ee "Siyaasad Aan Sixir Lahayn" halkan ayuu ka soo jeedaa. Maadaama dooddiisu tahay in diinta iyo dawladda (siyaasadda) la kala saarana, waxa uu sixirka ku sheegayaa waa diinta.

Ereygan "*disenchantment*" ee Cabdisaciid u tarjumay "sixirfuryeyn" markii uu tilmaamayay, Jaarlas Taylor waxa uu leeyahay, badanaa wuxuu u taagan yahay faquuqidda iyo takooridda diinta ["it is frequently synonymous with the sidelining of religion as such," Rethinking Secularism, b.38]

Dhibta miskiinkan haysataa waa in uu la indhadaraandaray magacyadan reer Galbeed, buunbuunintoodana uu qalbigiisu cabsan yahay, uusanna dan ka lahayn in waxa uu sheegayaa u cuntamo dadka uu wax u qorayo.

Maakis Weber (shareecada Islaamka wuxuu u yaqaannay wax heerkeedu hooseeyo/ liita/ primitive) wuxuu ka hadlayaa xaaladdii Yurub ee uu ogaa iyo khuraafaadkii yaallay. Markii Isxaaq Niyuutan qorayay Birinkibiya Maatamaatika ee uu xeerarka socodka faahfaahinayay, boqorradii Ingiriisku waxay ku hawlanaayeen taabashada bukaanka oo la aamisanaa inay barakada boqorka/ boqoradda ku bogsanayaan! Waxaa meelo fog looga socdaalayay in lafaha weli hebel la soo siyaarto si caafimaad loo helo, sidii Soomaalidu guryaha hareerahooda u rushayn jirtay si sharka loo bixiyo, ayay beerahooda u xirsixidhi jireen…

Cabdisaciid wuu ka dheregsan yahay in diinta Islaamku aysan waxan oggolayn. Haddana kama waantoobin adeegsiga odhaahda Weber.

Wixii Nebi Ibraahin CS iyo mushrikiinta dhex maray,

wixii Nebi Maxamed SCW iyo mushrikiintii dhex maray halkuu isu dhaafiyay? Dan buusan ka lahayn.

إِذْ قَالَ لِأَبِيهِ وَقَوْمِهِ مَا تَعْبُدُونَ ﴿٧٠﴾ قَالُوا نَعْبُدُ أَصْنَامًا فَنَظَلُّ لَهَا
عَاكِفِينَ ﴿٧١﴾ قَالَ هَلْ يَسْمَعُونَكُمْ إِذْ تَدْعُونَ ﴿٧٢﴾ أَوْ يَنْفَعُونَكُمْ أَوْ
يَضُرُّونَ ﴿٧٣﴾ قَالُوا بَلْ وَجَدْنَا آبَاءَنَا كَذَلِكَ يَفْعَلُونَ ﴿٧٤﴾ قَالَ أَفَرَأَيْتُمْ مَا
كُنْتُمْ تَعْبُدُونَ ﴿٧٥﴾ أَنْتُمْ وَآبَاؤُكُمُ الْأَقْدَمُونَ ﴿٧٦﴾ فَإِنَّهُمْ عَدُوٌّ لِي إِلَّا
رَبَّ الْعَالَمِينَ ﴿٧٧﴾ الَّذِي خَلَقَنِي فَهُوَ يَهْدِينِ ﴿٧٨﴾ وَالَّذِي هُوَ يُطْعِمُنِي
وَيَسْقِينِ ﴿٧٩﴾ وَإِذَا مَرِضْتُ فَهُوَ يَشْفِينِ ﴿٨٠﴾ وَالَّذِي يُمِيتُنِي ثُمَّ يُحْيِينِ ﴿٨١﴾
وَالَّذِي أَطْمَعُ أَنْ يَغْفِرَ لِي خَطِيئَتِي يَوْمَ الدِّينِ ﴿٨٢﴾

Ash-Shucaraa': 70-82.

Markii uu geeriyooday wiilkii yaraa ee Nebigu SCW dhalay, ee qorraxdu madoobaatay, ee dadkii isku xidheen labada dhacdo, Nebigu SCW sow ma saxayn isaga oo leh qorraxda iyo dayuxu waa aayado Alle oo cidna geerideeda iyo dhalashadeeda uma madoobaadaan?

إنَّ الشَّمْسَ والقَمَرَ لا يَخْسِفانِ لِمَوْتِ أحَدٍ ولا لِحَياتِهِ، ولَكِنَّهُما آيَتانِ مِن آياتِ اللَّهِ، فإذا رَأَيْتُمُوها فَصَلُّوا.

Nebiga SCW sow ma ahayn ciddii ummaddiisa u diidaysay baasaysiga, iyo in shimbir duushay ama wax kale laga dhaliyo arrimo aysan xidhiidh la lahayn? Inaan xiddig soo baxday roob keenin sow Nebigu SCW dadka ma barayn?

Qeexitaannadii qaar kale aynu eegno.

> "Calmaaniyad waa wixii aan ku tacaluqin diin iyo ruuxaaniyaad, aakhiro iyo hey'adaha diintana ka madax bannaan. Calmaaniguna waa qofka ku nool sebanka iyo casriga la joogo ee xaaladda taagan wax ku qaybsada [b.9]"

Mar kale ereybixintani waa reer Galbeed Kiristaan dhalay oo asal ah! Midda kale, "qofka … xaaladda taagan wax ku qaybsada" miyuusan noqonayn qof bilaa mabda' ah oo hadba sidii ay ugu badiso u jeediya? Ogow wadaaddada ayuu aad ugu dhaleecaynayaa in ay isbedbeddelaan, laakiin calmaanigii ayuuba sifo uga dhigayaa isbedbeddelkaas. Midda saddexaad, sow kii ina lahaa ma aha sifo iyo tilmaan qof ee waa tilmaan dawladeed, ereyga "calmaani" oo tilmaan qof ah sowkan adeegsanaya?

> "Erayga calmaaniyad ama cilmaaniyad, inkasta oo uu afafka reer Yurub isbeddelo kala duwan maray, macneyaal kala geddisan loo adeegsaday, haddana ugu danbayntii wuxuu yeeshay mane guud oo ilaa xad la isla oggol yahay, oo ku rumoobaya meel kasta oo la joogo, kaas oo ah in diinta iyo dowladdu ay kala soocnaadaan, dowladduna ay dhexdhexaad u ahaato diimaha iyo firqooyinka. Calmaaniyaddu waa mabda' siyaasadeed … calmaaniyadda waxaa aasaas u ah oo ay ku taagan tahay mabda'a kala duwidda diinta iyo dowladda. Waa mabda' dhigaya in wadaaddadu … faraha kala baxaan [b.23]."

Calmaaniyadda Yurub lagama soo dhoofin ha dhaho, haddana markuu qeexayo ha ina dabo wado reer Yurub iyo luqadahooda macnayaasha kala duwan ee ay ku leedahay!

U fiirso tilmaamaha calmaaniyadda ee kor ku xusan ee

sheegayay in ay tahay wax sidiisa u jira oo u baahan fahan, iyo ereyga "mabda'" ee uu Cabdisaciid adeegsaday.

Marka uu arko in qoraalkiisa laga qaadanayo in calmaaniyaddu meel daran afka saartay, ayuu in yaroo "Islaamin" ah u sameeyaa calmaaniyadda:

> "Calmaaniyaddu, in kasta oo aysan diin ku salaysnayn, haddana waxay waafaqsan tahay ruuxda aayadaha quraanka ah ee ay ka midka yihiin kuwa oranaya: …[b.8-9]"

قُلْ مَنْ حَرَّمَ زِينَةَ اللَّهِ الَّتِي أَخْرَجَ لِعِبَادِهِ وَالطَّيِّبَاتِ مِنَ الرِّزْقِ ۚ قُلْ هِيَ لِلَّذِينَ آمَنُوا فِي الْحَيَاةِ الدُّنْيَا خَالِصَةً يَوْمَ الْقِيَامَةِ ۗ كَذَٰلِكَ نُفَصِّلُ الْآيَاتِ لِقَوْمٍ يَعْلَمُونَ ﴿٣٢﴾

Al-Acraaf: 32.

Laakiin aayaddani isaga ayay xujo ku tahay.

> "Calmaaniyaddu diinta lid kuma ah - beddelna uma aha -..." "...laakiin waxay diiddan tahay fikradda xaakimiyadda Alle (= الحاكمية لله) [b.25]"

Diinta lid kuma aha laakiin in Alle taliyo ma oggola! Cid aan xaakimiyada Alle oggolayni Muslin ma aha:

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا أَطِيعُوا اللَّهَ وَأَطِيعُوا الرَّسُولَ وَأُولِي الْأَمْرِ مِنكُمْ ۖ فَإِن تَنَازَعْتُمْ فِي شَيْءٍ فَرُدُّوهُ إِلَى اللَّهِ وَالرَّسُولِ إِن كُنتُمْ تُؤْمِنُونَ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ ۚ ذَٰلِكَ خَيْرٌ وَأَحْسَنُ تَأْوِيلًا ﴿٥٩﴾ أَلَمْ تَرَ إِلَى الَّذِينَ يَزْعُمُونَ أَنَّهُمْ آمَنُوا بِمَا أُنزِلَ إِلَيْكَ وَمَا أُنزِلَ مِن قَبْلِكَ يُرِيدُونَ أَن

يَتَحَاكَمُوا إِلَى الطَّاغُوتِ وَقَدْ أُمِرُوا أَن يَكْفُرُوا بِهِ وَيُرِيدُ الشَّيْطَانُ
أَن يُضِلَّهُمْ ضَلَالًا بَعِيدًا ﴿٦٠﴾ وَإِذَا قِيلَ لَهُمْ تَعَالَوْا إِلَىٰ مَا أَنزَلَ اللَّهُ
وَإِلَى الرَّسُولِ رَأَيْتَ الْمُنَافِقِينَ يَصُدُّونَ عَنكَ صُدُودًا ﴿٦١﴾ فَكَيْفَ إِذَا
أَصَابَتْهُم مُّصِيبَةٌ بِمَا قَدَّمَتْ أَيْدِيهِمْ ثُمَّ جَاءُوكَ يَحْلِفُونَ بِاللَّهِ إِنْ
أَرَدْنَا إِلَّا إِحْسَانًا وَتَوْفِيقًا ﴿٦٢﴾ أُولَٰئِكَ الَّذِينَ يَعْلَمُ اللَّهُ مَا فِي قُلُوبِهِمْ
فَأَعْرِضْ عَنْهُمْ وَعِظْهُمْ وَقُل لَّهُمْ فِي أَنفُسِهِمْ قَوْلًا بَلِيغًا ﴿٦٣﴾ وَمَا أَرْسَلْنَا
مِن رَّسُولٍ إِلَّا لِيُطَاعَ بِإِذْنِ اللَّهِ ۚ وَلَوْ أَنَّهُمْ إِذ ظَّلَمُوا أَنفُسَهُمْ جَاءُوكَ
فَاسْتَغْفَرُوا اللَّهَ وَاسْتَغْفَرَ لَهُمُ الرَّسُولُ لَوَجَدُوا اللَّهَ تَوَّابًا رَّحِيمًا ﴿٦٤﴾ فَلَا
وَرَبِّكَ لَا يُؤْمِنُونَ حَتَّىٰ يُحَكِّمُوكَ فِيمَا شَجَرَ بَيْنَهُمْ ثُمَّ لَا يَجِدُوا فِي
أَنفُسِهِمْ حَرَجًا مِّمَّا قَضَيْتَ وَيُسَلِّمُوا تَسْلِيمًا ﴿٦٥﴾

An-Nisaa': 59-65.

> "Calmaaniyaddu waa in soohdin loo kala sameeyo dowladda iyo diinta iyada oo diintu aysan nolosha ka baxayn. Sidaa awgeed, diinta iyo calmaaniyaddu isma diidayaan, … waxay [calmaaniyaddu] ka shaqaysaa dejinta shuruudo iyo xeerar ay ku wada noolaan karaan diimaha kala duwan iyo weliba diin la'aantu. [b.27]"

Dunida Islaamka calmaaniyadda loo soo dhoofiyay inteeda badani waa middii Faransiiska. Ataaturku markuu dumiyay khilaafadii, waxa uu qaatay calmaaniyaddii Faransiiska. Galbeedka iyo Waqooyiga Afrikana gumeysigii Faransiiska ayaa ku faafiyay. Waana midda uu Cabdisaciid u ololaynayo ee uu taageerayo, walow meelaha qaar uu ka

xagjirsan yahay gumeysigii Faransiiska.

Haddaba calmaaniyadda noocan ahi sidee ayay ula dhaqantaa diinta? Waa midda halista weyn u aragta masarka madaxa u saaran gabdhaha yaryar ee dugsiyada dhigta. Waa midda wax diin u eg (gaar ahaan Islaam) hadday aragtaba didda ee caraatanta. Wax ixtiraam iyo qaddarin ah diinta uma hayso, waxayna ku dedaashaa sidii ay u muquunin lahayd ee ay u takoori lahayd, hangool dheerna qoorta ugaga hayn lahayd.

Waxyaalaha yaabka leh waxaa ka mid ah, in gaaladu marka ay calmaaniyad ka hadlayaan ay caksigeeda u arkaan diin, halka calmaaniyiinta sheegta inay Muslimiin yihiin ay ku celceliyaan in aan diinta iyo calmaaniyaddu iskhilaafsanayn!

Jaarlas Taylor buuggiisa Sebenka Calmaaniyadda (A Secular Age) waxa uu ku tilmaamayaa in berigii hore ay naadir iyo dhif ahayd in qof bilaa diin ah lagu arko Yurub, laakiin hadda lala yaabo qofka sheegta diin. Sababta isbeddelkaasna waxa uu aanaynaa in markii jiritaankii loo qaybiyay maqane qayb ah iyo xaadirkan adduunka la joogo, ee ay suurowday in qofku ku noolaan karo adduunkan isaga oo aan Ilaah, aakhiro, iyo wax "maqane" ah dan ka galin, ama u arka in ay yihiin dheeraad aan lagu qasbanayn sidii xarrago, taas oo ay suuragaliyeen mafhuumyada fagaaraha caamka ah, dhaqaalaha suuqa, iyo qaran muwaadinnimo.

Macnahan calmaaninnimadu waxa weeye marka dadku ay bilaa diin yihiin, ee ay iska xidheen wax kasta oo ka baxsan xaadirkan u muuqda ee calmaaniga ah. José Casanova waxa uu leeyahay, markan calmaaniyaddu way ka baxday lammaanannimadii (calmaani iyo diin) oo

gaarkeeda ay u noqotay xaqiiqo iswadata. Ilaa heerna waa mid ka mid ah biyadhaca iyo meelaha uu ku dhammaado hannaanka calmaaniyaynta iyo dedaalka lagaga gudbayo labaalaha diin iyo calmaaniyad, iyada oo gebi ahaanba la iska xoraynayo qaybta diinta [Rethinking Secularism, b.57-58]. Markaana waxaa loo dhaqmayaa sidii in aan Ilaah jirin ["as if God would not exist." Rethinking Secularism, b.58]. José Casanova waxa uu leeyahay markan diintii waxa ay noqonaysaa arrin ka mid ah arrimo badan oo la kala dooran karo, halka calmaaniyaddii, maadaama ay tahay diin la'aan, ay noqonayso xaaladda caadiga ah ("default option"), oo dadka qaar ay u qaadan karaan mid dabiici ah, oo aan u baahnayn in qiil loo sameeyo ama la sababeeyo.

> "This naturalization of "unbelief" or "nonreligion" as the normal human condition in modern societies corresponds to the assumptions of the dominant theories of secularization, which have postulated a progressive decline of religious beliefs and practices with increasing modernization, so that the more modern a society is, the more secular, the less, "religious," it is supposed to become [Rethinking Secularism, b.58]."

Hore waxaan u soo aragnay sheegashadii Niije ee uu lahaa Alle waanu dilnay (yacniin looma baahna hadda ka dib). Isla halkaa uu Niije ku soo xigtay, ayaa uu Cabdisaciid inoogu sheegayaa arrintan, waxa uuna leeyahay, "Waxaana xusid mudan, in qarnigii 18-aad tan iyo kii 20-aad ay dhulalka reer Galbeedka -siiba Yurub- ku xoogaysatay fikradda sheegaysa in caqliga iyo cilmigu ay timaaddada

keeni doonaan in laga maarmo diimaha, dhaqamada iyo gebi ahaanba waxyaabaha ka baxsan aqoonta iyo khibradda laga kasbado garashada ku salaysan dareemayaasha dadka. Waa fikradda loo bixiyey "dhimashada Eebbe." [b.9-10]"

Marka in aad calmaani ahaata waxay ka dhigan tahay inaad casriga la socotid, taas oo dhankeeda kale laga dheehanayo in qofkii diin haystaa uusan weli wada casriyoobin (badow dhego dheer)

> "To be secular means to be modern, and therefore, by implication, to be religious means to be somehow not yet fully modern [Rethinking Secularism, b.59]."

Casanova waxa uu leeyahay, calmaaniyoobidda casriga ah waxay keentay liididda diinta maadaama qofka lagu gaar yeelay, waxayna muqaddas ka dhigtay aagaggii calmaaniga ahaa ee siyaasadda (qaran muqaddas ah, muwaadinnimo muqaddas ah, dastuur muqaddas ah), sayniska (macbaddada aqoonta), iyo dhaqaalaha. Laakiin muqaddasaynta ugu weyni waa Firqada Shakhsiga (cult of the individual) iyo taqdiisinta aadanaha ee caalamiyaynta xuquuqda aadanaha [Rethinking Secularism, b.65].

Cabdisaciid waxa uu leeyahay, "Xuquuqda aadanuhuna waxa ay bilaabataa marka la joojiyo in dadka loo qaybiyo muumin iyo gaal ama muslim iyo mid aan muslim ahayn… " b.xiii.

Aaydhiyoolajiyadda calmaaniyada markii uu ka hadlayay, Casanova waxa uu u qaybinayaa labo asaasi ah. Mid waxay qabtaa in diintu ay tahay marxalad laga gudbay [sida Nebigu SCW marka uu saxaabada la hadlayo uu u odhan jiray waxaasi waa dhaqankii jaahiliyada laga tagay ee iska daaya]. Midda kale ee aragtiyaha siyaasadeed ee calmaaniyaddu waxay leedahay diintu ama waa awood aan caqli ku dhisnayn ama wada xaajood aan caqli ku taagnayn oo ay tahay in laga eryo fagaarayaasha caamka ah ee dimuqraadiga ah.

> "One can distinguish two basic types of secularist ideologies. The first type are secularist theories of religion grounded in some progressive stadial philosophies of history that relegate religion to a superseded stage. The second type are secularist political theories that presuppose that religion is either an irrational force or nonrational form of discourse that should be banished from the democratic public sphere [Rethinking Secularism, bb.66-67]"

> "To be secular in this sense [European] means to leave religion behind, to emancipate oneself from religion, overcoming the nonrational forms of being, thinking, and feeling associated with religion. It also means growing up, becoming mature, becoming autonomous, thinking and acting on one's own. It is precisely this assumption that secular people think and act on their own and are rational autonomous free agents, while religious people somehow are unfree, heteronomous, nonrational agents [hugunraac], that constitutes the foundational premise of

secularist ideology. [Rethinking Secularism, b.68]"

Waa halka Cabdisaciid leeyahay, "Waxaa si joogto ah u dhacaya in aqoonta … isbeddel ku imaanayo, arrinkaas oo markiisa keena in dadku ay indho iyo caqli cusub ku eegaan diinta iyo afkaarta diinta, markaan uu fahankoodii diiniga ahaa wax iska beddelo [b.22]".

Cabdisaciid ma aaminsana diin Islaam oo xaq ah oo dhammaystiran, ee wuxuu aaminsan yahay in ay diimuhu "midda ay doonto ha ahaatee [b.7]" iska yihiin khuraafo laga korayo oo markii daahfurrada saynisku ay kordhaanba qayb laga tagayo, ayna "si joogto ah isu dhalan rogayaan [b.10]" Sidaas aawadeed, aayad iyo xadiis loo daliishadaa wax macne ah ugu ma fadhiyaan, wuxuuse u soo daliishadaa in uu dadka ku hoosaasiyo oo uu uga dhigo malab uu suntiisa ugu dhex qariyo.

Ereyga diin waxa uu badanaa u isticmaalaya qaab wadar ah (diimaha), marka uu magacaabayo diimahana, badanaa Islaamku ma aha waxa uu ku bilaabo ("buudiga, hinduusiga, masiixiga, mulxidka, muslimka, yahuudiga [b.25]", "Buudiyada, Hinduusiyadda, Islaamka, Masiixiyadda iyo Yahuudiyada… [b.27]", "Buudi, Masiixi, Muslim, … [b.27]").

Meelaha qaar sida uu inoo la hadlayo waxaad mooddaa in aynu Kiristaan nahay! (tusaale ahaan b.23). Diinta qeexitaankeeda kama eego Qur'aanka iyo Sunnada, sidii uu ereyga "dowlad" uga eegayay ee waxa uu soo xigtaa Ibnu Siinaa' iyo falsafaddiisi [b.23, hoosqor 44].

Cabdisaciid waa qof yaab leh. Bal intan ila eeg: "Miyaan Eebbe jirin diimaha ka hor? Miyaanse dadku Eebbe ogaan

karin iyaga oo aan diin iyo nebi u marin? (Diimaha la aqoonsan yahay ee dunida ka jira kuwa ugu filka weyni lix kun oo sano bay jiraan, halka aadamiga garaadka lihi [sapiens] uu marka ay ugu yaraato uu dunida ku nool yahay boqol kun oo sano. Haddaba, aadanuhu taariikhdiisa inteeda badan suurad caynkee ah buu Alle ka haystay? Mase Eebbe shalay uun buu aadamiga isbaray?) [b.26]."

Qof Muslim ah oo Qur'aanka hal marna akhriyay, abuurkii aadanaha iyo qisastii Anbiyadana ka war haya miyaa waxan oo kale ku hadaaqi kara? Waxaa isweydiin mudan in Cabdisaciid aqoonsanyahay Qur'aanka oo uu run u arko waxa Qur'aanku sheegayo. Aniga iima muuqato. Aragtida uu halkan innagu la wadaagay waa mid uu ka dheregsan yahay qofkii akhriyay buugaagta mulxidiinta ay ka mid yihiin Richard Dawkins, Sam Harris, Daniel Dennett, iyo Yuval Noah Harari. Dhalinyarteenna beryahan ku xarragoota buugga Sapiens haddii ay akhriyeen buugga waa aragti ay ugu tagayaan. Waxaa kale oo aragtidaa ka mid ah in diintu ay iska tahay khuraafo laabta lagu qaboojisto ama dadka lagu bajiyo oo lagu maamulo. Intaasina buuggan Cabdisaciid waa ay ku qoran tahay. Waxa uu leeyahay, "Baahida ugu weyn ee ay dadku diinta u qabaani waa baahi ruuxi ah, [b.26]"

Waxa uu ina leeyahay, diinta si aan cagta loo marin ha is-ururiso! "Diintuna si ay u sii jirto, uma ay baahna in ay la tartanto dowladda, [b.26] … Timaaddada cidda tartamaysaa ma aha diinta iyo dowladda, balse waa diimaha kala duwan oo laabta dadka ku tartami doona, dadkuna waxay dooran doonaan midda baahida laabtooda dherjisa/ quudisa. Culumada baara taariikhda diimuhuna

sanooyinkaan dambe waxay ka hadlaan waxay ugu yeeraan "diimaha beddelka ah" (=alternative religions/ أديـان بديلـة) iyo weliba waxa loogu yeeray "diimaha kakabka ah ama ka naqaysiga suuqa diimaha/ patchwork religion". [bb.26-27]"

Qofkaas baa raba in uu aayad iyo xadiis inoo daliishado oo uu inagu qanciyo Islaamka iyo calmaaniyaddu isma diidayaan!

Haddaad isweydiinaysid waxa Cabdisaciid ku kallifay inuu diimaha u taariikheeyo qaabkanna uga hadlo, ogsoonoow in ay ka mid tahay manhaj calmaaniyadda iyo qaabka "dacwada" calmaaniyada lagu faafiyo, inta aamintayna niyadda loogu dhiso— "Stadial theories add genealogical or functionalist accounts of how and why this superstructural thing, religion, emerged in the first place, usually in the primitive history of humanity, but has now become superfluous for modern secular individuals and for modern societies [Rethinking Secularism, bb.68-69]."

Kala saaridda diinta iyo dawladdu ma keenayso in diinta faraha laga qaado e, maadaama ay diintu agtooda ka tahay khuraafo aan caqli ku dhisnayn, waa in la takooraa oo qofka diin watana la fogeeyaa sidii qof bakhti ku raran. Dawladda calmaaniga ah ayaa jaangoynaysa booska diinta. Haddii ay u baahatana diintaba dibuhabayn ku samaynaysa— "… calmaaniyaddu ma tirtirto diinta, laakiin waxay astaysaa meelaha iyo siyaabaha ay u shaqayn karto [b.22]." Ayuu leeyahay Cabdisaciid. Tusaale ahaan, marka uu ka hadlayo sababta ay calmaaniyadu ugu guulaysan wayday in ay ku xasisho dunida Islaamka, waxa uu leeyahay [bb.44-45], "sababtu waxay noqonaysaa in dunida islaamka aan weli laga hirgelin shuruudihii calmaaniyaddu ay ku cago-dhigan

lahayd. Shardiga ugu horreeyaana wuxuu yahay in diinta dib-u-eegid lagu sameeyo, oo iyada iyo baahida casriga la iswaafajiyo." Ka dib waxa uu gudagalayaa dedaalkii dheeraa ee boqollaalka sano qaatay ee reer Galbeedka lagu calmaaniyeeyay oo uu leeyahay waxaa qayb ka ahaa "in diinta masiixiga dib-u-akhrin lagu sameey[ay]," haddaba "Si calmaaniyaddu ugu xididaysato dunida islaamka, diinta iyo nolosha casriga ahna la isu waafajiyo, waxaa lamahuraan ah in marka hore diinta dib-u-eegid lagu sameeyo, oo la kala ogaado waxa diinta ah ee loo baahan yahay in haysto iyo waxa taariikhda iyo dhaqanka ah ee laga tagi karo."

Tolow maxaa ka mid waxyaalaha la tuurayo? Aynu isaga ka dhegaysanno, "fuqahada islaamka oo caadi ahaan ku mintida erayada nusuusta diinta,... waxay ku doodaan in goynta gacanta tuugtu ay tahay xukun diini ah oo aan waxba laga beddeli karin. Laakiin si taa ka duwan,... waxaa si fudud lagu ogaanayaa in gacan ka goynta tuugadu aysan ahayn xukun sidiisa diintu u dooratay, balse uu ahaa dhaqan carabtii jaahiliyada ee aan dowladda iyo xabsiyada aqoon ay ku ciqaabi jireen qofka wax xada, [b.45]"

Eeg sida uusan waxba uga soo qaadayn aayadda Qur'aanka ah ee xukunkan jidaysay:

وَالسَّارِقُ وَالسَّارِقَةُ فَاقْطَعُوا أَيْدِيَهُما جَزاءً بِما كَسَبا نَكالاً مِنَ اللَّهِ وَاللَّهُ عَزِيزٌ حَكِيمٌ ﴿٣٨﴾

Al-Maa'idah: 38.

U fiirso sida aayaddu u leedahay waa ciqaab Alle kaga abaalmarinayo falkii ay ku kaceen. Marna kuma jirto in ay

tahay arrin bulsho iyo duruufteed la xidhiidha. Haweenaydii wax xaday markii looga ergeeyay Nebiga SCW si aan ciqaab loo marin, aad ayuu Nebigu SCW u xanaaqay. Xabsiba looma baahnayn oo dadkii ay wax ka xaday ayaa cafiyay. Midda kale, Nebigu SCW ma qol xabsi ah in la dhisuu awoodi waayay oo uu gacangoyn u doorbidayay?! Waxan oo kale ayaa caqli iyo maanfurnaan sheeganaya!

Aayad la beddelo ayaaba sahlan e, meesha waxaa ku qoran "in bani'aadamku uu qaangaaray, oo uu gaaray marxalad uu ka maarmi karo ku tiirsanaanta tooska ah ee waxyiga, uuna ku tashan karo khibraddiisa iyo wacyigiisa [b.45]." Waxa uu intaa raacinayaa "Haddii macallinku uu ku guulaysan waayo in ardaydiisu ay noqdaan macallimiin isaga hareer taagan waxaa loo aqoonsanayaa in uu ku fashilmay hawshii lagu qaybiyey [b.46]" Uma baahnin inaan fasiranno cidda uu tusaalahan ula jeedo ee isagaa isla tuducan ku caddaynaya, "Sidaa si la mid ah, nebigu marka uu xilkiisa si wacan u guto, wuxuu abuurayaa ummad fahanka iyo dhaqanka kala mid ah oo xilkii nebinimada gudan kara."

Qur'aanka iyo xadiiska halkaa inaga dhiga inagaaba nebiyo ahe, weeye doodda Cabdisaciid.

> "But, finally, we should recognize the prominence of a secularist ideology that goes beyond affirming the virtues of the ostensibly neutral. The secular is claimed by many, not just as one way of organizing life, not just as useful in order to ensure peace and harmony among different religions, but as a kind of maturation. It is held to be a developmental achievement. Some people feel they are "better" because they have overcome illusion and attained

> the maturity identified with secularism… as a kind of escape from culture, national and religious, into a realm of apparently pure reason, universal rights, and global interconnections." [Rethinking Secularism, b.20]

Haddii qorshahan la diido ka warran? Cabdisaciid waxa uu leeyahay, "wadaaddadu si sahlan kuma aqbalayaan doodda dib-u-akhrinta diinta, haddii aan la cadaadin. Sida runta ahna, had iyo jeer marka qura ee wadaaddadu ay fekerkooda beddelaani, waa goorta ay khatar dareemaan oo keli ah -khatartaasi ha ahaato dadka oo ka dareera ama awood iyo cadaadis xagga dowladda uga yimaadda [b.48-49]."

Eesh calaa! Buuq miyaan wadaynaa dhayda ka caddee.

> "Raggu qaar daliillada sharciga waa dacniyayaaye
> Intii daalimiinoo ku wacan duminta khayraadka
> Inkastooy dad kiiska hor wadaan oo la daba joogo
> In ceebtoodu daahiri dhakhsaa iga daweyneysa."

—Cismaan Yuusuf Keenadiid.

Markii Kacaankii Soomaaliyeed keenay xeerkii qoyska, wadaaddadii ka hor yimid maxaa lagu sameeyay? Sow maalin cad meel fagaare ah lagu ma toogan Muqdisho dhexdeeda? Waa taas calmaaniyadda uu Cabdisaciid ka hadlayo ee dulqaadka iyo xorriyadda diinta wadataa!

Cabdisaciid waa dadkii Alle hore inoogu tilmaamay: hadday idin ka adkaadaan idiin xeerin maayaan qaraabannimo iyo ballan toona, afkooday idin ku raalli

galinayaan, laakiin quluubtoodu way diidaysaa, intooda badanna waa faasiqiin.

كَيْفَ وَإِن يَظْهَرُوا عَلَيْكُمْ لَا يَرْقُبُوا فِيكُمْ إِلًّا وَلَا ذِمَّةً ۚ
يُرْضُونَكُم بِأَفْوَاهِهِمْ وَتَأْبَىٰ قُلُوبُهُمْ وَأَكْثَرُهُمْ فَاسِقُونَ ﴿٨﴾

Tawbah: 8.

Raalligalintaa afka baarkiisa ahi waa tan. Isla boggan waxa uu ku qorayaa: "Macnaha ugu muhiimsan ee calmaaniyaddu leedahayna waa in diinta iyo dowladda la kala xadeeyo si loo helo dulqaad iyo is-aqbal…" waxa uuna soo xiganayaa in calmaaniyaddu sidaa Yurub uga bilaabatay "ka dib markii feylasuufkii Ingiriiska ahaa ee John Locke" qoray "buuggii uu cinwaanka uga dhigay "Dhambaalka isu-dulqaadashada".

Waa buuggii aynu hore uga hadalnay ee u dulqaadashada ka saaray mulxidiinta iyo Kaatooligga! Waa hubaal inaan Lok u dulqaateen Cabdisaciid. Laga yaabee in uu addoonsigii ka macaashi lahaa, maadaama uu 'sheer' ku lahaa shirkad addoonsiga ka ganacsata!

Waxaa jirta dood ah haddii diin iyo siyaasad la kala saarayo, halkee xadka kala sooca la marinayaa?

> "But political secularism [calaamiyadda siyaasadeed] would like to maintain a secular public democratic sphere free from religion. This is the basic premise behind any

> form of secularism as statecraft doctrine, the need to maintain some kind of separation between "church" and "state," or between "religious" and "political" authorities, or between "the religious" and "the political." But the fundamental question is how the boundaries are drawn and by whom." [Rethinking Secularism, b.69.]

Soohdin dabiici ah oo la helayaa ma jirta e, waa in cidi xarriiqdo.

> "The demarcation between religion and the secular is made, not simply found." [Rethinking secularism, b.20]. "But that begs the question of how to distinguish between the religious and the secular." [Talal Asad, Formations of the Secular, b.201]

Yaase ciddaa xaq u siinaya in ay awoodda leedahay? Nidaamka calmaaniga ahi maadaama uu awooddii iyo sharcigii maamulo, isaga ayaa dejinaya xeerarka kala xadaynaya. Meesha ay taasi ku danbaysana waynu ka aragnaa fekerka Cabdisaciid ee awoodda wax ku muquuninaya, dhaqanka dawladaha calmaaniga ah ee Faransiiska iyo Shiinuhu ay ka mid yihiin.

> "The space that religion may properly occupy in society has to be continually redefined by the law." [Talal Asad, Formations of the Secular, b.11].

Xornimada diinta waxaa ku lammaan dabarro: waa in ku dhaqankaaga diintu uusan saamayn dadka kale. Haddii labbiskaagu dhibo, dawladdu way xakamayn kartaa

xorriyaddaada.

> "This freedom [of religion] is qualified, however. The public expression of religious belief and performance of religious ritual must be a probable cause of a breach of the peace, nor should it be construable as a symbolic affront to the state's personality." [Talal Asad, Formations of the Secular, b.205]

Faransiisku masarkii madaxa la saaranayay buu ka dhigay hub nuyukliyeer ah oo jiritaankiisa halis ku ah. Hilibkii xalaasha ahaa ayaa Muslimiintii Yurub lagu xakamaynayaa oo sharciyo laga soo saarayaa iyada oo qiil laga dhiganayo dhowridda xuquuqda xoolaha! Ilmihii diinta la barayay ayaa laga shaqaynayaa in la xakameeyo… waxaana la isku sandullaynayaa barashada waxa ay ku sheegaan qiyamka calmaaniyada, qiyamka Biritishka, qiyamka libaraaliyada… ilmaha waa qasab in loo dhigo aqbalidda khaniisnimada ciddii diiddaana waa dibusocod sharciga dalka jabinaya! Waa in aad u noolaataa si ku habboon muwaadinka bulsho calmaani ah oo libaraali ah … xorriyaddaaduna waxay ku xaddidan tahay sharciga dalka iyo baahiyaha dhaqaalaha suuqa ku dhisan.

> "The individual is now encouraged- in morality as well as in law- to govern himself or herself, as befits the citizen of a secular, liberal society… this autonomy depends on conditions that are themselves subject to regulation by the law of the state and to the demands of a market economy. " [Talal Asad, Formations of the Secular, b.226]

> "Miyaan la gaarin waqtigii diinta loo arki lahaa inay tahay xaq ka mid ah xuquuqda aadanaha, oo qof walba faraha looga qaadi lahaa innuu qaato diinta uu doono Ilaahiisna si xor ah u caabudo, haddii uusan ku xad gudbayn qaanuunka, isla markaana wax u dhimayn amniga iyo anshaxa guud."
>
> —ayaa uu leeyahay Cabdisaciid.

U fiirso: "haddii uusan ku xad gudbayn qaanuunka,"



Calmaaniyadda mararka badan ee uu qeexayo waxaa ka mid ah mar uu leeyahay,"Eraybixin ahaanna waxaa lagu qeexay: xorriyadda diinta, kala saaridda kaniisadda iyo dowladda iyo in diintu aysan raad ku yeelan fagaarayaasha dadweynaha (= public sphere) [b.5]."

Waa diinta qariya, qolka ku soo xidha, oo sariirta hoosteeda galiya, korna yaysan u dhawaaqine aashuun ha ku addinto. Yacnii ha loo celiyo berigii ay qarsoodida ahayd ee Makah.

Cabdisaciid waxa uu si dadban u leeyahay, Islaamku mar buu qabasho lahaaye markii ha lagu celiyo!

Haddii Islaamkii lagu celiyay marxaladdii sirriga ahayd ee uu qarsooonaa, illeen fagaaruhu faaruq ahaan maayee, waa in dacwo kale booskii gashaa: Calmaaniyooba aad liibaantaane— weeye dacwada jahriga noqonaysa ee kor loogu dhawaaqayaa.

Waxaa yaab ah sida Cabdisaciid iyo Abuu Jahal ay isku

qorshe u wadaagaan. Dacwooyinkii ay Abuu Daalib ula tagi jireen ee Nebiga SCW ka dhanka ahaa waxaa ka mid ahayd maalin ay odayga u tageen iyaga oo leh: wiilkaad adeerka u tahay fagaarahayagii buu nagu dhibaye naga qabso!

جاءت قريش إلى أبي طالب، فقالوا: إن ابن أخيك هذا قد آذانا في نادينا ومسجدنا، فانهه عنا.

Abuu Jahal oo diiddan in Nebiga SCW Kacbada ku muujiyo diintiisa oo dhaaranayaa isna waa kii lahaa: mar dambe hadduu sameeyo qoortaan kaga istaagayaa oo wejigaan ciidda u galinayaa!

قال أبو جهل: هل يعفر محمد وجهه بين أظهركم؟ قيل: نعم، فقال: واللات والعزى لئن رأيته يفعل ذلك لأطأن على رقبته، ولأعفرن وجهه. فأتى رسول الله صلى الله عليه وسلم وهو يصلي ليطأ على رقبته، فما فجأهم منه إلا وهو ينكص على عقبيه ويتقي بيديه، فقيل له: ما لك؟ قال: إن بيني وبينه لخندقا من نار. فقال رسول الله صلى الله عليه وسلم: "لو دنا مني لاختطفته الملائكة عضوا عضوا". أخرجه مسلم.

وقال عكرمة، عن ابن عباس: قال أبو جهل: لئن رأيت محمدا يصلي عند الكعبة لأطأن عنقه. فبلغ النبي صلى الله عليه وسلم فقال: "لو فعل لأخذته الملائكة عيانا". أخرجه البخاري.

عن عكرمة، عن ابن عباس، قال: "مر أبو جهل بالنبي صلى الله عليه وسلم وهو يصلي، فقال: ألم أنهك عن أن تصلي يا محمد؟ لقد علمت ما بها أحد أكثر ناديا مني. فانتهره النبي صلى الله عليه وسلم، فقال جبريل: فليدع ناديه سندع الزبانية [العلق : ١٧-١٨]. والله لو دعا ناديه لأخذته زبانية العذاب."

Sidaa si la mid ah, Abuu Bakar RC oo gurigiisa dhinaciisa

ka samaystay meel uu ku tukado ayay u diideen. Dumarka iyo carruurta ayaad naga waalaysaaye gurigaaga dhexdiisa ku tuko meel aan lagaa arkayn, bay ku dacwoodeen! Salaaddiisa uu tukanayo ayaa dhibaysay.

يا ابن الدغنة إنك لم تجر هذا الرجل ليؤذينا، إنه رجل إذا صلى وقرأ ما جاء به محمد يرق وكانت له هيئة ونحن نتخوف على صبياننا ونسائنا وضعفائنا أن يفتنهم فأته فمره بأن يدخل بيته فليصنع فيه ما شاء.

Maanta waxaa la odhan lahaa wuxuu carqaladaynayaa amniga bulshada (public safety/ social cohesion...)

Saxaabada markii nafta lagu dhibay ee aad loo ciqaabay, Nebigu SCW wuxuu faray in ay dulqaataan oo marxaladdan laga bixi doono, awoodna ay yeelan doonaan oo aysan cabsi ku noolaan doonin xilli dhow.

واللَّهِ لَيَتِمَّنَّ هذا الأَمْرُ، حتَّى يَسِيرَ الرَّاكِبُ مِن صَنْعاءَ إلى حَضْرَمَوْتَ، لا يَخافُ إلَّا اللَّهَ، والذِّئْبَ علَى غَنَمِهِ، ولَكِنَّكُمْ تَسْتَعْجِلُونَ.

Markii Maka laga xoreeyay shirkigii, ayaa Nebigu SCW u yimid sanammadii ku hareeraysnaa Kacbada oo gaadhayay 380 sanam. Nebigu SCW inta uu ku mudo ul uu watay ayaa waxa uu lahaa: Waxaad dhahdaa xaqii yimid baadilkiina baaba'—baadilku waa mid baaba'a. Ka dibna wuxuu amray in la daadiyo.

وَقُلْ جَآءَ ٱلْحَقُّ وَزَهَقَ ٱلْبَـٰطِلُ ۚ إِنَّ ٱلْبَـٰطِلَ كَانَ زَهُوقًا ﴿٨١﴾

Al-Israa': 81.

Calmaaniyiinta Cabdisaciid ka mid yahay waxa ay u socdaan waa in ay afkooda ku demiyaan nuurka Alle, laakiin Alle waa uu dhammaystirayaa nuurkiisa, ciddii dhibsanaysana loo joojin maayo. Islaamkuna nidaam kale magan u noqon maayee isaga ayaa sarraynayee ka-naxoow nafta waa!

يُرِيدُونَ أَن يُطْفِـُٔوا نُورَ اللَّهِ بِأَفْوَاهِهِمْ وَيَأْبَى اللَّهُ إِلَّآ أَن يُتِمَّ نُورَهُۥ وَلَوْ كَرِهَ ٱلْكَٰفِرُونَ ﴿٣٢﴾ هُوَ ٱلَّذِىٓ أَرْسَلَ رَسُولَهُۥ بِٱلْهُدَىٰ وَدِينِ ٱلْحَقِّ لِيُظْهِرَهُۥ عَلَى ٱلدِّينِ كُلِّهِۦ وَلَوْ كَرِهَ ٱلْمُشْرِكُونَ ﴿٣٣﴾

At-Tawbah: 32-33.

هُوَ ٱلَّذِىٓ أَرْسَلَ رَسُولَهُۥ بِٱلْهُدَىٰ وَدِينِ ٱلْحَقِّ لِيُظْهِرَهُۥ عَلَى ٱلدِّينِ كُلِّهِۦ ۚ وَكَفَىٰ بِٱللَّهِ شَهِيدًا ﴿٢٨﴾

Al-Fatx: 28.

يُرِيدُونَ لِيُطْفِـُٔوا نُورَ اللَّهِ بِأَفْوَاهِهِمْ وَاللَّهُ مُتِمُّ نُورِهِۦ وَلَوْ كَرِهَ ٱلْكَٰفِرُونَ ﴿٨﴾ هُوَ ٱلَّذِىٓ أَرْسَلَ رَسُولَهُۥ بِٱلْهُدَىٰ وَدِينِ ٱلْحَقِّ لِيُظْهِرَهُۥ عَلَى ٱلدِّينِ كُلِّهِۦ وَلَوْ كَرِهَ ٱلْمُشْرِكُونَ ﴿٩﴾

As-Saf: 8-9.

Waana xil ina saaran in aan ka shaqayno in diinta Alle sarrayso.

وَقَٰتِلُوهُمْ حَتَّىٰ لَا تَكُونَ فِتْنَةٌ وَيَكُونَ ٱلدِّينُ كُلُّهُۥ لِلَّهِ ۚ فَإِنِ

ٱنتَهَوۡاْ فَإِنَّ ٱللَّهَ بِمَا يَعۡمَلُونَ بَصِيرٞ ٣٩

Al-Anfaal: 39.

إِلَّا تَنصُرُوهُ فَقَدۡ نَصَرَهُ ٱللَّهُ إِذۡ أَخۡرَجَهُ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ ثَانِيَ ٱثۡنَيۡنِ إِذۡ هُمَا فِي ٱلۡغَارِ إِذۡ يَقُولُ لِصَٰحِبِهِۦ لَا تَحۡزَنۡ إِنَّ ٱللَّهَ مَعَنَاۖ فَأَنزَلَ ٱللَّهُ سَكِينَتَهُۥ عَلَيۡهِ وَأَيَّدَهُۥ بِجُنُودٖ لَّمۡ تَرَوۡهَا وَجَعَلَ كَلِمَةَ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ ٱلسُّفۡلَىٰۗ وَكَلِمَةُ ٱللَّهِ هِيَ ٱلۡعُلۡيَاۗ وَٱللَّهُ عَزِيزٌ حَكِيمٌ ٤٠

At-Tawbah: 40.

Sidaa si la mid ah ayaa calmaanigu ugu halgamayaa aragtidiisa iyo sarraynteeda. Ciraaq baa ugu dambaysay oo la lahaa dimuqraadiyad libaraali ah baanu baraynaa oo aanu qasab ku liqsiinaynaa. Waana wixii lagu burburiyay ee dadkeedi looga dhigay in la dilay, in la qixiyay, iyo in silic ku nool. “Western supremacy/ hegemony” iyo “liberal values” aanu sanka kaa galinnee car juuq dheh, buu Cabdisaciid ku raran yahay. Waa qof maskaxda laga haysto oo gumeysigii qaayibay (Stockholm Syndrome).

Aadane intuu joogay waa la ismuquuninayay, hadba kii taag leh ayaana laga dambeeyay. Waa tii Xaaji Aadan lahaa:

Taariikhda bini aadmigee tirada weyn gaadhey
Wixii taliyey xoog buu ahaa taniyo Haabiile
Marna lama tax-gelinayn daciif toog la joogaba’e

Weli taqiya sheekh taa'ib ah iyo Nebi tansiil keenay
Midna looma tudhin inaan warmaha lagaga tiinbayne
Sharcigaan quwadi tiirinayn meella tegi waaye
Wax taxaaba diintiyo cadliga toobigaannada'e
Gartaan moote taageerahayn tororog weeyaane
Ta qudhay maqlaan waa madfaca maaha tooy hadale
In kastuu mabda'u toosan yahay tamar hadduu waayo
Waxba cadawgu kaagama taro'e taadu waa madhane
Xaqaan taag lahayn lama helo iyo toogo kaa dhimane
Tuuryaaba lala gaadhayaa teenna qaar maqane

—Xaaji Aadan Afqallooc: Taariikhda Aadmiga.

Sidaa oo kale, Axmed Sh. Jaamac:

Hubkaagoo xanuunliyo nimaan xanafi kaa reebin,
Xaa-Miimta kuma joogsadiyo qowl xadiis yidhiye,
Dadku xaaji saahida warkii may xutubiyaane,
Xiska uma dejiyaan waanadii aw xabeebsadaye,
Xabbaddiyo waxaa gala warmuhu xarafkay yeedhshaane.

—Axmed Sheekh Jaamac.

Maganaynta diinta

Diinta inta miciyaha laga siibo, oo awooddii fulin lahayd meesha laga saaro, ayaa nidaam calmaani ahi awooddii la wareegayaa oo diintii muquuninayaa. Waxaa lagu leeyahay diintaada in la caayaa waa xorriyad laakiin inaad khaniisnimada wax ka sheegtaa waa dembi. Mabaadi'daada waxba naga ma galin, laakiin mabaadii'da aan dhigno waad ku qasban tahay.

Nidaamka calmaaniga ahi ma oggola in awooddiisa lala qaybsado, laakiin wuxuu rabaa in uu isagoo awooddii diinta qaato. Calmaaniyaddu waa gaalnimadii oo diinta ka xoog badatay.

> Dantoodu ka sii gun dheer,
> Rugaa dirir saaran yahay
> Waxay u docaynayaan
> Dayaxa u hadhaynayaan
> Dagaar u cagaynayaan
> Inay Run ku duudsiyaan
> Xaqiiqada daah sudhaan
> Adduunyada dooriyaan
> Iyagu u daliil noqdaan.

—Hadraawi: Dabahuwan.

Halkii mushrikiintii Quraysheed lahaayeen sannad ilaahayaga caabud aanu kaaga sannad caabudnee, calmaaniyaddu waa gaalnimadii oo awooddeeda ku

muquuninaysa diinta, kana saaraysa saaxadda.



Islaamku ma aha diin si fudud lagu rujin karo xididdadeeda. Diinta ilaa hadda la loodin waayay ee madaxa taagaysaa waa Islaamka. Kiristaankii maalinba wixii cusub baa loo yeedhiyaa ka dibna maalmo marka lagu shimbira-waaqleeyo ayay aqbalaan iyaga oo gafuurka taagaya.

Sababta Islaamka loo beegsanayaa waa intaas. Waxaa la filayay in marka Muslimiintu la dhaqmaan reer Galbeedka calmaaniga ah, ay Islaamka iska illaawi doonaan. Laakiin waxaa dhacday in Islaamkii ku faafay bulshadii reer Galbeedka, taas oo cabsi weyn ku abuurtay madaxyaweyntii oo ay sidii fiinta u qaylinayaan.

“Ilaahii makhluuqoo dhan iyo, dunidan meegaaray,
Muslinnimo kolkuu soo dejay, ee Maxamed soo saaray,
Ee magaca aan sheeganiyo, midabka noo yeelay,
Ee uu madow nooga dhigay, amase maariinka,
Ee uu mabada'a noogu xidhay, muuminnimo khaas ah,
Wallee inuusan meeqaan xille iyo, meel xun noo dirine,
Ma maroorto suu nala damcay, ee way macaan tahaye,
Mana moogin tuu mudan yahee, mahadnaq weeyaane,
Isagaa Macbuudkii ah oon, magangalaynaaye,
Mana jiro wax kale oo maslaa, muran la'aantiiye,
Rabbigay mid weeye e, kuwii shan u malaynaayey,
Kol haddaanay taanadii maqlayn, Maxamed noo sheegay,
Muraad kama galayno e, sidaa ha iska moodeene.”

—Dhoodaan: Ha Midowdo.

DHAMBAALKA JIMCAHA – 40

07 Rabiicul Thaani 1443
12 Nofembar 2021

SHAN

وَذَرِ الَّذِينَ اتَّخَذُوا دِينَهُمْ لَعِبًا وَلَهْوًا وَغَرَّتْهُمُ الْحَيَاةُ الدُّنْيَا وَذَكِّرْ بِهِ
أَنْ تُبْسَلَ نَفْسٌ بِمَا كَسَبَتْ لَيْسَ لَهَا مِنْ دُونِ اللَّهِ وَلِيٌّ وَلَا شَفِيعٌ
وَإِنْ تَعْدِلْ كُلَّ عَدْلٍ لَا يُؤْخَذْ مِنْهَا أُولَئِكَ الَّذِينَ أُبْسِلُوا بِمَا كَسَبُوا
لَهُمْ شَرَابٌ مِنْ حَمِيمٍ وَعَذَابٌ أَلِيمٌ بِمَا كَانُوا يَكْفُرُونَ ﴿٧٠﴾

Al-Ancaam: 70.

Qof aan diintaba saxnimadeeda aaminsanayn, aayad Qur'aan iyo xadiis Nebina (SCW) aysan qiime ugu fadhiyin, macne samayn mayso in dood diimeed lala galo. Laakiin manhajkiisa aynu wax iska weydiinno. Weliba qaabka uu xadiiska ula dhaqmo aynu eegno.

Culamada Islaamku waxay dejiyeen hannaan heerkiisu aad u sarreeyo oo xadiiska lagu qiimeeyo. Marka la eego culamada xadiiskana, waxaa ugu heer sarreeya xadiiska

ay saxiix ku qiimeeyaan Bukhaari iyo Muslim ee ay qiimayntiisa isku raacaan. Xadiiskaasi waa in uu buuxiyo shuruudo adag si uu u gaadho darajadaas.

Bukhaari iyo Muslimna waxaa sii shuruud adag Bukhaari, oo dadka kala warinayaa waa in ay caddahay in ay kulmeen si uu xadiiskaa ugu diiwaangaliyo kitaabkiisa ku caanbaxay Saxiixul Bukhaari.

Cabdisaciid ina lama wadaagin manhajkiisa ku aaddan qiimaynta xadiiska uu daliishanayo iyo midka uu diidayo. Manhaj cilmi ku dhisan ma laha. Buuggiisi horana sidaas ayuu ahaa. Laakiin marka aan u kuurgalno, waxaa inoo caddaanaysa in uu qiimayn la'aan daliishado xadiisyada uu ka dhex arki karo dooniddiisa ama macnahooda siduu rabo uu u dhigi karo. Kuwa kalana uu ku tilmaamo sheekaxariiro iyo been abuur. Waa la jiifiyaana bannaan. Waa beerka jecli, xaydha jecli.

Xadiisyo ay Bukhaari iyo Muslim warinayaan ayuu marna daliishanayaa oo uu ku soo celcelinayaa, haddana wuxuu sheeko xariiro ku sheegayaa kuwo kale oo isla kutubtaa ku qoran. Wuxuu daliishanayaa mid Caa'isha RC warinayso, mid kale oo ay warinaysana waa uu diidayaa. Waxa uu daliishanayaa Abuu Hurayrah RC dhawr jeer, haddana wuu ka diidayaa kuwo kale. Wax manhaj ah oo rabitaankiisa ka baxsanna ma laha.

أَفَرَءَيْتَ مَنِ ٱتَّخَذَ إِلَٰهَهُۥ هَوَىٰهُ وَأَضَلَّهُ ٱللَّهُ عَلَىٰ عِلْمٍ وَخَتَمَ عَلَىٰ سَمْعِهِۦ وَقَلْبِهِۦ وَجَعَلَ عَلَىٰ بَصَرِهِۦ غِشَٰوَةً فَمَن يَهْدِيهِ مِنۢ بَعْدِ ٱللَّهِ أَفَلَا تَذَكَّرُونَ ﴿٢٣﴾

Al-Jaathiya: 23.

Qaabka uu aayadaha iyo xadiisyada u daliishada waa sidii qof ku doodaya in aan la tukan oo daliishanaya (لَا تَقْرَبُوا الصَّلَاةَ) iyo (فَوَيْلٌ لِّلْمُصَلِّينَ). Runtiina inta badan waxa uu u daliishanayaa waa hoosaasin ee dooddiisu kumaba dhisna kumana dhismi karto daliil diimeed. Dadka ayuu rabaa in uu ku wareeriyo.

وَقَالَتْ طَائِفَةٌ مِنْ أَهْلِ الْكِتَابِ آمِنُوا بِالَّذِي أُنْزِلَ عَلَى الَّذِينَ آمَنُوا وَجْهَ النَّهَارِ وَاكْفُرُوا آخِرَهُ لَعَلَّهُمْ يَرْجِعُونَ ﴿٧٢﴾

Aal-Cimraan: 72.

Tusaale ahaan, maqaalka saddexaad cinwaankiisa u fiirso: (“3. Islaamku Waa Diin Calmaani Ah” [bb.76-]. Markaas ayuu leeyahay: “Waa hubaal, in cinwaanka maqaalkani uu dad badan yaab iyo amakaag ku ridi doono, qaar badanna inta araggooda ka shakiyaan ay ku laba-noqon doonaan akhrintiisa, si ay u shaki baxaan.” [B.77]. Waxa uu soo qaadanayaa xadiisyo uu leeyahay waxay tusayaan in Islaamku calmaani yahay, iyo aayado ka hadlaya in aan dadka diin lagu qasbi karin. Erey o badan oo far Carbeed ku qoran ayaa ku dhex filiqsan, badanaana waa qoraallada calmaaniyiin kale iyo magacyada buugaagtooda. Waxa uu leeyahay saxaabadu way fahansanaayeen in dawladdu tahay calmaani, wuxuuna tusaale u soo qaadanayaa in Cabdullaahi ibnu Cumar RC iyo Abuu Hurayrah RC aysan la kala safan Cali RC iyo Mucaawiya RC! Halkan waxa uu soo daliishanayaa hadal uu yidhi waxaa laga wariyaa Abuu

Hurayrah oo uu leeyahay: "Cali baan ku daba tukadaa waayo salaadda Cali baa wanaagsan, cuntadana waxaan ka cunaa miiska Mucaawiye maxaa yeelay cuntada mucaawiye ayaa macaan badan… [b.84]"

Marka hore warkani waa been laga sameeyay Abuu Hurayrah. Marka labaad, Cabdisaciid sidee u rumaystay in Abuu Hurayrah uu la tukado Cali oo Ciraaq jooga hadhowna u la cunteeyo Mucaawiya oo Dimishiq, Suuriya jooga? Ma wali duuluu ahaa?

Waxa uu intaa raacinayaa in Mucaawiye RC kala saaray diinta iyo dawladda, halkaana uusan ku joogine uu kala saaray diinta iyo nolosha! Taariikhda Cabdisaciid waa yaab soconaya!

Walow uu hore u soo diiday axkaamta fiqiga, haddana waxa uu leeyahay fiqiga Islaamku waa calmaani "ka madax bannaan wadaaddada, [b.87]". Maadaama uu hore Qur'aankii dhinac isaga dhigay, haddana yidhi Nebiga SCW iyo sunnadiisa waynu ka qaangaadhnay oo wuxuu ahaa macallin aynu ka qalinjabinnay kana aqoon iyo waayo-arag badannay, haddana waxa uu leeyahay culamadana waa laga maarmaa oo looma baahna. Sidaas awgeedna, Islaamku waa diin calmaani ah. Maxaa yeelay, "Macnayaasha la siiyo calmaaniyaddana waxaa ka mid in wadaaddada aan looga baahan arrimaha adduunyada, halkaanna waxaanba arkaynaa in xataa ummuuraha diinta iyo cibaadada looga maarmi karo [b.87]."

Diintan uu sheegayaa waa mid noocee ah? Diinta Islaamka ah ee calmaaniga ahi waa middan dhankii loo dhigaba aan diidayn.

"Diintu waa shey la wadaago, sidaa awgeed waxay yeelan

kartaa tafsiir sax ah iyo mid qaldan, laakiin ma yeelan karto mid rasmi ah oo lagu wada khasban yahay qaadashadiisa [b.88]." Fahanka diinta iska daaye, Cabdisaciid waxa uu leeyahay, "sawirka Alle laga haystaa ma aha mid sugan [b.88]."

Aakhirana tolow muxuu ka aaminsan yahay? Mar uu ka hadlayo in diimuhu aysan adduunyada arrimaheeda danayn, aakhiradiina wuu kaga dabo tagay oo waxa uu leeyahay xitaa taas kama midaysna diimuhu, dooddiisu qaabka ay u dhacaysaana waa macnatiridda diinta. Hoosqorka [17] ee b.7 waxa uu ku leeyahay: "Diimaha kala duwani isku si ugama hadlaan nolosha geerida ka dambaysa."

Intaas oo boodh isku qarin ah marka uu soo maray, ee uu soo daliishaday Nebiga SCW oo leh idinkaa arrimaha adduunkiinna iga og, ayuu caqiidadiisi calmaaniyadda u noqday oo uu dooddiisi dhabta ahayd galay.

> "Sida dhabta ah, ma jirto diin iskeed u aqbasha calmaaniyadda… Diimaha oo dhammi marka hore waa diidaan calmaaniyadda, waxayna ku andacoodaan in if iyo aakhiraba iyaga looga danbeeyo, laakiin marka danbe danta ayaa yeelsiisa, goortaasna waxay iska daayaan u hanqaltaagga talada adduunyada, …. Oraahda diinta masiixiga loogu abtiriyo ee sheegaysa in Alle iyo boqorka aan wax la isugu darin ee mid kasta wixiisa la siiyo… ma aha mid masiixiyaddu ay iskeed u jeclaatay, ee danta ayaa badday… Kolkii duruufuhu isbeddeleen, ee bulshadu ku qanacday in caqliga iyo cilmigu ay marjac u noqdaan arrimaha adduunyada, wadaaddada waxaa algu khasbay in ay siyaasadda sixirfuryeeyaan. Waayo? Jinni ninkii keenaa bixiya. [b.88]"

Caqiidada iyo meesha uu ka duulayaa waa tan. Waxba dheg ha u jalaqsiin aayadaha iyo xadiisyada uu ku qasbayo meel aysan lahayn ama uu beenta ka sheegayo. Diintuba agtiisa waxay ka tahay jin ay wadaaddadu keeneen.

Haddaba aynu isaga ka dhegaysanno fasirka waxa uu uga jeedo "Islaamku Waa Diin Calmaani Ah". Waxa uu leeyahay "Sidaa awgeed, marka la leeyahay islaamka ama diin kale ayaa calmaani ah, macnaheedu ma ah in diintaasi ay calmaaniyadda ku bishaaraysay, balse waxaa laga wadaa in diintaasi ay aqbali karto -ana la waafajin karo- calmaaniyadda oo keli ah. Arrinkaas oo mar kale macnihiisu uu yahay in islaamka iyo muslimiintu ay qaadan karaan ku dhaqanka calmaaniyadda, haddii la fahansiiyo in sidaas dantoodu ku jirto -if iyo aakhiraba [b.89]."

Sidee arrintaa loo fulin karaa? Xusuuso dhambaalkii hore inaan ku xusay in waxa loo socdaa ay tahay diinta in booska laga riixdo oo calmaaniyadi ay minbarka fuusho.

"Si taa looga dhabeeyana waxaa lamahuraan ah in dunida islaamka ay ka hanaqaadaan dhaqdhaqaaqyo calmaaniyadda u ol'oleeya oo la tartama islaamiyiinta xagjirka ah ee doonaya in diinta iyo siyaasadda la isku walaaqo [b.89]." Cabdisaciid waxa uu leeyahay waxaad u baahan tihiin "a liberal secular state".

Maxaan ku falaynaa?

> "Ma jiro dal caddaalad, sinnaan, xorriyad iyo horumar ku gaaray diin lagu dhaqay. Diimuhu muwaaddiniinta ma kulimiyaan ee waa kala geeyaan -haddii aan qaanuun xakamayn. Kaalinka calmaaniyadduna waa in qaanuunku

> uu xakameeyo diimaha si aysan xargaha u goosan, oo colaad iyo nacayb u abuurin. Buugta diintu waxay xujo ku tahay cidda rumaysan, muwaadiniintase waxaa xujo ku ah dastuurka iyo qawaaniinta kale ee dalka u yaal [b.90]."
>
> "Dowladdu diin ma leh, buugga qura ee muqaddaska u ahina waa dastuurka dadku ku heshiiyeen, calmaaniyadda macnaheeduna waa in diinta laga duwo siyaasadda iyo dowladda [b.90]."

Iyada oo cinwaanka maqaalku ahaa Islaamku waa diin calmaani ah, haddana bogga ugu dambeeya sidan ayaa ku qoran: "Maxay tahay cadaawadda gaarka ah ee Islaamku uu u hayo calmaaniyadda? Haddii diimaha Buudiya, Hinduusiyadda, Jaynka, Masiixiyadda, Shintaha, Yahuudiyadda iyo kuwo kaleba ay aqbaleen calmaaniyadda, maxaa diidaya in islaamku uu aqbalo calmaaniyadda? Jawaabtu waa waxba. Maxaa yeelay, islaamku kama uu duwana diimaha kale, muslimiintuna kama geddisna aadanaha intiisa kale. Waxa kala duwan marxaladda taariikh ahaan muslimiinta iyo ummahadaas kale ay kala marayaan iyo in islaamka lagu sameeyo dib-u-habaynta diimaha kale lagu sameeyey oo keli ah [b.91]." Yacnii, Islaamku weli ma qaangaadhin oo waa diin bilow ah oo aan badownimadii ka bixin (primitive). Dadka diimaha meel iska dhigay ee calmaaniyadda qaatayna "ugu danbayntii waaqica nolosha ayaa u run sheegay, waxayna ku qanceen in nolosha ummaduhu aysan riyo iyo khiyaali u sii dabranaan karin [b.91]."

Cabdisaciid diintu uga ma duwana "riyo iyo khiyaali" ama "sixir", mana aaminsana in diinta Islaamku ay wax dheer tahay diimaha kale, sidaa aynu kor ku aragno. Mar kalana waxa uu leeyahay, "Laakiin maadaama iimaanka diimuhu uu yahay nooc caashaqa ka mid ah, … Caashaqa iyo rumaynta diimaha midkoodna fahan uma uu baahna, ee wuxuu u baahan yahay in khatar loo bareero oo wax aan la hubin la isu dhiibo [b.194]."

> "Tusaale ahaan, diimaha hinduusiyadda, islaamka, masiixiyadda iyo yahuudiyaddu mid kastaa goonnideeda waxay ugu andacootaa in iyadu ay tahay diinta saxda ah ee dadkeedu ay iimaanka leeyihiin, dadka diimaha kale haystana waxay u aragtaa in ay yihiin gaalo aan iimaan lagu ogayn [b.145]."

> "Waxaa dhici karta in dad ku doodaan in islaamku uu yahay diinta qura ee saxa ah ee xaqa u leh in la faafiyo. Dooddaasi waa dhalanteed dhallaannimo, waayo diimaha waa loo dhashaa ee lama qaato ka dib markii la baaray oo xaqnimadooda lagu qancay. Dadka oo dhammi diintooda waalidkood iyo deegaankooda bay ka dhaxlaan,…[b.194]."

Diintu maadaama ay iska khuraafaadkaa iyo khiyaaligaa tahay, ma jirto sabab loo diido in lagu jeesjeeso. Sidaa awgeedna, "Hadal iyo dhammaanti, qaanuunka ku jeesjeesidda diimaha waa in meesha laga saaraa oo la tirtiraa, maxaa yeelay wuxuu halis ku yahay xorriyadda fekerka iyo halabuurnimada dadka. Waana in lagu beddelaa qaanuun kale oo xarrimaya gaalaynta dadka [b.198]." Agtiisa waa xorriyad feker iyo halabuur in Nebiga SCW la caayo oo

sawirro xun xun laga sameeyo.

Halkaa marka ay marayso, waa gar in la isweydiiyo in Cabdisaciid weli Muslim yahay iyo in uu diinta ka riddoobay.



Dastuur

Hadallada doodda Cabdisaciid gundhigga u ah waxaa ka mid ah:

> "Waa in aan la oggolaan in diinta iyo siyaasaddu ay kulmaan [b.201 ee ugu dambeeya buugga]." Maxaa yeelay, "Dowladdu waxay mudnaanta siisaa danta shacabka, halka diimaha iyo wadaaddadu ay mudnaanta ka siiyaan danta Alle - waa sida ay iyaga la tahaye- [b.146.]"

> "..siyaasaddu inshaa Allaah ku shaqayn, maxaa yeelay doonista Alle kama shaqayn karto siyaasadda iyo maaraynta arrimaha dowladda ee ku dhisan isla xisaabtanka iyo ilaalinta xuquuqda dadka [b.22]."

> "Dimoqraadiyadda calmaaniyaddu wehelisaa waxay ka duushaa in caqligu uu yahay kan saxa ah iyo qaladka lagu kala garto, bulshaduna ay leedahay awoodda ugu sarraysa, halka wadaaddada diimuhu ay samaha iyo xumaha ka eegaan buugga muqaddaska u ah ee ay aaminsan yihiin [bb.173-174.]"

> "Diintu dadka waxay ku qiimaysaa caqiidada ay rumaysan yihiin - oo waxay u qaybisaa Muuminiin, Munaafiqiin, Mushrikiin, Mulxidiin iyo Ahli-kitaab, taa awgeedna xuquuq iyo waajibaad kala duwan bay siisaa Muslimka iyo gaalka, labka iyo dheddiga. Laakiin si taa ka duwan dastuurka dowladaha casriga ahi wuxuu ka duulaa fikradda muwaaddinnimada (=citizenship), sidaa darteedna bulshada kuma kala sooco caqiido ay rumaysan yihiin, iyo lab iyo dheddig midka ay yihiin [b.107]."

> "Muwaadinnimadu waa fikrad cusub [b.141]"

Oo halkee bay ka timid?

> "Ka-hadlidda fikradda muwaadnnimadu waxay jirtey tan iyo markii magaalooyinkii dowladda ahaa ee Giriiggu [A city-state or polis] ay samaymeen, laakiin kacaankii faransiiska ayaa kaalin weyn ka qaatay faafidda fikradda iyo in ay yeelato macneyaal cusub oo aysan hore u lahayn, [b.141]"

Sow ma aragtid in uu cid isaga raran yahay oo waxa uu sheegayaa aysan ahayn wax maankiisa ka soo maaxdaye, lagu soo raray.



Isaga oo halkaa ka duulaya ayuu ina galinayaa dood macnadaran oo dastuurka Soomaaliya ku saabsan. Waxa uu diidayaana waa in ay ku qoran tahay in Islaamku yahay diinta dawladda. Sabab?

> "Goorta dowladdu ay diin go'an sheegato, waxaa meesha ka baxa fikradaha muwaaddinnimada, sinnaanta iyo sarraynta qaanuunka. Waxaana adkaanaya sidii la isu waafajin lahaa xilka dowladdu diinta iska saartay iyo kan ka saaran xuquuqu insaanka ee dowladuhu ay isla qaateen [b.96]."

Haddaynu diin ku dhaqanno, reer Galbeedku raalli inaga ahaan maayaan oo sharciyadii UN-ta ayaynu jabinaynaa! Sida caqliga looga gumeystay waa yaab. Waxa uu leeyahay,

> "Waxaa iyaduna xusid mudan, in muslimiintu aysan aqoon erayga 'xorriyad/الحريـة', wixii ka horreeyey imaanshihii gumeystayaashii reer Yurub [b.138."

Tuduca xigana:

> "Muslimiintu inkasta oo aysan aqoon erayga 'xorriyad', [b.138]"

Caddaalad waxay tahay haddii aynu rabno in aynu barannana tixraacan ayuu ina siinayaa, "Dhigaallad sida quruxda iyo quluudda leh uga hadla mowduuca caddaaladda waxa ugu horreeya buugga John Rawls (1921-2002) ee cinwaankiisu yahay "A Theory of Justice / نظريـة في العدالـة)" [Hoosqor [144] b.138].

Haddii aad moodaysay in Cabdisaciid u socdo arrimo siyaasadeed uun, mar kale ku noqo. Waxa uu rabo in ay calmaaniyaddu ka taliso oo diinta laga saaraa ka weyn intaas:

> "Dastuurka diiniga ahi, si gaar ah wuxuu culays iyo faquuq ugu geystaa haweenka oo bulshada barkeed ah. Sababta oo ah wuxuu saamayn taban ku yeelan karaa qawaaniinta ku saabsan guurka, furriinka, dhaxalka, dharka, dhallaanka, xadaynta dhalmada, gudniinka, soo rididda ilmaha uur ku jira, shaqada, waxbarashada iyo guud ahaan arrimaha la xiriira dumarka iyo noloshooda [b.100]."

Waxa uu leeyahay dastuur waxyi ku salaysan dadka ma midayn karee waa uu kala qaybiyaa: "Muwaadiniinta oo dhan waxaa midayn kara dastuurka caqliga ku salaysan ee ma uu midayn karo dastuur waxyi ka duulaa, [b.103]". Sidaas awgeed wuxuu inagu waaninayaa in aynu wadaaddada ka fogaanno. Muxuu soo daliishaday? Harry Potter. Ka dibna waxa uu yidhi: "Soomaaliyeey! Waa iga digniine, dastuukra [sidaa] iyo dowladda yaan mooro wadaad la galin [b.104]." Diintuba waxay uga dhigan tahay "mooro wadaad".

Cabdisaciid agtiisa diinta iyo qabyaaladdu waa isku mid. Waa in la tirtiraa booskoodana waa in la galiyaa calmaaniyad iyo muwaadinnimo.

> "…diintu dadka waa kala geysaa. Arrinkaasna diintu waxay kala mid tahay qabyaaladda [b.135]."

> "Diimaha iyo guud ahaan caqiidooyinku dadka ma kulmiyaan ee waa kala geeyaan. Si taa ka duwan, aragtida calmaaniyadda iyo muwaadinnimadu xiriir weyn bay wadaagaan, maxaa yeelay mabda'a calmaaniyaddu ka duushaa waa in la tirtiro wax walba oo muwaadiniinta

lagu kala farqiyo, marka lagu daro diimaha iyo madaahibta [b.135]"

U fiirso marka uu leeyahay "waa in la tirtiro". Cabdisaciid waxa uu ku jiraa jihaad calmaani ah oo diinta ka dhan ah.

الَّذِينَ آمَنُوا يُقَاتِلُونَ فِي سَبِيلِ اللَّهِ ۖ وَالَّذِينَ كَفَرُوا يُقَاتِلُونَ فِي سَبِيلِ الطَّاغُوتِ فَقَاتِلُوا أَوْلِيَاءَ الشَّيْطَانِ ۖ إِنَّ كَيْدَ الشَّيْطَانِ كَانَ ضَعِيفًا ﴿٧٦﴾

An-Nisaa': 76.

Cabdisaciid ma oggola in dastuurka Soomaaliya lagu qoro caqiidada dadka Soomaaliyeed ee noloshooda hagta. Laakiin kama uusan hadlin in ay dastuurka Faransiiska ku qoran tahay in dalku yahay calmaani. Waayo sida uu rabo in ka Soomaaliyana lagu qoro.

Walow uu wadaaddada ku caayo aqoon yaraan, "dammiin duunyada oo kale ah iyo damiir laawe danayste ah [b.73]", haddana wax badan oo uu malmaluuqay waxaa ka muuqata aqoondarro badan. Qaabka uu muwaadinnimada uga hadlayo waxa uu ku koobayaa dalalka Galbeedka Yurub iyo intii ka farcantay. Qeexitaankiisa marka la raaco, Shiinuhu ma laha muwaadiniin. Ruushku ma laha muwaadiniin. Afrika iyo Aasiya inteeda badan ma laha muwaadiniin. Waxa uu leeyahay ciddii "raciyad" la dhahaa waa "addoon fulisa wixii la faro oo keliya [b.140]"... "erayga raciyo wuxuu

tusinayaa xoolanimo [b.143]", laakiin ilaa hadda inta boqorrada Ingiriisku ay madaxa u tahay waxaa la dhahaa raciyaddeeda, sharci ahaanna qof kasta oo taladeeda hoos yimaadda, Biritish ha ahaado, Ustaraali ha ahaado, Kanadi ha ahaado,... waxay ahaayeen raciyadda boqoradda ilaa laga gaadhay 1983. Markaas ayaa waxaa soo baxay xeer cusub oo ereyga muwaadin adeegsanaya. Laakiin ilaa hadda hadalka caadiga ah ereyga raciyad (subject) waa la adeegsadaa. U malayn maayo in Ingiriiska iyo Ustaraaliya iyo Kanada dadkoodu ay 1983 ahaayeen addoon iyo xoolo!

Calmaaniyadda iyo dimuqraadiyadda aan shaqada isku lahayn sida uu isugu xidhayaana waa wax aan xaqiiqo ahaan u jirin.

Ingiriisku ma laha dastuur qoran, boqoradda ayaana ah madaxa ugu sarreeya dalka. Sidaas oo kale, boqoraddu waa madaxa ugu sarreeya mad-habta Kiristaan ee ay Ingiriisku haystaan, taas oo ah diinta rasmiga ah ee Ingiriiska. Wadaaddada mad-habtani waxay aqalka sare ee baarlamaanka ku leeyihiin qoondo cayiman, xeerarka dawladdana waa qasab in aqalka sare la mariyo.

Boqoradda Ingiriiska derejooyinka la siiyay waxaa ka mid ah in ay tahay difaacaha diinta ('Defender of the Faith and Supreme Governor of the Church of England'), markii la boqray 1953-diina waxaa boqray wadaadka ugu sarreeya kaniisadda, waxayna ku dhaaratay in ay ilaalin doonto mad-habta Kaniisadda Iglan ("maintain and preserve inviolably the settlement of the Church of England, and the doctrine worship, discipline, and government thereof, as by law established in England"). Iyada ayaa magacawda wadaaddada kaniisadda u taliya, ka dib marka ra'iisal

wasaaruhu u soo gudbiyo magacyada, markaas ayayna wadaaddadu bayco la galaan boqoradda.

Dastuurka Kanada (Boqoradda Ingiriiska ayay hoos yimaaddaan) wuxuu ku bilowdaa: "Whereas Canada is founded upon principles that recognize the supremacy of God and the rule of law:" Kanada waxaa lagu asaasay sarraynta Alle.

Dastuurka Ustaraaliya:

> "WHEREAS the people of New South Wales, Victoria, South Australia, Queensland, and Tasmania, humbly relying on the blessing of Almighty God, have agreed to unite in one indissoluble Federal Commonwealth under the Crown of the United Kingdom of Great Britain and Ireland, and under the Constitution hereby established:
>
> And whereas it is expedient to provide for the admission into the Commonwealth of other Australasian Colonies and possessions of the Queen:
>
> Be it therefore enacted by the Queen's most Excellent Majesty, by and with the advice and consent of the Lords Spiritual and Temporal, and Commons, in this present Parliament assembled, and by the authority of the same, as follows:"

Dastuurka Giriigga qaybtiisa labaad waxay leedahay diinta dalku waa mad-habta Eastern Orthodox Church of Christ. Waxaana madax ka ah Ciise CS.

> "SECTION II
> Relations of Church and State
> Article 3

1. The prevailing religion in Greece is that of the Eastern Orthodox Church of Christ. The Orthodox Church of Greece, acknowledging our Lord Jesus Christ as its head, is inseparably united in doctrine with the Great Church of Christ in Constantinople and with every other Church of Christ of the same doctrine, observing unwaveringly, as they do, the holy apostolic and synodal canons and sacred traditions. It is autocephalous and is administered by the Holy Synod of serving Bishops and the Permanent Holy Synod originating thereof and assembled as specified by the Statutory Charter of the Church in compliance with the provisions of the Patriarchal Tome of June 29, 1850 and the Synodal Act of September 4, 1928.
2. The ecclesiastical regime existing in certain districts of the State shall not be deemed contrary to the provisions of the preceding paragraph.
3. The text of the Holy Scripture shall be maintained unaltered. Official translation of the text into any other form of language, without prior sanction by the Autocephalous Church of Greece and the Great Church of Christ in Constantinople, is prohibited."

Denmark waxay leedahay kaniisad rasmi ah. Finlaan waxay leedahay labo. Norway kaniisad rasmi ah ayay leedahay. Dalka Iskaandineefiyaanka waxaan lahayn Iswiidhan oo beri dhowayd joojisay.

Jarmalka, Holand, Biljam, intaba waxay madaahibta Kiristaanka u qaadaan cashuur, waxay maalgaliyaan

waxbarashada kaniisaduhu bixiyaan, waxay wax ka bixiyaan mushaharka shaqaalaha kaniisadaha. Faransiisku wuxuu maalgaliyaa ilaa 80% dugsiyada kaniisaddu maamusho. Sidaa oo kale dalalkan oo dhan Yahuudda dhaqaale ayay siiyaan.

Laakiin Muslimiintu waxba kuma laha. Haddana waxaaba socota in calmaaniyiintii Muslimiinta ku faquuqaan in Yurub tahay dhul Kiristaan oo leh dhaxal Yahuud-Kiristaan, Muslimiintuna ay tahay inay la qabsadaan ama guuraan.

Waxaa yaab leh in Cabdisaciid ka xanaaqo in dawladdu dhaqaale ku bixiso dhisidda masjid ama xajka iyo wixii la mid ah. Laakiin Faransiisku markii uu gumeysan jiray Sinigaal, duruqda suufiyada waxay siin jireen dhaqaale ay masaajid ku dhistaan, xajkana way ka bixin jireen. Cabdisaciid isagaaba ka xagjirsan Faransiiska.

Dooddiisa isku dhex yaacsan ee aan madax iyo majo kala lahayn, waxa ay hagardaamo ku tahay calmaaniyadda lafteeda. Ma aha dood qodobaysan oo caddaymo iyo tixraac mudan ah wadata e, waa habqan marna bari afka saaraysa marna galbeed guntii iyada oo taagan aad arkaysid, ayna kugu adkaanayso in aad markiiba dhawr bog ka badan akhrisid. Waxa uu qaaday koobka isburinta. Kama xishoonayo in uu sheego been qayaxan. Culamada caydooda iyo aflagaaddayntoodu waa u caadi. Agtiisa waxay ka yihiin "Maafiyada Ruuxda" waana dammiinno jaahiliin ah oo aan xoolaha waxba dhaamin! Laakiin marka isaga laga hadlo wuxuu soo daliishanayaa aayad Qur'aan ah iyo

xadiis oo wuxuu leeyahay ma aha in dadka hadal qallafsan lagu yidhaahdo!

Cabdisaciid waxa uu innagu waaninayaa in aynu diinta iyo siyaasadda kala saarno oo aynu calmaaniyad ku dhaqanno. Sidaas awgeed, waxaan ka sugaynay in uu innoo sababeeyo doonitaankiisa. Maxaynu uga baahan nahay isbeddelkan? Maxay tahay dhibta hadda ina haysata ee ay calmaaniyaddu xalka u tahay?

Innaga oo Soomaali ah, oo 99.9% Muslimiin ah, maxaynu uga baahan nahay calmaaniyad?

Haddii dantu ina baddo calmaaniyad, diintu ma innoo oggoshahay?

Intaa midna kama jawaabayo e, marna Kaatoolig buu ka hadlayaa, mar Faransiis buu ka hadlayaa, mar Hindi buu ka hadlayaa, mar Maraykan buu ka hadlayaa…

Dooddiisuba waa aragtiyaha iyo falsafadda reer Galbeedka. Iyagaa sidaa yidhiye waa inaynu ku dayannaa. Gumeysi maskaxeed oo daran baa ka muuqda. Waxa uu dagaal kula jiraa "wadaaddo" uu leeyahay siyaasadda ayay faraha kula jiraan, iyada oo ay caddahay in uu soo guurinayo dooddii Kiristaanka iyo calmaaniyiinta u dhexaysay ee ku salaysnayd kaalintii kaniisadda Kaatooliggu ay siyaasadda Yurub ku lahaan jirtay. Muslimiin ahaan, weliba Soomaali sunniyiin ahaan, wax inoo yaallaba ma aha oo ma lihin koox wadaaddo ah (clergy) oo u dhiganta kuwa Kaatooligga iyo Boobkooda. Dooddiisuba in aysan hufnayn ee ay minguurin tahay ayaan shaki ku jirin.

Diintu maxay ka qabtaa sababta uusan dan uga lahayn, waa in aysan diinta Islaamku macne gaar ah ugu fadhiyin e, ay ula siman tahay Buudiyada, Hinduusiyada, Kiristaanka, iyo Yahuudiyada, amaba diimo-ku-sheegyada mushrikiinta wixii ay doonaan caabuda.

Diin sax ah oo xaq iyo xaqiiqo ku taagan ma aaminsana, qoraalkana kuma jirto. Taa lidkeed, doodduba waxay ku socotaa "diimaha" oo wadar ah.

Cabsaciid iyo foolxumaynta diinta iyo ceebaynta culimada waxa uu u adeegsanayaa “Pavlovian Conditioning” uu isku sidkayo diintii ama culamadii iyo wax xun. Si qofku marka uu xumaanta uga dido uu wixii la socdayna uga dido. Cidna ma jecla takoor iyo faquuqid. Markaa waxa uu isku xidhayaa diintii iyo takoorkii si uu diinta ugu foolxumeeyo. Waxa uu isku xidhayaa xumaan iyo culamadii Islaamka si akhristuhu u yidhaahdo qori iyo qiiqii waa la isla tuuraa. Waxa uu isku walaaqayaa been iyo run.

Wixii uu rabo qiil uu ku qurxiyo ma waayo, waxa uu diidayana iin uu ku foolxumeeyo (beenna ha ahaatee) uma waayo. Cabdisaciid waa ninka soo daliishanaya boqorkii Akbar ee walaalkii oo ay isqabteen meel dheer ka soo tuuray, markii uu dhiman waayayna yidhi mar kale ha la saaro ee isagu gacantiisa ku tuuray ilaa uu dhintay. Waa ninka xasuuqay Hinduus badan. Cabdisaciid waxa uu inoo sheegayaa in uu qabay 25 dumar ah, kuwo badanna ay ahaayeen Hinduus, oo ilmihiisa la wada bari jiray Qur’aanka iyo Baybalka. Hilibka lo’da muu cuni jirin, sida Cabdisaciid sheegayo. Akbar way jecel yihiin calmaaniyiintu. Waxay yidhaahdaan waa tusaale calmaani Muslin ahaa. Akbar murtad buu ahaa. Waana ninka yidhi waxaan samaynayaa

diin midaysa diimaha oo dhan oo uu u bixiyay Diini Ilaahi. Waa ninka yidhi diintii Islaamka waqtigeedu wuu dhammaaday. Muslimiintii Hindiyana dhibaato weyn ayuu u geystay, welibana wuxuu si gaar ah u rafaadiyay culamadii.

Laakiin hadda isagii baa maqan, Islaamkiina waa joogaa.

شاهت الوجوه.

"Karis-xun iyana ku wax la'."

GUNAANAD

“Ilaahii makhluuqoo dhan iyo, dunidan meegaaray,
Muslinnimo kolkuu soo dejay, ee Maxamed soo saaray,
Ee magaca aan sheeganiyo, midabka noo yeelay,
Ee uu madow nooga dhigay, amase maariinka,
Ee uu mabada'a noogu xidhay, muuminnimo khaas ah,
Wallee inuusan meeqaan xille iyo, meel xun noo dirine,
Ma maroorto suu nala damcay, ee way macaan tahaye,
Mana moogin tuu mudan yahee, mahadnaq weeyaane,
Isagaa Macbuudkii ah oon, magangalaynaaye,
Mana jiro wax kale oo maslaa, muran la'aantiiye,
Rabbigay mid weeye e, kuwii shan u malaynaayey,
Kol haddaanay taanadii maqlayn, Maxamed noo sheegay,
Muraad kama galayno e, sidaa ha iska moodeene.”

—Dhoodaan: Ha Midowdo.